Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf

Al Qurashiyyi Al Zuhriyyi

عبد الرحمن بن عوف القرشي الزهري

Saaxiibka, ina adeerka iyo abtiga Nabi Muxammad,
Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

waana aabaha dhalay

Qabiilka Shaanshida Soomaaliya

Waxaa dhigay Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf

Al Qurashiyyi Al Zuhriyyi

عبد الرحمن بن عوف القرشي الزهري

Saaxiibka, ina adeerka iyo abtiga Nabi Muxammad,
Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

waana aabaha dhalay

Qabiilka Shaanshida Soomaaliya

Waxaa dhigay Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Tusmada Kitaabka

Mawduuca	Boga
1. Tusmada kitaabka	3
2. Aarrata dhigaha kitaabka	5
3. Abtirsiga Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	8
4. Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	8
5. Fadliga/Sarraynta Carabta	13
6. Xadiithka ibnu Cabbaas ee Quraysh	19
7. Murrah bin Kacb ilmihiisa	20
8. Kilaab bin Murrah	20
9. Kilaab ilmihiisa	20
10. Caruurta Zuhrah bin Kilaab	21
11. Dhasha Cabdu Manaaf bin Zuhrah bin Kilaab	21
12. Dhasha Wahb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah	22
13. Dhasha Uhayb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah	25
14. Dhasha Al Xaarithu bin Zuhrah bin Kilaab	25
15. Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf	27
16. Kitaabka Usudu Al Ghaabah	28
17. Abtirsiga Cabdu Al Rarxmaanu bin Cawf	28
18. Dhalashadiisa iyo islaamiddiisa	28
19. Jihaadkiisa	29
20. Deeqihiisa uu dadka dheer yahay	29
21. Dhawrsanaantiisa intuu dan yarta ahaa	31
22. Siduu Cuthmaan u doortay	33
23. Hodannimadiisa iyo deeqsinnimadiisa	33
24. Kitaabka Dhabaqaatu ibnu Sacd	34
25. Caruurta ina Cawf	35
26. Nabigaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gadaashiisa ku tukaday	36
27. Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Jibriil iyo ina Cawf	38
28. Runlowga baarriga ah	39
29. Ilaalintiisa haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	40
30. Xiriirintiisa qaraabada	40
31. Ina Cawf iyo Asxaabu Al Sh-shuuraa	41
32. Saciidnimada u hormartay	42
33. Kitaabka Siyaru Aclaamu Al Nnubalaa'i	43
34. Wuu diiday inuu khaliifo noqdo	47
35. Kitaabka Al Rriyaadu Al Nnadirah	47
36. Xiriirintiisa haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	48
37. Cilmigiisa	49
38. Tawaaduciisa Ilaahay: isu jejebintiisa	50
39. Ina Cawf iyo ilmo Al Cafraa'u Maalinta Badar	50
40. Caruurta ina Cawf	50
41. Umulisada hooyada Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam	52
42. Banii Zuhra Badar kama qayb gelin Badar	52
43. Ina Cawf, Bilaal iyo Umayyah bin Khalaf iyo wiilkiisa Calii	53

44. Ragga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Uxud ku haray 55
45. Dhaawacyada ina Cawf Uxud ku gaaray 57
46. Ina Cawf iyo Khaalid bin Al Waliidu 57
47. Duullaanka ina Cawf ee Duumatu Al Jandal 58
48. Amiirnimada ina Cawf iyo cimaamadda loo duubay 60
49. Ibnu Cawf iyo talada Cumar 61
50. Khudbada Cumar ee doorashada Abuu Bakr 62
51. Beerta Saqiifatu Banii Saacidah 68
52. Dhimashada ina Cawf 71
53. Kitaabka “Al Isaabah” ee Ibnu Xajar 72
54. Al Qaffaalu Al Sh-shaashii 73
55. Shaanshi waa Al Shaash 76
56. Kitaabka Shariif Caydaruus Shariif Calii 76
57. Naska Carabiga ee Shariif Caydaruus 82
58. Taariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan 86

بسم الله الرحمن الرحيم

Hordhaca dhigaha kitaabkaan

الحمد لله رب العالمين، والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Kitaabkaan Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waxaan u hadiyeeyey Saxaabigaas wayn, Allaha raalli ka noqdee, iyo dhashiisa, gaar ahaan reer Sheekh Suufi meel kastaba adduunkaan maanta ha ka degganaadaane. Sheekh Suufi wuxuu allifay waxaa ka mid ahaa qasiido Siirada iyo ammaanta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo la yiraahdo Shajaratu Al Yaqiini**شجرة اليقين**.

Kaddib waxaa qasidadaas kitaab ku dhigay oo sharxay faallana ku daray Sheekha ah Axmad Cuthmaan Muxammad Al Sh-shaashii Al Maqdishii **الشيخ أحمد عثمان محمد الشاشي المقدشي**.

Kitaabkaas wuxuu u bixiyay Jawaahiru Al Baxri Al Maciini Sharxu Al Qasiidati Al Llaamiyati Shajarata Al Yaqiini ixdaa qasaa'idi diiwaani Al Shaykhi Cabda Al Rraxmaani Suufii Al Sh-shaashii Al Maqdishii al musammaa (Daliilu Al Cibaadi ilaa Sabiili Al Rrashaadi) **جواهر البحر المعين شرح القصيدة اللامية شجرة اليقين أحدى قصائد ديوان الشيخ عبد الرحمن صوفي الشاشي المقدشي المسمى (دليل العباد إلى سبيل الرشاد)"**.

Kitaabkaas waxaa lacagta lagu daabacay sadaqo ahaan u bixiyay Al Shayku Muxammad Axmad Maxmuud (Sheekh Abaa) Al Sh-shaashii Al Maqdishii **الشيخ محمد أحمد محمود (شيخ أبا) الشاشي المقدشي** sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sideetan miilaadiga, waana kitaab saddex boqol iyo lix bog ka kooban.

Hordhaca kitaabkaas wuxuu Sheekha ah Axmad Cuthmaan Muxammad Al Sh-shaashii Al Maqdishii**الشيخ أحمد عثمان محمد الشاشي المقدشي** ku yiri waxaa ka mid ah inuu xusay nasabka Sheekh Suufi, wuxuuna yiri:

oo la wada **الشيخ العلامة الولي المشهور** "waa Al Shaykhu Al Callaam Al Waliyyu al mashuur oo koofaartiisu tahay Sheekh Suufi bin Al **عبد الرحمن**yaqaanno Cabda Al Rraxmaani Shaykh Cabdu Allaahi bin Al Shaykh Muxammad bin Al Shaykh Cabdu Allaahi bin Imaanki Abii Bakr bin Calii bin Xaramayni bin Xaaji Yuusuf bin Al Shaykh Ubaalaa bin Cumar bin Shaykh Muxammad bin Mucallim Cumar bin Al Faqiih Qaasim bin Al Faqiif Ismaaciil bin Al Faqiih Xaaji Yuusuf bin Al Faqiih Muxammad bin Al Faqiih Cumar Muxyii Al Ddiini bin Al Faqiih Axmad bin Al Faqiih Qaasim bin Abii Bakr Al Qaffaal Al Sh-shaashii **ألشيخ صوفي بن الشيخ عبد الله بن الشيخ محمد بن الشيخ عبد الله بن إمانك أبي بكر بن علي بن حرمين بن حاج يوسف بن الشيخ أبالى بن عمر بن الشيخ محمد بم معلم عمر بن الفقيه قاسم بن الفقيه إسماعيل بن الفقيه الحاج يوسف بن الفقيه محمد بن الفقيه عمر محيي الدين بن الفقيه أحمد بن الفقيه قاسم بن أبي بكر القفال الشاشي**

oo magaciisu yahay

:

Muxammad bin Calii bin Ismaaciil bin Axmad bin Muusaa bin Jadcah bin Maymuun bin Cuthmaan bin Caasim bin Cabdu Al Rraxmaanu bin Muslim bin Daauud bin Sulaymaan bin Ibraahiim bin Jibriil bin Asad bin Cuthmaan bin Qaasim bin Muxammad bin **Cabdu**

Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabda Al Cawf bin Xaarith bin Zuhrah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr bin Maalik bin Al Nadr bin Kinaanah bin Khuzaymah bin Mudrikah bin Ilyaas bin Mudar bin Nizaar bin Macadd bin Cadnaan **محمد بن علي بن إسماعيل بن أحمد بن موسى بن جدعة بن ميمون بن عثمان بن عاصم بن عبد الرحمن بن مسلم بن داود بن سليمان بن إبراهيم بن جبريل بن أسد بن عثمان بن قاسم بن محمد بن عبد الرحمن بن عوف بن عبد العوف بن حارث بن زهرة بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر بن مالك بن النضر بن كنانة بن خزيمة بن مدركة بن إلياس بن مضر بن نزار بن معد بن عدنان**.

Wuxuu sidaas abtirsiga Sheekh Suufi ku galay kan sayyidkeenna Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** , kaddibna uu sii sare maray oo uu nasabka sarreeya ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, galay.

Waxaan kaloo aragnay inuu nasabkiisu galay midka Abuu Bakr Al Qaffaal Al Sh-shaashii**أبوبكر القفال الشاشي** oo ka mid ah a'immada Math-habka Al Sh-shaaficii **من أئمة الشافعية** ee waawayn, taasoo sabab u ahayd inuu Sheekh Suufi ku xeel dheeraado cilmiga Fiqiga. Wa al xamdu li Allaahi. (hoos ayaan wax uga sheegi doonnaa siirada Al Qaffaal**القفال** inshaa'a Allaahu**\إن شاء الله**).

Sheekh Suufi wuxuu ku dhashay Muqdisho, dhalashadiisana waxaa ka horreeyey arrimo ku bishaareeyey dhalashadiisa.

Waxaa la sheegay inay afar nin oo u dhashay Shiikhaal Looboge oo ka mid ah suufiyiinta waawayn ay hooyadiis u yimaadeen Al Sayyidah Khadiijah Axmad Xiltir.

Markaasay karaameeysay, ay si fiicanna u marti soortay, mid walboo ayagana ka mid ahna waxay siisay waxa la yiraahdo al shaqqati al maqdishiyyah**\الشقة المقدشية** . Markaasay khayr ugu duceeyeen iyo inuu Ilaahay siiyo wiil suuban oo makaankiisu kor yahay, darajadiisuna ay sarreyso kana mid ah awliyada.

Waxaad mooddaa inuu raggaasu uba yimid inay u bishaareeyaan, oo isla markiiba waxay qaaday uurkiisa, kaddibna ay Sheekh Suufi dhashay.

Wuxuu cilmiga ka bartay shuyuukh ay ka mid yihiin Sheekh Muxammad Diinlow iyo Sheekh Abuu Bakar Al Muxdaar**\الشيخ أبوبكر المحضر** iyo kuwa kaleba.

Kaddibna isagaa dadka cilmiga masjiyada ku bari jiray, dadka cilmiga iyo axkaamta ka qaatayna waxaa ka mid ah Qaalli Muxyi Al Ddini Mucallim iyo Sheekh Cabdu Al Rraxmaan Axmad Ghawlaa iyo labadiisa walaal Sheekh Muxammad Cuthmaan Macaw iyo Sheekh Muxammad Faqiih Yuusuf Al Sh-shaashii iyo Sheekh Qaasim Al Baraawii iyo Sheekh Cabdu Allaahi Qudhbii al Jigjigaawii ee Shiikhaasha Qudhub ah iyo kuwa kaleba.

Sheekh Suufi Muqdisho ayuu ku dhintay maalinta sagaal iyo labaatan ee bisha Safar ee sanadka Hijriga ah ee kun saddex boqol saddex iyo labaatan, oo ah mar sanadkaan kun iyo afar boqol iyo sideed iyo labaatan laga joogo boqol iyo shan sano. Allaha u naxariisto Sheekh Suufi.

Waxaa qoraalkaan la socda masawir bogga koowaad ee kitaabka bixiyay Jawaahiru Al Baxri Al Maciini Sharxu Al Qasiidati Al Llaamiyati Shajarata Al Yaqiini ixdaa

qasaa'idi diiwaani Al Shaykhi Cabda Al Rraxmaani Suufii Al Shaashii Al Maqdishii al musammaa (Daliilu Al Cibaadi ilaa Sabiili Al Rrashaadi) **جواهر البحر المعين شرح القصيدة اللامية شجرة اليقين أحدى قصائد ديوان الشيخ عبد الرحمن صوفي الشاشي المقدشي المسمى (دليل العباد إلى سبيل الرشاد)"**, iyo muqaddamada ama hordhaca uu raaciyay Axmad Cuthmaan Muxammad Al Sh-shaashii Al Maqdishii**أحمد عثمان محمد الشاشي المقدشي.**

Kitaabkaas waxaa lacagta lagu daabacay sadaqo ahaan u bixiyay Al Shayku Muxammad Axmad Maxmuud (Sheekh Abaa) Al Sh-shaashii Al Maqdishii **(شيخ محمد أحمد محمود الشاشي المقدشي أبا)** sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sideetan miilaadiga.

Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbalo, qofka akhristana uu ku anfaco, ajarkiisana uu ina Cawf**إبن عوف** iyo dhashiisa siiyo.

Kitaabkaani waa nicmuu Ilaahay igu galladeystay, waxa qalad ah oo ku jirana waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydhaan.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,
Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Columbus, Ohio, arliga maraykanka
Maalin Khamiis ah , afar iyo labaatanka bisha Jamaadu Al Aakhirah**جماد الآخرة** ee sanadka kun iyo afar boqol iyo shan iyo soddon Hijriga, una dhigantah afar iyo labaatanka Abriile laba kun afar iyo toban Miilaadiga.

بسم الله الرحمن الرحيم

Abtirsiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Abtirsiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam**,** waa sidatan:
Magaciisa: Muxammad**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Aabihiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Cabdu Allaahi**عبد الله**.
Awoowihiis Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Cabdu Al Mudh-dhalib**عبد المطلب**, magaciisuna waa Shaybah.
Awoowihiisa labaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Haashim**هاشم**, magaciisuna waa Camr**عمرو**.
Awoowihiisa saddexaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Cabdu Manaaf **عبد** **مناف**, magaciisuna: Al Mughiirah**المغيرة**.
Awoowihiisa afaraad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Qusayy**قصي**, magaciisuna: Zayd**زيد .**
Awoowihiisa shanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Kilaab**كلاب**.
Awoowihiisa lixaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Murrah**مرة**.
Awoowihiisa toddobaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Kacb**كعب**.
Awoowihiisa sideedaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Lu'ayy**لؤي**.
Awoowihiisa sagaalaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Ghaalib**غالب**.
Awoowihiisa tobnaadaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Fihr**فهر**, magaciisuna waa Quraysh**قريش**.
Awoowihiisa kow iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Maalik**مالك**.
Awoowihiisa laba iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Al Nnadru**النضر**.
Awoowihiisa saddex iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Kinaanah**كنانة**.
Awoowihiisa afar iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Khuzaymah**خزيمة**.
Awoowihiisa shan iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Mudrikah **مدركة**, magaciisuna: Caamir**عامر**.
Awoowihiisa lix iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Ilyaas**إلياس**.
Awoowihiisa toddoba iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Mudar**مضر**.
Awoowihiisa sideed iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Nizaar**نزار**.
Awoowihiisa sagaal iyo tobanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Macadd**معد**.
Awoowihiisa labaatanaad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Cadnaan**عدنان**.

Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo kooban

Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo aan kasoo tarjumay kitaabka "Kitaabu al sh-shajarati Al Nabawiyyati fii Nasabi Khayri Al Bariyyati **كتاب الشجرة النبوية في نسب خير البرية\,** Sallaa Allaahu Calayhi wa calaa Aalihi Wasallam, uuna fiiriyay oo uu dhammaystiray Al Imaamu Jamaalu Al Ddini Yuusuf bin Xasan bin Cabdi

Al Haadii Al Maqdisiyyi, al macruufu bin ibni Al Mubrad **الإمام جمال الدين يوسف بن حسن بن عبد الهادي المقدسي، المعروف بابن المبرد**, oo noolaa inta u dhexeysay sideed boqo iyo afartan ilaa sagaal boqol iyo sagaal Hijriga. Magaca Kitaabka macnihiisu waxaa weeye "Kitaabka geedka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, geedkaasoo ah geedka nasabka khayru al bariyyah**خير البرية** oo ah inta uu Ilaahay abuuray midka ugu khayr badan."

Ibnu Al Mibrad**إبن المبرد** qoyskiisa waxaa la yiraahdaa Banuu Qudaamah**بنوقدامة** nasabkooduna wuxuu galaa oo ku dhammaadaa Saalim bin Cumar bin Al Khdh-dhaab**سالم بن عمر بن الخطاب,** Allaha raalli ka noqdee.

Kaddib waxaa dhawr sano ka hor kitaabkaan hadana hubiyay oo xaqiijiyay oo faallo ku daray shiikha la yiraahdo Muxyii Al Ddini Mistuu**الشيخ محيي الدين مستو** oo macallin ka ah jaamacadda Dimashqa**دمشق** dalka Suuriya**سورية,** oo ku daabacay magaalada Dimishiq**دمشق** madbacad uu leeyahay isaga walaalkiisa la dhashay kun afar boqol afar iyo tobanka Hijriga, una dhiganta kun sagaal boqol saddex iyo sagaashanka.

Muxyii Al Ddiini Mistuu**الشيخ محيي الدين مستو** waa isla sheekha sharxay oo ka qayb qaatay sharaxa afartanka Xadiith ee Imaamu Al Nawawii**الأربعون النووية للإمام النووي** soona saaray kitaabka la yiraahdo Al Waafii fii sharxi al arbaciina Al Nawawiyyah **الوافي في شرح الأربعين النووية** oo ay wada dhigeen isaga iyo Doktoor Musdhafaa Al Bughaa**د\مصطفى البغا,** ahna kitaab aad u qiimo badan oo guri walba oo muslin ah looga baahan yahay. Kitaabkana waxaan kasoo qaadannay inta soo socota:

Muxammad**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi wa Sallam tasliiman kathiiran. Nabi Muxammad, Salla llaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhashay caamu al fiili**عام الفيل,** sanadka maroodiga maalin isniin ah oo ay laba iyo toban habeen ka gudbeen bisha Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** .

Aabihiis, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la oofsaday isagoo laba bilood jira. Waxaa kaloo la yiri waxaa la oofsaday isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam markaas hooyadiis uurkeeda ku jira.

Waxaa nuujisay Xaliima bintu Abii Thu'ayb Al Ssacdiyyah**حليمة بنت الذؤيب السعدية,** wuxuuna agteeda ku sugnaaday, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu reer Banii Sacd**بني سعد** la sugnaaa oo la degganaa afar sano, waxayna hooyadiis u soo celisay marka qalbigiisa inta la soo bixiyay la dhanbalay, waxaana halkaas ku jirta qisada labadii malag oo u timid Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo uurkiisa dhanbashay.

Hooyadiis waxay u kexeysay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah**المدينة** ayadoo booqanaysa reer abtigiis. Markaasaa waxaa lagu oofsaday tuulada la yiraahdo Al Abwaa'**الأبواء** ayadoo Makkah**مكة** kusoo noqonaysa oo ku soo soscota. Markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu jira lix sano iyo saddex bilood iyo toban maalmod. Qabrigeeduna halkaas ayuu ku yaalla oo la yaqaannaa, caanna uu ku yahay. Marka hooyadiis la duugay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa soo qaaday Ummu Ayman**أم أيمن** oo Makkah**مكة** keentay, shan maalmood kaddib marka hooyadiis la oofsaday.

Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب waxaa la oofsaday isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam Nabigu uu sideed sano jiro. Awoowihiis Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد المطلب wuxuu kala dardaarmay wiilkiisa Abuu Dhaalib\أبوطالب, kaasoo uu goob joog la ahaa oo kala qayb galay dagaalka Xarba Al Fijjaari\حرب الفجار, isagoo markaas, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, labaatan sano jira, waxaana kaloo la yiri intaas ka yar ayuu jiray.

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam adeerkiis Abuu Dhaalib\أبوطالب u raacay Shaam\الشام , waana dalka Suuriya\سوريا maanta la yiraahdo isagoo laba iyo toban sano jira.

Wuxuu kaloo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Shaam\الشام ugu safray isagoo hoggaaminaya safar ganacsi oo ay leedahay Khadiijah bintu Khuwaylid\خديجة بنت خويلد, Allaha raalli ka noqdee, isaguna uu markaas shan iyo labaatan sano jiro. Waxaana safarkaas la socday addoon ay Khadiijah\خديجة leedahay oo magaciisa Maysarah\ميسرة la yiraahdo.
Laba bilood iyo ayaamo safarkaas dabadiis ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Khadiijah\خديجة guursaday.

Kacbada ayaa dib loo dhisay isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam shan iyo sodoon sano jira, Qurayshna\قريش waxay raalli ku noqotay xukunkiisa sida Xajarul Aswaadka\الحجر الأسود meeshiisa dib loogu celin lahaa.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa jiniiga iyo insigaba loo soo diray isago afartan sano jira. Adeerkiis Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Abuu Dhaalib \أبوطالب waxaa la oofsaday isagoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kontonkii sano ku dhowaaday. Khadiijana\خديجة waxaa la oofsaday saddex maalmood Abuu Dhaalib\أبوطالب dabadiis. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu sanadkaas ku magacaabay Caamu Al Xuzni\عام الحزن oo ah sanadka tiiraanyada, aydoo uu Abuu Dhaalib\أبوطالب ka ilaalin jiray kuwa dhibaya oo dhibaatada la doonaya markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dariiqa usoo baxo oo uu magaalada joogo oo uu gurigiisa kasoo baxo, Khadiijana\خديجة way rumayn jirtay markuu gurigiisa usoo noqdo kaddib markii dariiqyada lagu beeniyay, waxayna ka bogsiin jirtay oo ay ka daawayn jirtay oo ay kasii jeedin jirtay waxa lagu falo, waxayna tiraahdaa:
"run ahaan, xaq ahaan adigu waxaad tahay Rasuulka Ilaahay", Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wa calaa Aalihi al dhayyibiina al dh-dhaahiriina wa radiya Allaahu cani al ttabiciina waa taabici al ttabiciina bi ixsaanin ilaa yawmi al diini صلى الله عليه وسلم وعلى آله الطيبين الطاهرين ورضي الله عن التابعين وتابعي التابعين بإحسان إلى يوم الدين\, oo ah isaga iyo qoyskiisa, qoyskiisaas dhayyibiinta fiican ah oo daahirka ah, Ilaahyna raalli ha ka noqdo kuwii raacay oo taabiciinta ahaa iyo taabiciinta kuwii raacay oo ayaga ka dambeeyey oo ku raacay wanaagga ilaa yawmu al qiyaamaha, oo dadka raacay oo dhan Allaha raalli ka noqdo.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam loo dheelmiyay Baytu Al Maqdis\بيت المقدس isagoo al buraaq\البراق saaran, Samaawaatkana waxaa kor loogu qaaday, waana

micraajkee\المعراج oo micraaj\معراج macnihiisu waxaa weeye kor u bixidda isaga ruuxiisa iyo jirkiisaba isagoo soo jeeda oo aan hurdin isla habeenkaas Baytu Al Maqdis\بيت المعدس loo dheelmiyay. Habeenkaasna wuxuu ku beegan yahay hal sano iyo nus kaddib markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Makkah\مكة kusoo noqday ayadoo uu saddex bilood kaddib marka Khadiijah\خديجة la oofsaday uu magaalada Al Dh-dhaa'if\الطائف u baxay, kaddibna uu Makkah\مكة kusoo noqday, Allaha Khadiijah\خديجة raalli ka noqdee.

Kaddibna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuu haajiray oo wuxuu ka haajiray Makkah\مكة oo u haajiray Al Madiinah\المدينة isagoo ay la socdaan saaxiibkiis Abuu Bakar Al Siddiiqu\أبوبكر الصديق iyo Caamir bin Fuhayrah\عامر بن فهيرة, Allaha raalli ka noqdee, iyo Cabdu Allaahi bin Urayqadh\عبد الله بن أريقط.

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam firaashkiisa ama gogoshiisa Makkah\مكة uga soo tegay Calii\علي, Allaha raalli ka noqdee, si uu dadka lahaa dib ugu celiyo wadiicooyiin\وديعة ama amaanooyin isaga Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu ammaanaystay oo agtiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la dhigtay, daymanna uu bixiyo, kaddibna uu ka daba tago.

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hijrooday isagoo cumrigiisu saddex iyo konton sano (oo gaw ah) yahay. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah\المدينة soo galay maalin isniin ah oo ay laba iyo toban habeen ka gudbeen bisha Rabiicu Al Awwal\ربيع الأول, maalintaasoo taariikhda laga bilaabo, kaddibna bisha Muxarram\محرم loo xawilay oo ah bisha koowaad ee sanadka islaamka.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu oofsaday Al Madiinah\المدينة, kaddib markuu ku sugnaaday oo uu degganaa toban sano iyo laba bilood. Makkana\مكة wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku sugnaa saddex iyo toban sano.

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam adduunkaan ka tegay maalin isniin ah oo dayaxa bisha Rabiicu Al Awwal\ربيع الأول uu muuqday ee sanadka afar iyo lixdanaad ee caamu al fiili\عام الفيل , hijradana ay kasoo wareegeen kow iyo toban sano, isaguna uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saddex iyo lixdan sano iyo saddex bilood jiro (kutubbada kalena waxay wariyeen inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam saddex iyo lixdan sano oo gaw ah jiray).

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam lagu duugay guriga Caa'ishah\عائشة, Allaha raalli ka noqdo siiyana waxay ayaduna raalli ku noqotee, waxaana dhaqay Calii bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب iyo Al Fadlu bin Al Cabbaas\الفضل بن العباس kaasoo, waa Caliye\علي, laabtiisa kusoo qabtay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Cabbaasna\العباس uu biyaha ku shubayo isagoo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dharkiisa qabo, oo aan dharkiisa laga siibin.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku tukaday Jibriil\جبريل Calayhissalaamu oo tujinaya malaa'igta Ilaahay Cazza wa Jalla\الله عزوجل. Kaddibna waxaa ku tukaday Ehelu Baytkiisa\أهل بيته Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo ah qoyskiisa.

Kaddibna waxaa ku tukaday dadka oo kooxo kooxo ugu tukaday.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu duulay sagaal iyo toban ghazwo**غزوة ,** waxaa kaloo la yiri lix iyo labaatan duullaan.

Duullaannada uu isaga laftiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gacantiisa ku dagaallamayna waxaa weeye sagaal ghazwo**غزوة.**

Al Madiinah**المدينة** kama uusan soo inuu soo xajiyo oo sooma xajjiyin Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waxaa ahayn xajjatu al wadaaci**حجة الوداع** ee sanadka tobanaad ee hijrada ahaa.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la duugay habeen arbaco ah, oo ah maalinta saddexaad ee maalinta la oofsaday Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintaas la oofsadayna ay tahay maalin isniin ah.

Waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku tukaday Al Cabbaas**العباس** iyo Calii**علي** oo reer Banii Haashim**بني هاشم** hoggaaminaya.

Kaddib waxaa soo galay Muhaajiriinta**المهاجرين** iyo Ansaarta**الأنصار** kaddibna dadka, oo qofna uusan salaaddaas imaam qof kale ugu noqon, oo qof walba isagaa salaaddiisa tukanaya oo imaam ma jirin.

Kaddibna waxaa soo galay haweenka, kaddibna caruurta. Maalintaas waxay la mid ahayd yawmu al qiyaamaha**يوم القيامة** marka la fiiriyo xagga dhibaatadeeda iyo naxdinta iyo boohinta Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam loo booyayey, oo tegiddiisa laga naxayay oo ay tegiddiisu dadka wax wayn ku ahayd.
Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay, dambiyadooda Allaha dhaafee.

Fadliga/Sarreynta Carabta\فضل العرب

Wuxuu Bukhaarii/البخاري Abuu Hurayrah/أبو هريرة ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"بعثت من خير قرون بني آدم، قرنا فقرنا حتى كنت من القرن الذي كنت منه."

"Bucith-tu min khayri quruuni banii Aadama, qarnan fa qarnan xattaa kuntu mina al qarni allathii kuntu minhu ".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waxaa la iga soo saaray facaha, ubadka Aadan kooda ugu khayr badan, facba midka ku xigah, ilaa aan ka ahaaday faca aan ka ahaaday."
Qarni waa ama boqol sano ama hal fac ama hal jiil.
Muslim/مسلم wuxuu ka wariyay Waathilatu ibnu al Asqac ibnu Cabdu al Cuzzaa al Kinaanii al Llaythii/واثلة بن الأسقع إبن عبد العزى الكناني الليثي , saxaabiga ehelu al Suffah أهل الصفة/ ka midka ahaa, duullaanka Tabuuk-na/غزوة تبوك ka qayb galay oo dhintay sanadka Hijriga ee shan iyo sideetan isagoo sideed iyo sagaashan jir ahaa, inuu yiri inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الله إصطفى كنانة من ولد إسماعيل، وإصطفى قريش من كنانة، وإصطفى من قريش بني هاشم، وإصطفاني من بني هاشم."

"Inna Allaaha isdhafaa Kinaanata min waladi Ismaaciila, wa isdhafaa Qurayshan min Kinaanata, wa isdhafaa min Qurayshin Banii Haashima, wa isdhafaanii min banii Haashima".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ilaahay wuxuu dhashay Ismaaciil ka dhexdoortay Kinaanata\كنانة -oo ah qabaa'i1 Carbeed oo ku abtirsada Kinaanatu bin Khuzaymatu/كنانة بن خزيمة oo ah awoowaha saddex iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- Kinaanah-na wuxuu ka dhex doortay Quraysh/قريش. Qurayshna wuxuu ka dhex doortay Banii Haashim/بني هاشم, aniguuna iga dhex doortay reer Banii Haashim/بني هاشم."

Riwaayada Al Tarmathi-na/الترمذي ee Xadiithkaan, oo uu isaguna wariyay, waa sidatan:

"ان الله اصطفى من ولد ابراهيم اسماعيل واصطفى من ولد إسماعيل بني كنانة واصطفى من بني كنانة قريشا."

"Inna Allaaha isdhafaa min waladi lbraahiima Ismaaciila, wa isdhafaa min waladi Ismaaciila Banii Kinaanah, wa isdhafaa min Banii Kinaanah Qurayshan".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ilaahay wuxuu dhasha Ibraahiimابراهيم ka doortay Ismaaciilإسماعيل , wuxuuna dhasha Ismaaciil ka doortay Banii Kinaanah\بني كنانة, Banii Kinaanah-naبني كنانة wuxuu ka dhex doortay Quraysh\قريش."

Ibnu Sacad/**إبن سعد** wuxuu ku ziyaadiyay Xadiithka mursalka ah ee abii Jacfar Al Baaqir/**أبي جعفر الباقر:**

"ان الله اصطفى من ولد ابراهيم اسماعيل واصطفى من ولد اسماعيل بني كنانة واصطفى من بني كنانة قريشا، ثم إختار بني هاشم من قريش، ثم إبن عبد المطلب من بني هاشم."

"Thumma ikhtaara Banii Haashim min Qurayshin, thumma ibna Cabdu Al Mudh-dhalib min Banii Haashim"
oo Xadiithka macnihiisu uu yahay: "Kaddibna wuxuu Quraysh**قريش** ka dhex doortay Banii Haashim**بني هاشم,** kaddibna wuxuu reer Banii Haashim**بني هاشم** ka dhex doortay dhasha Cabdu Al Mudh-dhalib**عبد المطلب".**

Xadiithkaan kore oo ay Muslim/**مسلم** iyo al Tarmathii/**الترمذي** wariyeen, wuxuu caddeynayaa fadliga iyo deeqda uu Ismaaciil/**إسماعيل** dheer yahay dhasha Ibraahiim/**إبراهيم** intooda kale, uuna Isxaaq/**إسحاق** ka mid yahay, oo uu Ilaahay, sidaas, Carabta uga kormariyay cajamta.

Ibnu Taymiyyah/**إبن تيمية** wuxuu yiri:
"Fadligaas uu Carabta siiyay, dabadeedna Quraysh/**قريش,** kaddibna reer Banii Haashim/**بني هاشم,** ma aha oo keli ah inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayagaan ka dhashay, in kastoo kaasi qayb fadliga iyo sarreyntooda ka mid ah tahay, ee waxaa weeye inay ayagu laftooduba inta kale ka sarreeyaan, marka la fiiriyo akhlaaqda kariimka ah oo ay leeyihiin iyo tilmaamaha xamiidka ah oo la mahdiyo oo ay leeyihiin, iyo afkooda Carabiga.".
Wuxuu yiri: "Sidaas ayay ugu sugnaatay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inuu ugu sarreeyo naf ahaan iyo nasab ahaanba."

Ibnu Sayyidu al Nnaasi/**إبن سيد الناس** wuxuu wariyay Xadiith Camr bin Al Caas **عمرو بن العاص**/ laga wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ان الله اختار العرب على الناس واختارنى على من انا منه ثم انا محمد بن عبد الله حتى بلغ النضر بن كنانة ثم قال: فمن قال غير هذا فقد كذب."

"Inna Allaaha ikhtaara Al Caraba calaa al nnaasi, wa ikhtaaranii calaa man anaa minhu, thumma anaa Muxammadun bin Cabdu Allaahi..." xattaa balagha Al Nadr bin Kinaanah, thumma qaala: **"fa man qaala ghayra haathaa fa qad kathaba.** "
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ilaahay Carabta ayuu dadka ka dhex doortay, aniguuna iga dhex doortay kuwaan ka dhashay. Kaddibna anigu waxaan ahay Muxammad bin Cabdu Allaahi**محمد بن عبد الله**..." ilaa uu ka gaaray Al Nadr bin Kinaanah**النضر بن كنانة** , oo ah awoowaha laba iyo tobnaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kaddibna wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:
"Qofkii yiraahdaa intaas wax ka duwan been ayuu sheegay".

Al Imaamu al xaafith Fatxu al Diini abuu Al Fatx Muxammad bin Sayyidu Al Nnaasi al Shaafici, **الإمام الحافظ فتح الدين أبو الفتح محمد بن سيد الناس الشافعي** loona yaqaanno Ibnu Sayyidu Al Naasi**إبن سيد الناس**, noolaana inta u dhexeysey lix boqol iyo kow iyo todobaatan ilaa toddoba boqol iyo afar iyo soddon ee Hijrada ayaa wuxuu Xadiithkaan ku wariyay kitaabkiisa Cuyuunu al Athari fii funuuni al maghaazii wa al shamaa'ili wa al siyari **عيون الأثر في فنون المغازي والشمائل والسير/**, mujalladka koowaad bogga toddoba iyo labaatan.
Waxaa kaloo wariyay kitaabka Kanzu al Cummaali/**كنز العمال** (11/32119, 32120, 32121).

Al Sayuudhii/**السيوطي** wuxuu kitaabkiisa Al Jaamicu Al Saghiir/**الجامع الصغير**, Xadiithkiisa laba boqol iyo shan iyo labaatan ku wariyay inuu Nabi Mixammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أحبوا العرب لثلاث لانى عربي والقرآن عربي وكلام اهل الجنة عربي."

"Axibbuu Al Caraba li thalaathin: (1) **li annii Carabiyyun, (2) Wa Al Quraanu Carabiyyun, (3) wa kalaamu ahli Al Jaannati Carabiyyun."**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Carabta u jeclaada saddex sababood daraadood: (kow) Tan koowaade anigu waxaan ahay nin Carab ah, (labo) waa tan labaade Quraanku waa af Carabi, (saddex) Waa tan saddexaade afka ay dadka Jannada ku jira ku hadlaan waa af Carabi."
Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bayhaqii/**البيهقي**, kuna wariyay kitaabkiisa Shucbu Al limaani /**شعب الإيمان** kana wariyay Ibnu Cabbaas/**إبن عباس**, Allaha raalli ka wada noqdee, yirina waa Xadiith saxiix ah.
Waxaa kaloo wariyay Al Xaakim/**الحاكم** oo ku wariyay kitaabkiisa Al Mustadrik/**المستدرك**, yirina waa saxiix.
Waxaa sidoo kale wariyay Al Dhabraanii/**الطبراني**, kuna wariyay kitaabkiisa Al Kabiiru/**الكبير**, yirina waa Xadiith saxiix ah.

Al Tarmathii/**الترمذي** wuxuu Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib **العباس بن عبد المطلب/**, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiisa uu jeclaa oo uu weyneyn jiray, ka wariyay inuu yiri:
"Waxaan iri:
"Rasuulka Ilaahayow, Quraysh/**قريش** way abtir sadeen, oo ay aabayaalkooda xuseen, markaasey waxay adiga tusaale ahaan kaa dhigeen sida geed timireed ku dhex yaalla "kabwatin/**كبوة**" - Al kabwatu/**الكبوة**, siduu ugu fasiray ibnu Al Athiir/**إبن الأثير** kitaabkiisa Al Nihaayatu fii Ghariibi Al Xadiithi wa al Athar/**النهاية في غريب الحديث والأثر** uu ugana wariyay Shamir/**شمر** waa ciidda guriga laga soo xaaqo. Wuxuu kaloona yiri: ghayrkiisna waxay yiraahdeen waa Al Kubatu/**الكبة** waxayna ka mid tahay magacda naaquska ah-. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"إن الله خلق الخلق فجعلنى فى خيرهم وخير الفريقين ثم تخير القبائل فجعلني في خير القبيلة ثم تخير البيوت فجعلني في خير بيوتهم فانا خيرهم نفسا وخيرهم بيتا."

"Inna Allaaha khalaqa al khalqa fa jacalanii fii khayrihim wa khayra al fariiqayni, thumma takhayyara al qabaa'ila fa jacalanii fii khayri al qabiilati, thumma

takhayyara al buyuuta fa jacalanii fii khayri buyuutihim. Fa anaa khayruhum nafsan wa khayruhum baytan."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

" Ilaahay khalqiga ayuu abuuray, markaasuu wuxuu iga mid dhigay qaybteeda ugu sharaf badan. -Xadiithkaan wuxuu sidaas nas ku yahay inuu banuu Aadanku\آدم Malaa'igta ka khayr badan yahay, ayagoo ay Malaa'igtu khalqiga uu Ilaahay abuuray ka mid tahay. Ama muraadka labada qaybood waa jinniga iyo insiga, ama waaba waa qaybaha dhasha Aadan/آدم-, wuxuuna i yeelay labada qaybood tooda ugu sharaf badan, oo Carabta ah. Kaddib wuxuu kala doortay qabaa'ilka Carabta, markaasuu iga mid dhigay qabiilka ugu sharaf badan, oo ah Quraysh/قريش, oo uu Ilaahay iga ahaysiiyey. Markaasuu guryaha ugu sharaf badan kala doortay -waa jilbaha qabiilkee- wuxuuna iga ahaysiiyey guriga ugu sharaf badan, oo ah Banuu Haashim/بنو هاشم. Sidaas ayaan anigu waxaan ahay ruuxa iyo nafta ugu sharaf badan iyo kooda ugu asal sharaf badan."

Al dhabraanii/الطبراني wuxuu Abuu Hurayrah/أبو هريرة ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, yiri:

"إن الله حين خلق الخلق بعث جبريل فقسم الناس قسمين فقسم العرب قسما والعجم قسما وكان خيرة الله في العرب ثم قسم العرب قسمين فقسم اليمن قسما وقسم مضر قسما وقريشا قسما وكانت خيرة الله في قريش ثم اخرجني من خير من انا منهم."

"Inna Allaaha xiina khalaqa al khalqa bacatha Jibriila, fa qasama al naasa qismayni, fa qasama al Caraba qisman wa qasama al cajama qisman, wa kaana khiiratu Allaahi fii Al Carabi. Thumma qasama Al Caraba qismayni. Fa qasama al Yamana qisman, qa qasama Mudar qisman, wa Qurayshan qisman, wa kaanat khiiratu Allaahi fii Qurayshin. Thumma akhrajanii min khayra man anaa minhum."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Ilaahay markuu khalqiga abuuray wuxuu diray Jibriil\جبريل. Markaasuu dadka laba qaybood u qaybiyay, oo uu Carab qayb ka dhigay, cajamtana qayb ka dhigay. Ilaahayna wuxuu doortay Carabta oo ugu sharaf badan. Markaasuu Carabta laba qaybood u qaybiyay, oo uu markaas Yaman\يمن qayb ka yeelay, Mudarna\مضر (Mudar\مضر waa awoowaha toddoba iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) qayb ka yeelay, Qurayshna\قريش qayb. Ilaahayna wuxuu doortay Quraysh\قريش . Markaasuu wuxuu iga soo saaray kuwa ugu sharaf badan oo aan anigu ka mid ahay."

Culummada qaarkood waxay yiraahdeen: "Kala sarreynta kala sharaf badnaanta nasabyada iyo qabaa'ilka iyo guryahaba waxay la xiriirtaa tixgelinta sida abuuriddooda naftooda ugu kala sharaf badan yihiin, iyo siday ugu kala fadli badan yihiin sifooyinkooda ay ku tilmaaman yihiin, xattaa quudadkooda, oo uu Ilaahay qaarkood qaarka kale uga fadli yeelay rizqiga, siduu Cazza wa Jalla\عز وجل ugu yiri Aayadda kow iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Naxli/سورة النحل:

وَاللَّهُ فَضَّلَ بَعْضَكُمْ عَلَى بَعْضٍ فِي الرِّزْقِ

"Wa Allaahu faddala bacdakum calaa bacdin fii al rrizqi(71)**",**
oo macneheedu yahay:
"Ilaahay wuxuu ka fadilay qaarkiin qaar rizqiga(71)."

Wuxuu kaloo Ilaahay, Cazza wa Jalla**عزوجل الله**, Aayadda labo iyo soddonaad ee Suuratu Al Zukhruf**سورة الزخرف** ku yiri:

وَرَفَعْنَا بَعْضَهُمْ فَوْقَ بَعْضٍ دَرَجَاتٍ (32)."

"Wa rafacnaa bacdahum fawqa bacdin darajaatin(32)**",**
oo macneheedu yahay:

"Waana kor yeelnay qaarkood qaarka kale darajooyin(32)".

Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Al Israa'i/**سورة الإسراء** ku yiri:

انْظُرْ كَيْفَ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَى بَعْضٍ وَلَلْآخِرَةُ أَكْبَرُ دَرَجَاتٍ وَأَكْبَرُ تَفْضِيلًا (21)."

"Unthur kayfa faddalnaa bacdahum calaa bacdin wa la al aakhiratu akbaru darajaatin wa akbaru tafdillan(21)**".**
Aaydda macneheedu waxaa weeye:

"Arag sidaan uga fadli yeelnay qaarkood qaarka kale (adduunka), Aakhiraase ka wayn darajooyin kana wayn kala fadli yeelid(21)".

Ilaahay Rususha ayuu kala fadli yeelay oo uu qaarkood qaarka kale ka fadli yeelay, oo wuxuu Cazza wa Jalla**عزوجل** , Aayadda laba boqol iyo saddex iyo konton ee Suuratu Al Baqarah/**سورة البقرة** ku yiri:

تِلْكَ الرُّسُلُ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَى بَعْضٍ

"Tilka Al Rrusulu faddalnaa bacdahum calaa bacdin(253)**",**
oo macneheedu yahay:

"Kuwaasu waa Rasuulladii, waana ka fadilnaa qaarkood qaar kale(253)".

Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa**الله سبحانه وتعالى**, Anbiyada ayuu qaarkood qaarka kale ka fadli yeelay, siduu ugu sheegay Aayadda shan iyo kontonaad ee Suuratu Al Israa'i/**سورة الإسراء:**

وَلَقَدْ فَضَّلْنَا بَعْضَ النَّبِيِّينَ عَلَى بَعْضٍ وَآتَيْنَا دَاوُودَ زَبُورًا (55)."

"Wa la qad faddalnaa bacda Al Nabiyyiina calaa bacdin(55)",
oo macneheedu yahay:

"Dhab ahaan ayaa-nna uga fadli yeelnay Nabiyada qaarkood qaarka kale(55)".

Sidaas oo kale ayay kala sarreynta iyo deeqdu ugu jirtaa inta kale oo la abuuray, siduu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ugu yiri Aayadda afar iyo kontonaad ee Suuratu Al Maaidah/**سورة المائدة:**

ذَلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ (54) ."

"Thaalika fadlu Allaahi yu'tiihi man yahsaa'u(54)**",**
oo macneheedu yahay:

"Taasina waa fadliga Ilaahay, wuxuuna siiyaa cidduu doono(54)".

Sidaas ayuusan kasoo qaad u lahayn hadalka kuwa oranaya:
"dadku waa hal nooc kulligiis, marka muxuu yahay kala sarreynta nasabdku?"

Al Dhabraanii/**الطبراني** wuxuu ka wariyay Cabdu Allaahi ibnu Cumar bin Al Khadh-dhaab**عبد الله بن عمر بن الخطاب**, Allaha raalli ka wada noqdee, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"إن الله إختار خلقه فاختار منهم بنى آدم ثم اختار من بنى آدم العرب ثم إختار ني من العرب فلم أزل خيارا من خيار. ألآمن احب العرب فبحبي أحبهم ومن أبغضى العرب فببغضي أبغضهم."

Inna Allaaha ikhtaara khalqahu fa ikhtaara minhum Banii Aadama. Thumma ikhtaara min Banii Aadama Al Caraba, thumma ikhtaaranii mina Al Carabi, fa lam azal khiyaaran min khiyaarin. Alaa man axabba Al Caraba fa bi xubbii axabbahum, wa man abghada Al Caraba fa bi bughdii abgbadahum. "
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu kala doortay khalqigiisa kuwa ugu sharaf badan, markaasuu wuxuu ka doortay Banii Aadanka. Kaddib wuxuu Banii Aadanka ka doortay oo ugu sharaf iyo khayr badan Carabta. Kaddibna aniguu Carabta iga dhex doortay oo ugu sharaf badan uguna khayr badan, oo sidaasaan waxaan ku ahay kan ugu sharaf badan oo kuwa ugu sharaf badan ka dhashay. War hooy ogaada: qofka Carab jecel wuxuu u jecel yahay jeceylka uu aniga i jeceyl yahay daraadiis, midka Carabta necebna wuxuu u neceb yahay nacaybka uu aniga. i neceb yahay daraadiis."

Riwaayad kalena waxay warisay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Waallam yiri:

" ثم إختار بنى آدم فإختار منهم العرب."

"Thumma ikhtaara Banii Aadama, fa ikhtaara minhum Al Caraba",
oo macneheedu yahay:

"Kaddib wuxuu doortay Banii Aadanka, markaasuu ayagana Carabta ka dhex doortay."

Al Tarmathii-na/**الترمذي** wuxuu ka wariyay Salmaan Al Faarisii/**سلمان الفارسي** inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

" يا سلمان لا تبغضني فتفارق دينك."

"Yaa Salmaanu laa tabghadnii fa tufaariqa diinaka",
oo macneheedu yahay:

"Salmaanow**سلمان** ha i nicin, maxaa yeelay haddad i nacdid Diinta ayaad ka baxaysaa".
Markaasaan waxaan iri:
"Rasuulka Ilaahayow, sideebaan kuu nacayaa ayadooba uu Ilaahay adigu igu kaa hanuuniyay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"تبغض العرب فتبغضني."

"Tabgadhu Al Caraba fa tabghadunii",
oo macneheedu yahay:

"Waxaad nacaysaa Carabta, markaasaad anigana i nacaysaa."

Salmaa Al Faarisi/**سلمان الفارسي,** Allaha raalli ka noqdee, siduu magaciisuba u sheegayo wuxuu u dhashay dalka liraan/**إيران,** oo Carab ma uusan ahayn.

Al Dhabraanii/**الطبراني** wuxuu calii ka wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"لايبغض العرب إلا منافق."

"La yabghadu Al Caraba illaa munaafiqun",
oo macneheedu yahay:

"Carabta ma uusan necba munaafaq mooyee".

Xadiithka Ibnu Cabbaas\إبن عباس ee Quraysh\قريش

Wuxuu Muxammad. bin Cumar Al Cadanii/**محمد بن عمر العدني,** oo ah Sheekha Imaam Muslim/**مسلم,** Musnadkiisa/**في مسنده** Cabdu Allaahi ibnu Cabbaas/**عبد الله إبن عباس** uga wariyay inuu yiri:

"أن قريشا كانت نورا بين يدي الله قبل أن يخلق آدم بألفي عام، يسبح ذلك النور وتسبح الملائكة بتسبيحه."

Oo macnihiisu yahay:
"inay Quraysh**قريش**, oo ah midda lagu liibaaniyay Islaamka ay ahayd nuur ku sugan labada Gacnood ee Ilaahay dhexdooda ka hor intaan la abuurin Aadan laba kun oo sano, ayadoo uu nuurkaasi Subxaanalleysanayo, Malaa'igtuna ay tasbiixdiisa ayaguna markaas ku tasbiixsaneyso (oo ah inay markay Qurayshi tiraahdo Subxaana Allaahi/**سبحان الله** ayay Malaa'igtuna Subxaana Allaahi/**سبحان الله** ka daba leedahay)".

Ibnu Al Qadh-dhaan/**إبن قطان** wuxuu yiri:
"Xadiithkaan iyo Xadiithka Calii/**علي**, oo, hadda nasoo maray, waxaa loo mideynayaa ayadoo uu nuurka Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jirmi loo yeelay laba iyo toban kun oo sano abuuritaanka Aadan**آدم** ka hor, kaddibna Quraysh**قريش** inteeda kale lagu daray, tasbiixdana lagu dhawaajiyay, oo ay tasbiixsadeen."

Murrah bin Kacb ilmihiisa\مرة بن كعب

Murratu ر\لwuxuu dhalay saddex nin oo kala ah:
(Kow) Kilaaba bin Murrata**كلاب بن مرة** , oo hooyadiisna ay tahay Hinda bintu Suraaji bin Thaclabah bin Al Xaarith bin Fihr bin Maalik bin Kinaanah bin Khuzaymah **هند بنت سراج بن ثعلبة بن الحارث بن فهر بن مالك بن كنانة بن خزيمة\.** Kilaab**كلاب** waa awoowaha shanaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
(Laba) Yaqthatu (waa tha dhibic kor ku leh oo dha ku xigtah, caynkana ka horreysa) bin Murrata**يقظة بن مرة** , hooyadiisna waa Al Baariqiyyah**البارقية,** oo ah haweeney u dhalatay qabiilka la yiraahdo Baariq**بارق** oo ka tirsan Al Asad**الأسد** ee reer Yamaneed**يمن** ah. Waxaa kaloo la yiri: hooyadiis waa Taym**تيم.**
Yaqthah**يقظو** wiilkiisa Makhzuum bin Yaqthata**مخزوم بن يقظة** waa awoowaha ay Qurayshta**قريش** reer Banii Makhzuum**بني مخزو** ku abtirsadaan, uuna ka dhashay Seefta Ilaahay ee Galka ka siiban Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد,** Allaha isaga iyo Asxaabta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhammaantood raalli ka noqdee.
(Saddex) Taym bin Murrata**تيم بن مرة,** oo ah ninkay ku abtirsadaan Qurayshta**قريش** Banii Taym**بني تيم** oo uu Abuu Bakar Al Ssiddiiqu**أبوبكر الصديق** ka dhashay. Murratu bin Kacb**مرة بن كعب** waxaa ku kulma nasabka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo nasabaka Cabdu Allaahi bin Cuthmaan bin Caamir **عبد الله بن عثمان بن عامر**\ oo ah Abuu Bakar Al Siddiiqu**أبوبكر الصديق,** Allaha raalli ka noqdee, oo Abuu Bakar Al Siddiiq**أبوبكر الصديق** waa koofaar.

Kilaab bin Murrah\كلاب بن مرة ilmihiisa

Kilaab bin Murrata**كلاب بن مرة** wuxuu dhalay ilmaha soo socda:
(Kow) Qusayy bin Kilaab**قصي بن كلاب**, oo ay isaga iyo walaalkiis Zuhratu**زهرة** iyo walaashiis Nucam**نعم** ay isku hooyo yihiin, ayna dhashay Faadhimatu bintu Sacd bin Sayali**فاطمة بنت سعد بن سيل,** oo u dhalatay Al Jadarata**الجدرة ,** kana sii ah Jucthamatu Al

Azd**جعثمة الأزد** oo reer Yaman**يمن** ah, xulafana la ahaa reer Banuu Al Diil bin Bakr bin Cabdi Manaat bin Kinaanah**بنو الديل بن بكر بن عبد مناة بن كنانة.** Awooweheed Sayali**السيل,** oo sayal**سيل** waxaa la yiraahdaa sabuulka, magaciisuna uu Khayru bin Xamaalata **خير بن حمالة** yahay, wuxuu ahaa ninka ugu horreeyey oo seefaha dahab iyo qalin ku dheeha, oo ku qurxiya, waana madaxa iyo galka seefaha. (Laba) Zuhratu bin Kilaab**زهرة بن كلاب.**
(Saddex) Nucam bintu Kilaab**نعم بنت كلاب,** oo ah hooyada dhashay Sacd**سعد** iyo Sucayd**سعيد,** una dhashay Sahm bin Camr bin Husays (waa laba saad) bin Kacb bin Lu'ayy**سهم بن بن عمر بن هصيص بن كعب بن لؤي**

Caruurta Zuhra bin Kilaab\زهرة بن كلاب

Kitaabka Jamharatu Nasabu Qurayshin wa Akhbaarihaa**جمهرة نسب قريش وأخبارها** waxaa dhigay Al Zzubayru ibnu Al Bakkaar**الزبير إبن البكار,** oo ah dhasha Al Zzubayru bin Al Cawwaamu Al Asadii**الزبير بن العوام الأسدي** Xawaariga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam**حواري النبي صلى الله عليه وسلم,** iyo ina eedadiisa Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib**صفية بنت عبد المطلب,** oo dhintay sanadka laba boqol iyo lix iyo konton Hijriga, laguna daabacay Daaru Al Yamaamah Lil Baxthi wa Al Tarjamah wa Al Nashr**دار اليمامة للبحث والترجمة والنشر** ee ku taalla Riyaad**رياض** arliga Sucuudiga.

Al Zzubayru ibnu Al Bakkaar**الزبير إبن البكار ,** wuxuu kitaabkiisa ku wariyay inuu Zuhrah bin Kilaab**زهرة بن كلاب** dhalay:
(Kow) Cabda Manaaf bin Zuhrah**عبد مناف بن زهرة,** hooyadiisna ay tahay Jamal bintu Fusayyah bin Sacd bin Mulayx bin Camr**جمال بنت فصية بن سعد بن مليح بن عمرو,** una dhalatay qabiilka Khuzaacah**خزاعة.**
(Laba) Al Xaaritha bin Zuhrah**الحاث بن زهرة,** hooyadiisna waa Cufaylah bintu Cabdu Al Cuzzaa bin Ghiirata bin Cawf bin Qisiyyi **عفيلة بنت عبد العزى بن غيرة بن عوف بن ثقيف بن منبه بن بكر بن قسي\, هوازن\.** waana Thaqiif bin Munabbah bin Bakr bin Hawaazin

Zuhrah**زهرة** wuxuu ka tarmay xagga dhasha Al Xaarithu bin Zuhrah**الحارث بن زهرة,** madaxtinnimaduna waxay ku sugnayd dhasha Cabda Manaaf bin Zuhrah **عبد مناف بن زهرة\.**

Dhasha Cabdu Manaaf bin Zuhrah\عبد مناف بن زهرة

Cabdu Manaaf bin Zuhrah**عبد مناف بن زهرة** wuxuu dhalay:

(kow) Wahb bin Cabdu Manaaf**وهب بن عبد مناف,** oo ah awoowaha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga hooyadiis, oo hooyada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Aaminah bintu Wahb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah**آمنة بنت وهب بن عبد مناف بن زهرة.**
(laba) Uhayb**أهيب** iyo
(Saddex**)** Qays**قيس** iyo
(Afar) Abii Qays Raakibu Al Bariidi**أبو قيس راكب البريد.** Wahb**وهب** hooyadiisna iyo hooyada dhashay walaalihiisa waa Qaylatu ibnatu Abii Qaylah**قيلة بنت أبي قيلة.** Abii Qaylah**أبي قيلة** magaciisuna waa Wajz bin Ghaalib bin Caamir bin Al Xaarith **وجز بن**

غالب بن عامر بن الحارث waana (qabiilka) Ghubshaan**غبشان.** Wajz**وجز** waa ninka la yiraahdo Abuu Kabshah**أبو كبشة** oo ahaa kan ugu horreeyey oo caabuda xiddigga la yiraahdo Al Sh-shicraa**الشعرى** (oo ku xusan Aayadda sagaal iyo afartan ee Suuratu Al Najmi**سورة النجم:**

وَأَنَّهُ هُوَ رَبُّ الشِّعْرَى (49)

"Wa nnahu Huwa Rabbu Al sh-shicraa(49)**"**,
oo macnihiisu yahay:
"Isaagana ah Rabbiga al shicraa**الشعرى** (49).",
wuxuuna oran jiray:

"Al Sh-shicra**الشعرى** waxay cirka u goysaa xagga ballaarkiisa, marka ugama jeedo Samada shayna: qorrax iyo dayax iyo xiddig toona oo kale oo cirka u goynaya xagga ballaciisa intaan xiddiggaas ahayn –oo inta kale waxay u gooyaan cirka dhererkiisa-"

Carabtuna waxay Al Sh-shicraa**الشعرى** ku magacawdaa Al Cabuura**العبور** –oo ah kan gooya- maxaa yeelay waxay u goysaa cirka xagga ballaciisa.

Quraysh**قريش** waxay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u nisbeyn jirtay Abuu Kabshah**أبوكبشة,** isagoo ah awoowihiisa xagga hooyadiis. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, diinta Quraysh**قريش** khilaafay, Ilaahayna uu isaga dadka baadinnimada uga hanuuniyay, jaahilnimadiina cilmi uga saaray, ayay waxay gaalada Qurayshi**قريش** tiri:
"waxaa jiitay Abuu Kabshah**أبوكبشة,** maxaa yeelay Abuu Kabshah**أبوكبشة** wuxuu dadka ku khilaafay inuu caabuday Al Sh-shicraa**الشعرى**, isaguna wuxuu khilaafay diinta dadkiisa." Qabiilka Khuzaacah**خزاعة** waxay caabudi jireen xiddigaha kale.

Dhasha Wahb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah\وهب بن عبد مناف بن زهرة

Wahb bin Cabdu Manaaf wuxuu dhalay:
(Kow) Aaminah bintu Wahb**آمنة بنت وهب,** hooyada dhashay Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Ayada hooyadeedna waa Barrah bintu Cabdu Al Cuzzaa bin Cuthmaan bin Cabdu Al Ddaar bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr oo ah ninka Quraysh la yiraahdo **برة بنت عبد العزى بن عثمان بن عبد الدار بن قصي بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر (قريش).**
(Laba) Al Aswadu bin Cabdi Yaghuuth bin Wahb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah **الأسود بن عبد يغوث بن وهب بن عبد مناف بن زهرة,** hooyadiisna waa Hunaydah ibnatu Maazin bin Caamir bin Calqamah**هنيدة إبنة مازن بن عامر بن علقمة**, oo reer Yaman ah**يمن.**

Al Aswadu**الأسود** wuxuu ka mid yahay kuwa Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ku jeesjeesi jiray (waxayna ahaayeen shan nin oo kale ah siduu Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** u wariyay, wuxuuna yiri:

“Sidaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amarka Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ee gudbinta Risaalada ku taagnaa, isagoo rumaysan ajarna ku doonaya, tolkiisna waaninaya una naseexeynaya inkastoo ay u geysanayeen dhibaatooyin ay ka mid yihiin beenin iyo dhibid iyo ku jeesjeesidba.
Madaxda ugu waaweyn ee kuwa ku jeesjeesana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay ahaayeen shan nin oo tolkiis ka mid ah, kuwaasoo tolkooda dhexdiisa makaan sare iyo madaxtinnimo ku lahaa. Markaasey markay kusii adkaysteen oo ay sii wadeen shartooda, ayna ku jeesjeeska Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, badiyeen, ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu soo dejiyay Aayadaha afar iyo sagaashan iyo shan iyo sagaashan ee Suuratu Al Xijris**سورة الحجر.**
Shantaasi waxay kala ahaayeen:

(Kow) Al Aswadu bin Al Mudha-dhalib bin Asad Abuu Zamcah **الأسود بن المطلب بن أسد أبو زمعة**, oo u dhashay Qurayshta**قريش** reer Banii Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab**بني أسد بن عبد العزى بن قصي بن كلاب**. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sida isoo gaartay, habaaray kaddib markuu dhibaato u geystay, kuna jeesjeesay, wuxuuna yiri:

"اللهم أعم بصره واثكله ولده."

“Allaahumma acmi basarahu, wa athkilhu waladahu”,
oo macnihiisu yahay:

“Ilaahayow aragga tir oo indhoole ka dhig, wiilashana ka qaad oo gablami.”
Markaasuu Jibriil**جبريل** u yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo ay shantaas nini Kacbada ku dhawaafayaan. Markaasuu Jibriil**جبريل** istaagay oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhiniciisa istaagay. Markaasuu Al Aswadu bin Al Mudh-dhalib**الأسود بن المطلب** soo maray. Markaasuu Jibriil**جبريل** wuxuu wajigiisa ku tuuray caleen cagaaran. Markaasuu indho beelay**.**

(Labo) Al Aswadu bin Cabdi Yaghuuth bin Wahb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah **الأسود بن عبد يغوث بن وهب بن عبد مناف بن زهرة**, oo u dhashay Qurayshta**قريش** reer Banii Zuhrah bin Kilaab**بني زهرة بن كلاب.**
Markaasuu Jibriil**جبريل** fartiisa calooshiisa ku fiiqay.
Markaasay biyo calooshiisa kasoo buuxsameen oo intuu fuuray u dhintay.
Riwaayad kalena oo uu Al Sayuudhii**السيوطي** kitaabkiisa Al Duraru Al Manthuuri **الدرر المنثورة** ku wariyay wuxuu yiri:
“Markay Aayadda shan iyo sagaashanaad ee Suuratu Al Xijri**سورة الحجر** soo degatay ayaa waxaa soo degay Jibriil**جبريل,** Calayhissalaamu, markaasuu dhabarka Al Aswadu**الأسود** hor usoo laabay oo iskusoo jebiyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"خالي! خالي!"

“Khaalii, Khaalii”,
oo macnihiisu yahay:

“Abtigay, waa Abtigay”.

Markaasuu Jibriil**جبريل** wuxuu ku yiri: “Iska daa.”

Markaasuu dhabarkiisa hore usoo laabay ilaa uu ka dilo.”
Waxaana Xadiithka wariyay Al Daaraaqudhniyyu**الدارقطني.**

(Saddex**)** Al Waliidu bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum **الوليد بن المغيرة بن عبد الله بن عمر بن مخزوم**, oo u dhashay Qurayshta reer Banii Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah**بني مخزوم بن يقظة بم مرة.**
Markaasuu Jibriil**جبريل** fartiisa ku fiiqay dhaawac raystay oo uga yiillay darafta hoose ee ciribta cagtiisa, oo sanooyin ka hor ku dhacay. Dhaawacaasna siduu ugu dhacay waxay ahayd sidatan: isagoo maradiisa uu xiranyahay oo aad u dheereyd dhulka ku jiidaya ayuu soo ag maray nin qabiilka Khuzaacah**خزاعة** u dhashay oo fallaaro uu lahaa baalal u sameynaya oo ku xiraya. Markaasaa hoos guntigiisa waxaa qabsatay fallaar, oo markaas cagtiisa sidaas u dhaawacday. Dhaawacasna wax sidaas usii ridan ma ahayn ee wax yar ayuuba ahaa. Markaase markuu Jibriil**جبريل** fartiisa ku fiiqay ay boogtii dib u furantay oo uu u dhintay.
(Afar**)** Al Caasu bin Waa’il bin Hishaam**العاص بن وائل بن هشام**, una dhashay Qurayshta**قريش** reer Banii Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb **بني سهم بن عمرو بن هصيص بن كعب\”.**
Ibnu Hishaamna**إبن هشام** wuxuu yiri:
“Waa Al Caasu bin Waa’il bin Haashim bin Sucayd bin Sahm **العاص بن وائل بن هشام بن سعيد بن سهم\”.**
Markuu Al Caasu bin Waa’il**العاص بن وائل** soo maray ayuu Jibriil**جبريل** wuxuu fartiisa ku fiiqay rays ma gaadhada cagtiisa. Markaas kaddib ayuu Al Caasu**العاص** wuxuu fuulay dameer uu leeyahay isagoo doonaya inuu degmada Dhaa’if**الطائف** aado.
Markaasuu meel dariiqa ah wuxuu dameerkiisa ku xiray geed qodxa leh. Markaase qodaxi waxay ka gashay cagtiisa, oo dishay, oo uu u dhintay.

(Shan) Al Xaarithu ibnu Al Dhulaadhilah bin Camr bin Al Xaarith bin Cabdi Camr bin Lu’ayy bin Milkaan**الحارث إبن الطليطلة بن عمرو بن الحارث بن عبد عمرو بن لؤي بن ملكان** oo qabiilka Khuzaacah**خزاعة** u dhashay. Markuu isaguna soo maray ayuu Jibriil**جبريل** madaxiisa farta ku fiiqay. Markaasey isla markiiba malaxi kasoo buuxsantay madaxiisa oo ay dishay. Waa intaas warka ibnu Isxaaq**إبن إسحاق,**dambigiisa Allaha dhaafee.
Markaasuu Jibriil**جبريل** fartiisa calooshiisa ku fiiqay. Markaasay biyo calooshiisa kasoo buuxsameen oo intuu fuuray uu dhintay. Riwaayad kalena oo uu Al Sayuudhii**السيوطي** kitaabkiisa Al Duraru Al Manthuuri**الدرر المنظور** ku wariyay wuxuu yiri:
“Markay Aayadda shan iyo sagaashanaad ee Suuratu Al Xijri**سورة الحجر** :

إِنَّا كَفَيْنَاكَ الْمُسْتَهْزِئِينَ (95)

“Innaa kafaynaaka al mustahzi’iina(95).**”**
Oo macneheedu yahay:

“Annagaa kaaga filnaanay kuwa jeesjeesa(95)”.

soo degatay ayaa waxaa soo degay Jibriil**جبريل**, Calayhissalaamu, markaasuu dhabarka Al Aswadu**الأسود** hor usoo laabay oo iskusoo jebiyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"خالي!خالي!"“Khaalii, Khaalii”**, oo macnihiisu yahay “Abtigay, waa Abtigay”. Markaasuu Jibriil**جبريل** wuxuu ku yiri: “**Iska daa.”** Markaasuu dhabarkiisa hore usoo laabay ilaa uu ka dilo.” Waxaana Xadiithka wariyay Al Daaraaqudhniyyu**الدارقطني .**

Dhasha Uhayb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah\أهيب بن عبد مناف بن زهرة

Uhayb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah**أهيب بن عبد مناف بن زهرة** , oo ah Wahb**وهب** walaalkiis, dhashiisa waxaa ka mid ah
(kow) Sacd bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص**, hoyadiisna waa Xamnatu ibnatu Abii Sufyaan ibnu Umayyah bin Cabda Shams**حمنة إبنة إبي سفيان إبن أمية بن عبد شمس**, oo ahaa kan ugu horreeya oo islaamka dhexdiisa Ilaahay daraadiis fallaar u gana. Sacd**سعد** wuxuu ka mid yahay tobanka jannada loogu bishaareeyey iyo lixda Asxaabu Al Sh-shuuraa**أصحاب الشورى** ee Cumar\عمر magacaabay iyo Asxaabu Badr**أصحاب بدر**, (iyo Uxud**أحد** iyo Mashaahiddo oo idil oo uu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka qayb galay). Abii Waqqaas**أبي وقاص** magaciisuna waa Maalik**مالك.**
(Laba) Makhramah bin Nawfal bin Uhayb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah **مخرمة بن نوفل بن أهيب بن عبد مناف بن زهرة**, hooyadiisna waa ibnatu Abii Sayfiyyi bin Haashim bin Cabdi Manaaf bin Qusayy**إبنت أبي صيفي ين هاشم بن عبد مناف.**

Makhramah**مخرمة** wuxuu dhalay wiilkiisa Al Miswaru bin Makhramah **المسور بن مخرمة**, hooyadiisna waa Caatikah bintu Cawf bin Cabdi Cawf **عاتكة بنت عوف بن عبد عوف**, oo Muhaajirad**مهاجرة** ahayd, hooyadeedna waa Al Sh-shifaa’u bintu Cawf bin Cabdi**الشفاء بنت عوف بن عبد**, ayaduna Muhaajirad**مهاجرة** ahayd, waana hooyada dhashay Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**, oo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waa abtiga Al Miswaru**المسور** oo wuxuu la dhashay hooyadiis oo ay isku hooyo iyo isku aabe yihiin

Dhasha Al Xaarithu bin Zuhrah\الحارث بن زهرة

Dhasha Al Xaarithu bin Zuhrah**الحارث بن زهرة** , oo ah Cabdu Manaaf bin Zuhrah **عبد مناف بن زهرة** walaalkiis, waxaa ka mid ah:
(Kow) Cabdi bin Al Xaarith bin Zuhrah**عبد بن الحارث بن زهرة** iyo
(Laba) Cabdu Allaahi bin Al Xaarith bin Zuhrah**عبد الله بن الحارث بن زهرة**, hooyadoodna waa Qaylatu bintu Abii Qaylah Abii Qaylah**قيلة بمن أبي قيلة**

magaciisuna waa Wajz bin Ghaalib bin Caamir bin Al Xaarith waana Ghubshaan **وجز بن غالب بن عامر بن الحارث الغبشاني\.**
Wuxuu kaloo dhalay:
(Saddex) Wahb bin Al Xaarith bin Zuhrah**وهب بن الحارث بن زهرة,** ciribna ma reebin, iyo
(Afar) Camr bin Al Xaarith bin Zuhrah**\عمرو بن الحارث بن زهرة.**

Ciribta dhasha Al Xaarithu bin Zuhrah**\الحاث بن زهرة** waxay ku jirtaa dhasha Cabdi bin Al Xaarith bin Zuhrah**\عبد بن الحارث بن زهرة,** oo caruurtiisa waxaa ka mid ah Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabdi Cawf bin Cabdu bin Al Xaarith bin Zuhrah **عوف بن عبد الحارث بن زهرة عبد الرحمن بن** (ninkaan ayaana dhalay qabiilka soomaaliyeed oo Shaanshi la yiraahdo).
Waa intaas warka Al Zzubayru ibnu Al Bakkaar**\الزبير بن البكار.**

Cabdu Al Xamiid Juudah Al Saxxaar/**عبد الحميد جودة السحار** wuxuu yiri:

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis waa Aaminata bintu Wahab bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah bin Kilaab (oo ay nasabka Cabdu Allaahi**\عبد الله** iyo Aaminah**\آمنة** ku kulmaan) bin Murrata bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr **آمنة بنت وهب بن عبد مناف بن زهرة بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر/** oo ah ninka Quraysh**\قريش** la yiraahdo.

Aaminah hooyadeed waa Barrata bintu Cabdu Al Cuzzaa bin Cuthmaan bin Cabdu Al Ddaar bin Qusayyi bin Kilaab bin Murrata bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr **برة بنت عبد العزى بن عثمان بن عبد الدار بن قصي بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر** oo ah ninka Quraysh**\قريش** la yiraahdo.

Barrata**\برة** hooyadeed, oo ah Aaminah**آمنة** ayeydeed, waa Ummu Xabiib bintu Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayyi bin Kilaab bin Murrata bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr**أم حبيب بنت أسد بن عبد العزى بن قصي بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر** oo ninka Quraysh**\قريش** la yiraahdo ah.
Ummu Xabiib**\أم حبيب** hooyadeed waa Barrata bintu Cawf bin Cubayd bin Cuwayj bin Cadiyyi bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr oo nin Quraysh la yiraahdo ah **برة بنت عوف بن عويج بن عدي بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر.**

Aaminah bintu Wahab**آمنة بنت وهب** waxay ahayd gabadha Quraysh/**قريش** ugu sarreysa xagga nasabka iyo xagga makaankaba, waxayna ahayd qabadha ugu qurux badan Makkah Al Mukarramah**\مكة المكرمة.**

Qabiil walba intuu midka kale ka sharaf badan yahay oo uu ka madaxsanyahay ayay guryihiisu Kacbada kuwa kale uga dhowaayeen. Reer Banii Zuhrata/**بني زهرة** iyo reer Banii Haashim/**بني هاشم** guryohooda ayaa Kacbada ugu dhowaa, labadaasoo ahaa labada qabiil oo Carab oo idil ugu sharaf badnaa.

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabdu Cawf bin Cabdu bin Al Xaarith bin Zuhrah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr **عبد الرحمن بن عوف بن عبد عوف بن عبد بن الحارث بن زهرة بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر** oo ninka Quraysh\قريش la yiraahdo ah.

Cabdu Al Raxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeyey iyo saabiqiinta oo uu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** Quraanka ku xusay oo ahaa:
(Kow) Abuu Bakr**أبوبكر الصديق** iyo
(Laba) Cuthmaan**عثمان بن عفان ذا النورين** iyo
(Saddex) Calii**علي بن أبي طالب** iyo
(Afar) Al Zzubayru bin Al Cawwaamu**الزبير بن العوام** iyo
(Shan) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** iyo
(lix) Sacd bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص** iyo
(Toddoba) Dhalxah bin Cubaydu Allaahi**طلحة بن عبيد الله** iyo
(Sideed) Zayd bin Xaarithah**زيد بن حارثة**. Saabiquuntaas**السابقون** wuxuu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ku xusay Aayado ay ka mid tahay Aayadaha toban iyo kow iyo toban ee Suuratu Al Waaqicah**سورة الواقعة:**

وَالسَّابِقُونَ السَّابِقُونَ (10) أُولَئِكَ الْمُقَرَّبُونَ (11)

"Wa Al Ssaabiquuna Al ssaabiquuna(10)**Ulaa'ika Al Muqarrabuuna**(11)**"**
oo macnehoodu yahay:

"Iyo kuwa aad u hormaray(10)Kuwaasu waa kuwuu Ilaahay xaggiisa u dhoweeyey(11)."

Zamanka jaahiliyada magaciisu wuxuu ahaa Cabdu Camr**عبد عمر**, waxaa kaloo la yiri Cabdu Al Xaarith**عبد الحارث**, waxaa kaloo la yiri Cabdu Al Kacbah**عبد الكعبة**, markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Al Rraxmaanu**عبد الرحمن** u bixiyey. Kuniyadiisuna waa Abaa Muxammad**أبا محمد**.

Wuxuu kaloo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u bixiyey **Al** Ssaadiqu**الصادق**, runlowga, iyo Al Baarru**البار**, kan baarriga ah.

Nasabkiisu wuxuu kan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula kulmaa Kilaab bin Murrah**كلاب بن مرة**, oo ah awoowaha shanaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Waxaana la yiraahdaa Al Qurashiyyi Ai Zuhriyyi**القرشي الوهري**, oo sidaasuu wuxuu ku yahay abtiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo reer Banii

Zuhrah**بني زهرة** ka dhashay.

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** hooyadiisa dhashay waa Al Shifaa'u bintu Cawf bin Cabdu Al Xaal'ith Al Zuhriyyah**الشفاء بنت عوف بن عبد الحارث**, oo islaantay, kaddibna haajirtay, waxayna ahayd umulisada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis Aaminah**آمنة** ka umulisay. Allow raalli ka noqo Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** iyo hooyadiisba.

Kitaabka Usudu Al Ghaabah**أسد الغابة**

Al Imaamu al muxaddath Calii bin Muxammad bin Cabdu Al Kariimi bin Cabdu Al Waaxid Al Jazarii, Al Shaybaanii, Abuu Al Xasan **الإمام المحدث علي بن عبد الكريم بن عبد الواحد الجزري، الشيباني, أبوالحسن**, koofaartiisuna Cizzu Al Ddiini**عزالدين** tahay, loona yaqaanno Ibnu Al Athiir**إبن الأثير**, wuxuu ku dhashay Jaziiratu ibnu Cumar**جزيرة إبن عمر**, ee waqooyiga Ciraaq**عراق** ku taalla sanadka shan boqol shan iyo konton, una dhigantah kun boqol iyo lixdan ee miilaadiga ah, wuxuuna ku dhintay Al Muusil**الموصل** ee waqooyiga dalka Ciraaq**عراق** sanadka lix boqol iyo soddon Hijrada una dhiganta kun laba boqol saddex iyo soddon miilaadiga ah.
Wuxuu ahaa caalin ku xeel dheer taariikhda iyo nasabka iyo adabta suugaanta ah. Kutubbaduu allifay waxaa ka mid ah kitaabka Al Kaamilu**الكامل** oo laba iyo toban mujallad ka kooban kuna saabsan taariikhda ilaa sanadka lix boqol sagaal iyo labaatan, oo uu Al Ziriklii**الزركلي** yiri: "inta badan ee culummada taariikhda oo isaga ka dambeeyey waxay ciyaal u yihiin oo ka barteen kitaabkiisaan".
Wuxuu kaloo dhigay kitaabkaan la yiraahdo Usudu Al Ghaabah fii macrifati al ssaxaabah **أسد الغابة في معرفة الصحابة**. Imaamkaanu wuxuu kitaabkiisa, oo xuruufta hijaa'iga u nidaamsan, wuxuu ka yiri **عبد الرحمن بن عوف**waxaa ka mid ah inta soo socota.

Abtirsigiisa

Ibnu Al Athiir**إبن الأثير** wuxuu kitaabkiisa Usudu Al Ghaabah**أسدالغابة** ku yiri:
"Waa Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf ibnu Cabda Cawf bin Cabdu bin Al Xaarith bin Zuhrah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr oo ninka Quraysh la yiraahdo ah, Al Qurashiyyi Al Zzuhriyyi **عبد الرحمن بن عوف إبن عبد عوف بن عبد بن الحارث بن زهرة بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب بن فهر**, kuniyadiisuna waa Abaa Muxammad**أبا محمد**. Magaciisu zamanka jaahiliyada wuxuu ahaa Cabda Camr**عبد عمر**, waxaa kaloo la yiri Cabda Al kacbah**عبد الكعبة**. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u bixiyay Cabda Al Rraxmaani**عبد الرحمن**. Hooyadiisna waa Al Shiffaa'u bintu Cawf bin Cabd bin Al Xaarith bin Zuhrah **الشفاء بنت عوف بن عبد بن الحارث بن زهرة**.

Dhalashadiisa iyo islaamiddiisa

Wuxuu dhashay toban sano maroodiga dabadiis (oo sidaasuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo sanadka maroodiga dhashay, da' ahaan toban sano uga yar yahay), wuxuuna islaamay ka hor intuusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gelin Daaru Al Arqamu**دار الأرقم**, wuxuuna ahaa mid ka mid sideedda ugu horreeyey

islaamka, wuxuuna ahaa mid ka mid ah shanta ku islaamay gacanta Abuu Bakr\أبوبكر . Wuxuuna ka mid ahaa Muhaajiriinta\المهاجرين ugu horreeyey, oo marka hore wuxuu u haajiray (labada Hijro ee) arliga xabashada, kaddibna Al Madiinah Al Munawwarah \المدينة المنورة. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu walaaleeyey isaga iyo Sacd bin Al Rrabiicu\سعد بن الربيع.

Jihaadkiisa

Wuxuu ka qayb galay Badar\بدر iyo Uxud\أحد iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray inuu ku duulo qabiilka Kalbi\كلب oo dega boqortooyada Duumatu Al Jandal\دومة جندل, gacantiisa ayuuna cimaamadda ugu duubay, saynteedana uu ku siidaayay labadiisa garab dhexdooda, wuxuuna ku yiri:

"إن فتح الله عليك فتزوج إبنة ملكهم – أو قال – شريفهم."

"in fataxa Allaahu calayka fa tazawwaj ibnata malikihim -aw qaala **shariifihim."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"hadduu Ilaahay adiga guusha ku siiyo oo aad ka adkaatid waxaad guursataa gabadha boqorkooda -ama wuxuu yiri: madaxweynohooda."
Waxaana Madaxweyne u ahaa Thaclabah bin Damdam Al Kalbii\ثعلبة بن صمصم الكلبي (oo uu ibnu Sacd\إبن سعد wariyay inuu krishtaan ahaa).

Markaasuu (intuu ka adkaaday) guursaday gabadhiisa Tumaadir bintu Al Asbagh تماضر بنت الأصبغ\ , markaasay waxay u dhashay wiilkiisa Abaa Salamah bin Cabdu Al Rraxmaanu\أبو سلمة بن عبد الرحمن.

Maalinta Uxud\أحد waxaa la gaarsiiyay kow iyo labaatan dhaawac, lugtiisana waa la dhaawacay, oo wuu u dhutin jiray. Maalintaas labadiisa foolna waa laga riday oo kaddib way bannaanayd meeshoodu.

Deeqihiisa uu dadka dheer yahay

Ina Cawf\إبن عوف wuxuu ka mid yahay tobanka inuu jannada gelayo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga marag kacay oo ugu bishaareeyey. Wuxuu kaloo ahaa mid ka mid ah lixda Asxaabu Al Shuuraa\أصحاب الشورى, ahna kuwa uu Cumar bin Al Khdh-dhaab\عمر بن الخطاب, Allaha raalli ka noqdee, uu khilaafada dhex dhigay oo uu yiri inay khaliifo noqon karaan isaga dabadiis, uuna sheegay in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsaday isagoo lixdaas raalli ka ah. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ina Cawf\إبن عوف gadaashiisu ku tukaday isagoo safar ku jira.

Wuxuu ahaa nin deeqsi ah oo sadaqada aad ugu dheereeya jidka Ilaahay Cazza wa Jalla

الله عزوجل\ loo bixinayo. Maalin keli ah ayuu wuxuu xoreeyey soddon addoon.

Saciid bin Zayd\سعيد بن زيد wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"عشرة في الجنة، أبوبكر في الجنة وعمر في الجنة، وعلي، وعثمان، والزبير، وطلحة، وعبد الرحمن بن عوف، وأبوعبيدة بن الجراح، وسعد بن أبي وقاص."

"casharatun fii al jannati: Abuu Bakr fii al jannah wa Cumar fii al jannah, wa Calii, wa Cuthmaan, wa Al Zzubayru, wa Dhalxah, wa Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf, wa Abuu Cubaydah bin Al Jarraax, wa Sacd bin Abii Waqqaas."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"tobani waxay ku jiraan jannada: Abuu Bakrأبوبكر أبوبكر wuxuu ku jiraa jannada Cumarnaعمر wuxuu ku jiraa jannada iyo Caliiعلي, iyo Cuthmaanعثمان, iyo Al Zzubayruالزبير, iyo Dhalxahطلحة, iyo Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf عبد الرحمن بن عوف, iyo Abuu Cubaydah bin Al Jarraaxأبوعبيدة بن الجراح , iyo Sacd bin Abii Waqqaas سعد بن أبي وقاص."

Markaasuu Saciid سعيدmarkuu sagaalkaas tiriyay ayuu kan tobnaad ka aamusay. Markaasay ragguu u warramayay waxay yiraajdeen:
"Ilaahay ayaan kugu dhaarinnaye waa kee kan tobanaad?"
Wuxuu yiri:
"Ilaahay ayaad igu dhaariseen, marka Abuu Al Acwarأبوالأعور\ wuxuu ku jiraa jannada."
Wuxuu yiri:
"waa, isaga laftiisa, Saciid bin Zayd bin Camr bin Nufaylسعيد بن زيد بن عمرو بن نفيل."

Cabdu Al Rraxmaan bin Cawfعبد الرحمن بن عوف wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"عشرة في الجنة، أبوبكر في الجنة، وعمر في الجنة، وعثمان في الجنة، وعلي في الجنة، وطلحة في الجنة، والزبير في الجنة، وعبد الرحمن بن عوف في الجنة، وسعد بن أبي وقاص في الجنة، وسعيد بن زيد في الجنة وأبوعبيدة بن الجراح في الجنة."

"Cashratun fii al jannati: Abuu Bakr fii al jannah, wa Cumaru fii al jannah, wa Cuthmaanu fii al jannah, wa Calii fii al jannah, wa Dhalxah fii al jannah, wa Al Zzubayru fii al jannah , wa Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf fii al jannah, wa Sacd bin Abii Waqqaas fii al jannah, wa Saciid bin Zayd fii al jannah, wa Abuu Cubayda bin Al Jarraax fii al jannah."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Tobani waxa ku jiraan jannada: Abuu Bakrأبوبكر wuxuu ku jiraa jannada, Cumarna عمر wuxuu ku jiraa jannada, Cuthmaannaعثمان wuxuu ku jiraa jannada, Caliinaعلي wuxu ku jiraa jannada, Dhalxah-naطلحة wuxuu ku jiraa jannada, Al Zzubayru-naالزبير

wuxuu ku jiraa jannada, Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf-na**وعبد الرحمن بن عوف** wuxuu ku jiraa jannada, Sacd bin Abii Waqqaas-na**وسعد بن أبي وقاص** wuxuu ku jiraa janada, Saciid bin Zayd-na**وسعيد بن زيد في الجنة** wuxuu ku jiraa jannada, Abuu Cubayda bin Al Jarraax-na**وأبوعبيدة بن الجراح** wuxuu ku jiraa jannada."

(Al Bukhaarii**البخاري**) wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

" عبد الرحمن بن عوف في السماء أمين في الأرض."

"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf amiinun fii Al Ssamaa'i, amiinun fii al ardi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waa mid laga aaminay Samada, arligana laga aaminay."

Dhawrsanaantiisa intuu dan yarta ahaa

Anas**أنس** wuxuu wariyay:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu walaaleeyey Muhaajiriinta **المهاجرين** iyo Ansaarta**\الأنصار,** wuxuuna walaaleeyey Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** iyo Sacd bin Al Rrabiicu**\سعد بن الربيع.**

Markaasuu Sacd**سعد** wuxuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** ku yiri:
"waxaan leeyahay maal, marka waan kala baranaynnaa oo nus adigaa iska leh, waxaanna ii dhaxda laba haween ah marka fiiri middaad jeclaato waan kuu furayaaye, oo markaas markay ciddadeedu dhammaato oo ay xalaal noqoto adigu guurso."

Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** wuxuu yiri:
"xaajo kama lihi oo dooni mayo haweenkaaga iyo maalkaagaba, Ilaahayna ha kuu barakeeyo haweenkaaga iyo maalkaagaba, ee waxaad i tustaan meeshuu suuqu yahay."

Markuu ganacsaday oo uu maal helay ayuu guursaday. Markaasuu Nabiga u yimid Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo ku yiri:

"أولم ولو بشاة."

"awlim wa law bi shaatin",
oo macnihiisu yahay:

"waliimo bixi, ceesaan keli ah haba ahaatee."

Markaasuu maalkiisu batay ilaa ay uga yimaadaan toddoba boqol oo rati oo bur u sida iyo cunno. Markaasay markay Al Madiinah**المدينة** soo galeen ayay dadku dhawaaq magaalada la gilgileen.

Markaasay Caa'ishah\عائشة waxay tiri:
"maxay tahay gilgilashadaani?"
Waxaa lagu yiri:
"waa awr u timid Cabdu Al Rraxmaanu bin Caw**عبد الرحمن بن عوف**, toddoba boqol oo rati oo badar iyo bur iyo cunno sida."

Markaasay Caa'ishah\عائشة waxay tiri:
"waxaan maqlay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh**:**

"يدخل عبد الرحمن بن عوف الجنة حبوا."

"yadkhulu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf al jannata xabwan."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"wuxuu jannada gelayaa Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** isagoo gurguuranaya."

Markaasuu markuu warkaasu gaaray Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxu yiri:
"hooyoy waxaan ku mara gashaday inay awrta iyo waxay sidaanba iyo reeryadooda iyo udbohooduba ay sadaqo Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** daraadiis u yihiin."

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ayaa cunno loo keenay, wuuna soomanaa. Markaasuu wuxuu yiri:
"waa la dilay Muscab bin Cumayr**مصعب بن عمير**, anigana wuu iga khayr badnaa, markaasaa go'iisa kafan looga dhigay. Markaasaa haddii go'a madaxa laga saaro ay labadiisa lugood muuqanayeen, haddii labada lugood laga saarana uu madixiisu bannaanaanayaa. Waxaa isaguna la dilay Xamzah**حمزة**, isagaana iga khayr badnaa. Markaasaa annaga addunka wax badan nalaga siiyay oo maal ah, waxaanna ka baqnay in ajarka xasanaatkeenna adduunkaan naloogu soo dedejiyay."
Markaasuu booy, cunnadiina uu iskaba daayay (oo kuma uusan afurin).

Al Muxibbu Al Dhabarii**المحب الطبري** Xadiithkiisa arrinkaan ku saabsan wuxuu wariyay inuu u booyay sababta so socota:
"waxaa loo keenay saxan ay saaran yihiin muufo iyo hilib, markaaasuu ooyay. Markaasaan weydiinnay:
"Abaa Muxammadow**أبا محمد**, maxaad la booyaysaa?"
Wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhintay isagoo isaga iyo qoyskiisuba ayan ka dhergin muufo shaciir laga sameeyey, umana jeedo in annaga dib naloogu dhigay wa khayr noo leh."

Siduu Cuthmaan\عثمان u doortay

Marka Cumar**عمر**, Allaha raalli ka noqdee, la oofsaday Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** wuxuu Asxaabu Al Shuuraa**أصحاب الشورى** ku yiri, waana kuwa uu Cumar**عمر** khilaafada dhex dhigay in laga dhex doorto:
"yaa khilaafada ka haraya oo ka baxaya oo markaas qofka khaliifka noqonaya muslimiinta u dooraya?"
Markaasayan u jawaabin.
Markaasuu wuxuu yiri:
"anigaa naftayda khaliifnimada ka saaray, muslimiintana khiliifka u dooraya."
Markaasay u jawaabeen oo ka yeeleen, isaguna uu cahdi iyo xarig arrinkaas ku saabsan uu ka wada qaaday. Markaasuu Cuthmaan**عثمان** doortay oo uu baayacay.

Hodannimadiisa iyo deeqsinnimadiisa

Wuxuu lahaa ganacsi aad u wayn, wuuna maal badnaa. Waxa la sheegay inuu Ummu Salamah**أم سلمة** usoo galay uuna ku yiri:
"hooyoy, waxaan ka baqay inuu maalka badnidiisu i halaago!"
Waxay tiri:
"wiilkaygow, sadaqayso oo nafaqee."

Al Zuhriyyu**الزهري** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu sadaqaystay maalkiisa nuskiis oo ah afar kun, kaddibna wuxuu sadaqaystay afartan kun, kaddibna wuxuu sadaqaystay afartan kun oo Diinaar, kaddibna wuxuu mujaahidiin siiyay shan boqol oo faras oo jihaadka jidka Ilaahay ugu fuulaan, kaddibna wuxuu mujaahidiin siiyey shan boqol oo rati oo ay jihaadka jidka Ilaahay ugu fuulaan. Maalkiisoo idilna wuxuu ka yimid ganacsi."

Waxaa noo warramay Ibraahiim bin Sacd**إبراهيم ين سعد** oo aabihiis ka wariyay oo awoowihiis ka wariyay oo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu u yimid isagoo dadka tujinaya uu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** damcay inuu dib usoo joogsado si uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, imaam u noqdo oo dadka tujiyo, markaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu u tilmaamay inuu meeshiisa ku sugnaado. Markaasuu salaadda sii watay, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku daba tukaday.

Waa intaas warka ibnu Al Athiir**إبن الأثير**.

Kitaabka Dhabaqaatu ibnu Sacd\طبقات إبن سعد

Muxammad bin Sacd bin Maniic Al Haashimii**محمد بن سعد بن منيع الهاشمي**, oo mawlohooda**مولاهم** ahaa (waana addoon reer Banii Haashim**بني هاشم** lahaayeen kaddibna xoreeyeen oo mawle kaasaa la yiraahdaa, in kastoo macaani kalena uu leeyahay), Abuu Cabdu Allaahi Al Bisrii**أبوعبد الله البصري** , degayna Baghdaad**بغداد**, wuxuu ahaa kaatibka Al Waaqidii**الواقدي**, taariikh yaqaanka kitaabka siiradana leh, oo isagaasuu kutubbada u dhigi jiray intuu u yeeriyo, wuxuuna ka mid ahaa xuffaath-dda**الحفاظ** waaweyn oo lagu kalsoon yahay, allifayna kutubbo. Wuxuuna allifay kitaabka la yiraahdo Al Dh-dhabaaqaatu Al Kubraa li ibni Sacd**الطبقات الكبرى لإبن سعد**. Wuxuuna ku dhintay Baghdaad**بغداد** bisha Jumaadii Al Aaakhirah**جماد الآخرة** ee sanadka laba boqol iyo soddon isagoo laba iyo lixdan jir ah. Wuxuuna ahaa nin cilmi badan iyo axaadiith badan. Kitaabkiisaan Al Dh-dhabaqaatu Al Kubraa**الطبقات الكبرى** wuxuu ka kooban yahay lix mujallad, oo mujalladka koowaad uu yahay Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inta kalena taariikhda asxaabtiisa iyo taabiciinta qaarkood. Kitaabkaanu wuxuu ka mid yahay kuwa loogu kalsoon yahay ee Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo asxaabtiisa iyo taabiciintaba, wuxuuna ka mid yahay kutubbada la isku yiraahdo Ummuhaatu Al Kutubi**أمهات الكتب**, oo ah hooyooyinka kutubbada Diinta islaamka laga qaato. Nuskhada aan haystana waxaa lagu daabacay Daaru Al Fikri**دار الفكر** ee Bayruut**بيروت** arliga Lubnaan**لبنان**.
Ibnu Sacad**إبن سعد** wuxuu wariyay oo yiri waxay ka mid yihiin:

"Wuxuu arliga xabashada u haajaray labada Hijraba."
Wuxuu kaloo yiri:
"Al Miswaru bin Makhramah**المسور بن مخرمة** wuxuu yiri:
"anigoo safar ka mid ah, una dhexeeya Cuthmaan**عثمان** iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**, Cabdu Al Rraxmaanna**عبد الرحمن** uu iga horreeyo labbisanna khamiis madaw, ayuu Cuthmaan**عثمان** wuxuu yiri:
"waa kee ninka khamiiska madawo labbisan?"
Waxay yiraahdeen:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**\."

Markaasuu Cuthmaan**عثمان** ii yeeray oo yiri:
"Miswarow**مسور**!" Waxaan iri:
"labbayka yaa Amiiru Al Mu'miniina**لبيك يا أمير المؤمنين**!"
Markaasuu wuxuu yiri:
"qofka yiraahda inuu abtigaa uga khayr badan yahay Hijrada koowaad iyo Hijrada labaad been ayuu sheegay."

Wuxuu kaloo yiri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ku guursaday haweeney Ansaarta ka mid ah soddon kun (oo Dirham)."

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dhigay naqshadda daaraha Al Madiinah**المدينة**, markaasuu wuxuu Banii Zuhrah**بني زهرة** siiyay masjidka xaggiisa dambe gadaashiisa. Sidaasuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu u yeeshay Al Xash-shu**الحش,** oo ah geedo timireed yaryar aan la waraabin."

Caruurta Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**

Caruurta Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waxay ahaayeen:

(Kow) Saalim Al Akbar**سالم الأكبر**, wuxuuna dhintay islaamka hortiis, hooyadiisna waa Ummu Kulthuum bintu Cutbah bin Rabiicah**أم كلثوم بنت عتبة بن ربيعة.**
(Laba) Ummu Al Qaasim**أم القاسم**, ayaduna waxay dhalatay zamanka jaahiliyada islaamka ka horreysey, hooyadeedna waa bintu Shaybah bin Rabiicah bin Cabda Shams **بنت شيبة بن ربيعة بن عبد شمس\.**
(Saddex) Muxammad**محمد**, isagaana kuniyo looga dhigay. Muxammadkaan**محمد** ayuu Sheekh Suufi ku abtirsadaa oo dhalay.
(Afar) Ibraahiim**إبراهيم**.
(Shan) Xumayd**حميد**.
(Lix) Ismaaciil**إسماعيل**.
(Toddoba) Xamiidah**حميدة**.
(Sideed) Aamatu Al Rraxmaani**أمة الرحمن**. Intaas hooyadoodna waa Ummu Kulthuum bintu Cuqbah bin Abii Mucaydh bin Abii Camr bin Umayyah bin Cabda Shams **أم كلثوم بنت عقبة بن أبي معيط بن أبي عمرو بن أمية بن عبد شمس\.**
(Sagaal) Macan**معن**, iyo
(Toban) Cumar**عمر**, iyo
(Kow iyo toban) Zayd**زيد**, iyo
(Laba iyo toban) Aamatu Al Rraxmaani Al Sughraa**آمة الرحمن الصغرى,** intoodaasna hooyadood waa Sahlatu bintu Caasim bin Cadiyy Al Jadd bin Al Cajlaan bin Baliyyi **سهلة بنت عاصم بن عدي الجد بن عجلان بن بلي** oo ka tirsan qabiilka Qudaacah**قضاعة**, kana mid ah Ansaarta**الأنصار.**
(Saddex iyo toban) Curwah Al Akbar**عروة الأكبر,** oo la dilay Maalinta Ifriiqiyah**إفريقية** (waana duullaanka Libiya iyo Tuunis islaamka loogu furayay), hooyadiisna waa Baxriyyatu bintu Haani' bin Qabiisah bin Haani' bin Mascuud bin Abii Rabiicah **بحرية بنت هانئ بن قبيصة بن هانئ بن مسعود بن أبي ربيعة** una dhashay Banii Shaybaan**بني شيبان.**
(Afar iyo toban) Saalim Al Asghar**سالم الأصغر,** oo lagu dilay Maalinta Furashada Ifriiqiyah**إفريقية**, hooyadiisna waa Sahlatu bintu Suhayl bin Camr bin Cabda Shams bin Cabda Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir bin Lu'ayy **سهلة بنت سهيل بن عمرو بن عبد شمس بن عبد ود بن نصر بن مالك بن حسل بن عامر بن مؤي\.**
(Shan iyo toban) Abuu Bakr**أبوبكر,** hooyadiisna waa Ummu Xakiim bintu Qaarith bin Khaalid bin Cubayd bin Suwayd**أم حكيم بنت قارظ بن خالد بن عبيد بن سويد** oo ayaga xaliifkooda ahaa.
(Lix iyo toban) Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Rraxmaan**عبد الله بن عبد الرحمن** oo lagu dilay Ifriiqiyah**إفريقية** Maalinta la furtay, hooyadiisna waa ibnatu Abii Al Xiis bin Raafic bin Imri'u Al Qays bin Zayd bin Cabdu Al Ash-hal **إبنة أبي الحيص بن رافع بن امرأ القيس بن زيد بن**

عبد الأشهل oo u dhalatay Al Aws**\الأوس** ee Ansaarta**\الأنصار.**

(Toddoba iyo toban) Abuu Salamah**\أبوسلمة**, waana Cabdu Allaahi Al Asghar **عبد الله \الأصغر**, hooyadiisna waa Tumaadir bintu Al Asbagh bin Camr bin Thaclabah bin Xisn bin Damdam bin Cadiyy bin Jannaab **تماضر بنت الأصبغ بن عمرو بن ثعلبة بن حصن بن ضمضم بن عدي الجناب** oo qabiilka Kalb**\كلب** u dhashay, waana kalbiyadda ugu horreysay oo uu nin Quraysh**\قريش** ahi guursado.

(Sideed iyo toban) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cabdu Al Rraxmaanu **عبد الرحمن بن عبد الرحمن\,** hooyadiisna waa Asmaa'u bintu Salaamah bin Mukharrabata bin Jandal bin Nahshal bin Daarim**\أسماء بنت سلمة بن مخربة بن جندل بن نشهل بن دارم.**

(Sagaal iyo toban) Muscab**\مصعب**, iyo

(Labaatan) Aaminah**\آمنة**, iyo

(Kow iyo labaatan) Maryama**\مريم**, oo saddexdoodaba ay dhashay Ummu Xurayth **أم حريث**, oo ka mid ahayd qafaalka Bahraa'a**\بهراء.**

(Laba iyo labaatan) Suhayl**\سهيل**, waana Abuu Al Abyad**\أبوالأبيض,** hooyadiisna waa Majdu bintu Yaziid bin Salaamah Thii Faa'ish Al Ximyariyyah **مجد بنت يزيد بن سلامة ذي فائش الحميرية**, waana qabiilka Ximyar**\حمير** oo Yaman**\يمن** dega.

(Saddex iyo labaatan) Cuthmaan**\عثمان**, hooyadiisna waa Ghazaal bintu Kisraa **غزال بنت كسرى**, waana gabadha uu dhalay boqorka iiraan**\إيران** oo marka la jebiyay lasoo qafaalay oo addoontiisa ahayd, waxayna ka mid ahayd qafaalka Sacd bin Abii Waqqaas **سعد بن أبي وقاص** Maalinta Al Madaa'in**\يوم المدائن.** Ghazaal**\غزال** waxaa lala soo qafaalay laba kale oo walaaleheed ah, oo middoodna waxaa gatay Al Xusaynu bin Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi**\الحسين بن فاطمة بنت رسول الله صلى الله عليه وسلم** Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna u dhashay Zaynu Al Caabidiina**\زين العابدين**, oo ay dhashiisa ka mid yihiin Asharaafta reer Shariif Abow Imaankiyow ee reer Shingaanni Allaha raalli ka wada noqdee.

(Afar iyo labaatan) Curwah**\عروة**, oo dhintay isagoo aan cirib reebin.

(Shan iyo labaatan) Yaxyaa**\يحيى**, oo hooyadiisna addoon uu lahaa ahayd.

(Lix iyo labataan) Bilaal**\بلال**, oo hooyadiisna addoon u lahaa ahayd. Labadooduna cirib ma reebin.

(Toddoba iyo labaatan) Ummu Yaxyaa bintu Cabdu Al Rraxmaanu**\أم يحيى بنت عبد الرحمن,** hooyadeedna waa Zaynab bintu Al Sabbaax bin Thaclabah bin Cawf bin Shubayb bin Maazin**\زينب بنت الصباح بن ثعلبة بن عوف بن شبيب بن مازن ,** oo sidoo kale ayaduna ka mid ahayd qfaalka Bahraa'a**\بهراء.**

(Sideed iyo toban) Juwayriyyah bintu Cabdu Al Rraxmaanu**\جويرية بنت عبد الرحمن,** hooyadeedna waa Baadiyatu bintu Ghaylaan bin Salamah bin Mucattib Al Th-thaqafiyyi **بادية بنت غيلان بن سلمة بن معتب الثقفية\.**

Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo gadaashiisa ku tukaday

Waxaa noo warramay Ismaaciil bin Ibraahiim Al Asadiyyi bin Culayyah **إسماعيل بن إبراهيم الأسدي بن علية** oo ka wariyay Ayyuub**\أيوب** oo ka wariyay Muaxammad bin Siiriin **محمد بن سيرين** oo ka wariyay Camr bin Wahb**\عمرو بن وهب** oo yiri:

"waxaan la joognay Al Mughiirah bin Shucbah**\المغيرة بن شعبة,** markaasaa la waydiiyay: "Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, axad ummaddaan ka mid ahi imaam salaadda ma ugu noqoday aan Abuu Bakr**\أبوبكر** ahayn?"

Wuxuu yiri:
"haa! Waxaan la soconnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo safar ku jira, markaasay markay arooryadii ahayd waqtiga suxuurta ayuu ratigayga luqunta ku dhuftay, markaasaan waxaan u maleeyey inuu doonayo inuu xaajao u baxo. Markaasaan raacay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasaan is raacnay, oo markaan dadka ka libirnay ayuu hashiisa kasoo degay, uuna dhaqaaqay, uuna iga libray oo aan arki waayay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam in badan maqnaa, kaddibna uu yimid oo yiri:

"حاجتك يا مغيرة؟"

"xaajatuka yaa Mughiirah?"
oo macnihiisu yahay:

"xaajo ma leedahay Mughiirow? Ama xaajadaada masoo dhammaysatay Mughiirow?"
Waxaan iri:
"xaajo ma lihi."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"فهل معك ماء؟"

"fa hal macaka maa'un?"
oo macnihiisu yahay:

"hadaba biyo ma wadataa?"
Waxaan iri:
"haa."
Markaasaan waxaan soo qaaday sibraar ka laadlaaday xagga dambe ee hashayda, markaasaan u keenay oo aan ugu shubay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam labadiisa gacnood dhaqay oo uu si fiican u dhaqay, waxaana shaki iiga jiraa inuu marka hore ciid mariyay iyo in kale, kaddibna wuxuu dhaqay wajigiisa, kaddibna wuxuu damcay inuu labadiisa gacnood qaawiyo isagoo labbisnaa jubbad Shaamiyah**شامية** ah oo Shaam**الشام** lagu soo sameeyey oo gacankeedu ciriiri yahay. Markaasay inuu gacanta kor uga laabo ciriiri ku noqotay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu markaas gacanta jubbadda hoosteeda kasoo bixiyay. Markaasuu wajigiisa dhaqay iyo labadiisa gacnood, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kaddibna wuxuu masaxay guudka timihiisa, wuxuuna masaxay cimaamadda, wuxuuna masaxay labadiisa khuff. Kaddibna waan soo fuulnay oo waxaan dadka u nimid ayadoo salaadda la aqiimay, oo uu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف**\ hor maray uuna markaas hal rakco tujiyay, ayna markaas ku dhex jiraan rakcada labaad.

Markaasaan waxaan damcay inaan u digo, markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iga reebay. Markaasaan la tukannay rakcadaan ku gaarnay, midda naga hor martayna aan qallaynay (la xiriirinnay)."

Ibnu Sacd**إبن سعد** wuxuu yiri:

"waxaan Xadiithkaan u sheegay Muxammad bin Cumar**محمد بن عمر**, oo yiri:
"arrinkaasu wuxuu ku dhacay Duullaanka Tabuuk**غزوة تبوك**, oo Al Mughiirah**المغيرة** wuxuu siday waysada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu ku tukaday Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** gadaashiisa wuxuu yiri:

"ما قبض نبي حتى يصلي خلف رجل صالح من أمته."

"maa qubida Nabiyyun xattaa yusallii khalfa rajulin saalixin min ummatihi."
Xadithka macnihiisu waxaa weeye:

"Nabina ruuxiisa lama qaban oo lama oofsan jeer uu ku tukado gadaasha nin suuban oo ummaddiisa ka mid ah."

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** haraggiisu wuu xajiimoon jiray markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u oggolaaday inuu labbisto qamiis xariir ah, oo ragga xariirtu waa ka xaaraan.
Ibraahiim bin Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**إبراهيم بن عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** hadduu Makkah**مكة** yimaado wuu kahan jiray inuu ku dego guriigiisa Makkah**مكة** ku yiillay oo uu ka haajiray."

Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo Jibriil\جبريل iyo ina Cawf\إبن عوف

Ibraahiim bin Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**إبراهيم بن عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay wuxuu yiri:

"يا إبن عوف، إنك من الأغنياء ولن تدخل الجنة إلا حبوا فأقرض الله يطلق لك قدميك."

"Yaa ibna Cawf, innaka mina al aghniyaa'i wa lan tadkhula al jannata illaa xabwan fa aqridi Allaaha yudhliq laka qadamayka!"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"ina Cawfow**إبن عوف** ! Adigu waxaad ka mid tahay kuwa hodanka ah, jannadana geli maysid adigoo gurguuranaya mooyee. Marka Ilaahay amaahi oo uu markaas labadaada cagood wuu kuu toosinayaaye."
Markaasuu ibnu Cawf**إبن عوف** wuxuu yiri:
"Maxaan Ilaahay amaahiyaa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?"
Wuxuu yiri:

"تبدء بما أمسيت فيه."

"tabda'u bimaa amsayta fiihi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"waxaad ka bilawdaa waxa casarku kuugu soo galay adigoo haysta, oo ah maalkiisa oo dhan weeye."
Wuxuu yiri:
"dhammaantiisaa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"نعم."

"Nacam", oo ah "haa."

Markaasuu ibnu Cawf**إبن عوف** baxay isagoo inuu taas yeelo doonaya. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ciddiray oo markuu u yimid ku yiri:

"إن جبريل قال: "مر إبن عوف فليضف الضيف وليطعم المسكين وليعط السائل ويبدء بمن يعول فإنه إذا فعل ذلك كان تزكية ما هو فيه."

"**inna Jibriila qaala: "muri ibna Cawfin fal yudif al ddayfa wal yudhcimi al miskiina wal yucdhi al ssaa'ila wa yabda'u biman yacuulu fa innahu ithaa facala thaalika kaana tazkiyatu maa huwa fiihi."**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Jibriil**جبريل** wuxuu yiri: "ina Cawf**إبن عوف** waxaad amartaa inuu martida sooro, miskiinkana uu cunno siiyo, kan baryana uu wax siiyo, uuna ka bilaabo qoyskiisa uu madaxda u yahay. Isagu hadduu sidaas yeelo taasu waxay u ahaanaysa daahirinta maalka uu leeyahay."

Runlowga baarriga ah

Ummu Salamah\أم سلمة, haweenta Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay tiri: "waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo haweenkiisa ku leh:

"إن الذي يحافظ عليكن بعدي لهو الصادق البر، اللهم أسق عبد الرحمن بن عوف من سلسبيل الجنة."

"inna allathii yuxaafithu calaykunna bacdii lahuwa al saadiqu al baarru, Allaahumma asqi Cabdu Al Rraxmaana bin Cawfin min Salsabiili al jannati."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"midka idin ilaalinaya aniga dabaday waa runlowga baarriga ah, Ilaahayow ka waraabi Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** Salsabiilka**السلسبيل** Jannada." (Salsabiil jannadu wuxuu ku xusan yahay Aayadda sideed iyo toban ee Suuratu Al Insaani**سورة الإنسان:**

عَيْنًا فِيهَا تُسَمَّى سَلْسَبِيلًا (18)

"Caynan fihaa tusammaa Salsabiilan(18)",
oo macneheedu yahay:

"Il jannada dhexdeeda ku taallana waxaa la yiraahdaa Salsabiilanسَلْسَبِيلًا (18).")

Ilaalintiisa haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Axmad bin Muxammad Al Azraqiyyu**أحمد بن محمد الأزرقي** wuxuu Xadiithkiisa ku yiri: "Ibraahiim bin Sacd**إبراهيم بن سعد** wuxuu yiri: "waxaa ii warramay qaar ka mid ah ehelkayga oo dhasha Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ka mid ah inuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ku gaday beeruhuu ku lahaa Kaydamata**كيدمة**, ahaana sahamkiisa maalka yuhuudda Banii Al Nnadiir**بني النضير**, afartan kun oo Diinaar, oo uu markaas u qaybiyay haweenka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Xiriirintiisa qaraabada

Cabdu Al Malik bin Camr Al Caqadii**عبد الملك بن عمرو العقدي** ayaa noo warramay wuxuuna yiri: "Cabdu Allaahi bin Jacfar**عبد الله بن جعفر** wuxuu nooga wariyay Ummu Bakr bintu Al Miswaru**أم بكر بنت المسور** inuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** uga iibiyay dhul uu lahaa Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** afartan kun oo Diinaar, oo uu markaas u qaybiyay fuqarada Banii Zuhrah**بني زهرة** iyo dadka kale oo u bahnaa iyo Hooyooyinka Mu'miniinta, waa haweenka Nabigee, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Al Miswaru**المسور** wuxuu yiri:
"markaasaan waxaan Caa'ishah**عائشة** u keenay nasiibkeeda ee maalkaas, markaasay waxay tiri:
"yaa kan soo dhiibay?"
Waxaan iri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ."
Markaasay waxay tiri:
"Rasuulka Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"لا يحنوا عليكن إلا الصابرون، سقا الله إبن عوف من سلسبيل الجنة."

"laa yaxnuu calaykunna illaa al ssabiruuna, saqaa Allaahu ibna Cawfin min

Salsabiili al jannati."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"idiin caadhifoon oo idiin beer dulci mayaan intaan ahayn kuwa sabra. Ilaahay ibna Cawf **إبن عوف** ha ka waraabiyo Salsabiilka**السلسبيل** jannada."

Waxay yiraahdeen:
"marka Cumar**عمر** khaliifo laga dhigay sanadka saddex iyo tobnaad, wuxuu sanadkaas xajka madax uga dhigay oo uu diray Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** oo dadka xajjisiiyay. Wuxuu kaloo Cumar**عمر** la xajjiyay xajka ugu dambeeyey oo uu Cumar**عمر** xajjiyay sanadka saddex iyo labaatan. Sanadkaasna Cumar**عمر** wuxuu u oggolaaday haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inay xajjiyaan.

Markaasuu wuxuu saaray hawdajyo awr looga dul dhisay, wuxuuna ku daray Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** . Markaasuu Cuthmaan**عثمان** isagoo hashiisa saaran hortooda socon jiray, oo uusan axadna u oggolaanayn inuu usoo dhowaado haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Cabdu Al Rraxmaan bin Cawfna**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu socday isagoo hashiisa saaran gadaashooda, markaasuusan axadna u oggolaanayn inuu usoo dhowaado.

Markaasay haweenku Cumar**عمر** kula degaan meel kasta oo uu dego. Markaasaa waxaa dejin jiray Cuthmaan**عثمان** iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** , waxayna dejin jireen dooxooyinka buuraha dhexdooda ah, ayna degmadooda u jeedin jireen xagga buuraha, labadooduna ay degi jireen dooxada afkeeda, oo ayan sidaas u dhaafi jirin axadna inuu haweenka ag maro.

Marka Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** laga dhigay Khaliifah sanadka afar iyo labaatan wuxuu sanadkaas xilka xajjisiinta dadka u dhiibay Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** oo sanadkaas dadka xajjisiiyay."

Ina Cawf\إبن عوف iyo Asxaabu Al Sh-shuuraa\أصحاب الشورى

Yaziid bin Haaruun**يزيد بن هارون** wuxuu yiri:
"waxaa noo warramay Abuu Al Mucallaa Al Juzariyyu**أبوالمعلا الجزري** oo ka wariyay Maymuun bin Mihraan**محمد بن مهران** oo ka wariyay ibnu Cumar**إبن عمر** inuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** Asxaabu Al Shuuraa**أصحاب الشورى** (waa shanta kalee oo kala ahaa Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** iyo Calii bin Abii Dhaalib **علي بن أبي طالب** iyo Sacd bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص** iyo Al Zzubayru ibnu Al Cawwaamu**الزبير إبن العوام** iyo Dhalxah bin Cubaydu Allaahi**طلحة بن عبيد الله,** Allaha dhammaantood raalli ka noqdee) ku yiri:
"ma oggoshihiin inaan idiin dooro kiinna khaliif noqonaya aniguna aan khilaafada ka haro?"
Markaasuu Calii**علي** wuxuu yiri:

"haa, anigaana ah kan ugu horreeya oo taas raalli ku ah, maxaa yeelay waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh:

"أنت أمين في أهل السماء وأمين في أهل الأرض."

"anta amiinun fii ahli Al Ssamaa'i wa amiinun fii ahli al ardi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"adigu waxaad tahay miday aamineen ehelka Samada ku nool, iyo miday aamineen dadka arliga ku nooli."

Saciidnimaa u hor martay

Waxaa noo warramay Muxammad bin Kathiir Al Cabdii**محمد بن كثير العبدي** oo yiri: "waxaa noo warramay Sulaymaan bin Kathiir**سليمان بن كثير** oo ka wariyay Al Zuhriyyu **الزهري** oo ka wariyay Ibraahiim bin Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **إبراهيم بن عبد الرحمن بن عوف**\ oo yiri:

"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ayaa suuxay, kaddibna wuu soo kacay, uuna yiri:
"miyaan suuxay oo miyir beelay?"
Waxay yiraahdeen:
"haa."
Wuxuu yiri:
"waxaa ii yimid laba malag ama laba nin oo adadag oo dhaqan adag leh, markaasay ila dhaqaaqeen. Kaddibna waxaa yimid laba nin ama laba malag oo labadaas hore ka beer jilicsan ama ka naxariis badan markaasay waxay yiraahdeen:
"xaggee baad u wadaan?"
Waxay labada hore yiraahdeen:

"waxaan u wadnaa Al Caziizu Al Amiinu**العزيز الأمين**" oo macnihiisu yahay: "Midka aan laga adkaan karin oo muslimiinta nabad geliya, ahna Ilaahay."
Markaasay labada dambe waxay yiraahdeen:
"iska sii daaya, maxaa yeelay isagu wuxuu ka mid yahay kuwa sacaadada**السعادة** loo dhigay, waana jannadee, isagoo weli ku jira caloosha hooyadiis."

Waxaa noo warramay Muxammad bin Xumayd Al Cabdiyyi**محمد بن حميد العبدي** oo ka wariyay Macmar**معمر** oo ka wariyay Al Zuhriyyi**الزهري** oo ka wariyay Xumayd bin Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**حميد بن عبد الرحمن بن عوف** oo ka wariyay hooyadiis Ummu Kulthuum**أم كلثوم** oo ka mid ahayd haweenka ugu horreeyey oo Hijrooday, waxayna ka tiri Hadalka Ilaahay ee Aayadda shan iyo afartan ee Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة:**

وَاسْتَعِينُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ

"Istaciinuu bi al ssabri wa al ssalaati(45)",
oo macneheedu yahay:

"lana kaashada sabir iyo salaad(45)": waxaa suuxay Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **عبد**

الرحمن بن عوف suuxid ay u maleeyeen inuu dhimanayo. Markaasay haweentiisu Ummu Kulthuum**أم كلثوم** usoo baxday oo timid masjidka ayadoo la kaashanaysa waxa lagu amray inay la kaashato oo ah sabir iyo salaad."

Waxaa noo warramay Muxammad bin Cumar**محمد بن عمر** oo yiri: "waxaa noo warramay Usaamah bin Zayd Al Llaythii**أسامة بن زيد الليثي** oo ka wariyay Saalix bin Ibraahiim bin Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**صالح بن إبراهيم بن عبد الرحمن بن عوف** oo yiri:
"Tumaadir bintu Al Asbagh**تماضر بنت الأصبغ** waxay u heshay dhaxal ahaan markuu ninkeeda Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** dhintay "rubucu al th-thumuni**ربع الثمن**" oo ah maalka marka loo qaybiyo sideed meelood meel rubuceed, waxayna qaadatay boqol kun. Waxayna ahayd mid afar haween ka mid ah, oo afar ayaa u dhaxday weeyey oo uu ka dhintay."

Waxaa noo warramay Al Fadlu bin Dukaynu Abuu Nucaym**الفضل بن دكين أبونعيم** oo yiri: "waxaa noo warramay Kaamil Abuu Al Calaa'u**كامل أبوالعلاء** wuxuuna yiri: "waxaan maqlay Abuu Saalix**أبوصالح** oo leh:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuu dhintay wuxuuna ka tegay saddex haweeney, oo ay markaas mid walboo ka mid ahi ka heshay maalkuu ka tegay sideetan kun."
Waa intaas warkaan kasoo qaadannay kitaabka Al Dhabaqaato Al Kubraa ee ibnu Sacd **الطبقات الكبرى لإبن سعد\,** Allaha dambigiisa dhaafee.

Kitaabka Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i\سير أعلام النبلاء

Al Imaamu Al Xaafithu Abuu Cabdu Allaahi Muxammad bin Cuthmaan Al Th-thahabii**الإمام الحافظ أبوعبد الله محمد بن عثمان الذهبي**, oo noolaa inta u dhexeysey sanadaha lix boqol iyo saddex iyo toddobaatan ilaa toddoba boqol iyo sideed iyo afartan Hijriga, kutubbaduu dhigay waxaa ka mid ah Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i**سير أعلام النبلاء** , uu hareerihiisana ku dhigan yiahay kitaabkiisa kale oo la yiraahdo Ixkaamu al rrijaali min miizaani al ictidaali**إحكام الرجال من ميزان الإعتدال.**
Kitaabkaanu wuxuu ka kooban yahay toddoba iyo toban mujallad iyo laba mujallad oo fahaarista**فهارس** ah. Nuskhada**نسخة** aan haystana waxaa lagu daabacay Daaru Al Fikri **دار الفكر**\ ee Bayruut**بيروت** dalka Lubnaan**لبنان** sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol toddoba iyo toban, una dhiganta kun sagaal boqol toddoba iyo sagaashan miilaadiga.

Al Imaamu Al Th-thahabii**الإمام الذهبي** wuxuu kitaabkiisa Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i **سير أعلام النبلاء**\ ku wariyay:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** manaaqibtiisa waxaa ka mid ah inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga marag kacay inuu jannada gelayo, iyo inuu ka mid yahay ragga Badar**بدر** ka qayb galay oo lagu yiri:

"اعملوا ما شئتم."

"icmaluu maa sh'itum"
oo ah:

"fala waxaad doontaan dambiyadiinna waa la dhaafee" (Xadiithka oo dhanna waa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ragga Badar**بدر** ka yiri**:**

"وما يدريك يا عمر، لعل الله قد إطلع إلى أصحاب بدر يوم بدر فقال: "اعملوا ما شئتم فقد غفرت لكم."

"Wa maa yudriika yaa Cumaru, lacalla Allaaha qad idh-dhalaca ilaa asxaabi Badr yawma Badr fa qaala: "acmaluu maa shi'tum fa qad ghafartu lakum!"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Maxaa ku ogaysiiyay Cumarow**عمر** oo waxaa dhici karta inuu Ilaahay fiiriyay asxaabta Badr**بدر** ee Maalinta Badr**بدر** uuna ku yiri: "Waxaad doontaan sameeya oo waan idiin dambi dhaafay!"), iyo inuu ka mid yahay dadkay Aayaddaanu ka hadlayso heleyna Raallinnimada Ilaahay ee Baycatu Al Ridwaani**بيعة الرضوان** ee Al Xudaybiyyah**الحديبية** oo uu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** Aayadaha sideed iyo toban ilaa kow iyo labaatan ee Suuratu Al Fatxi**سورة الفتح** uga yiri:

لَقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنِ الْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنْزَلَ السَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَابَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا (18)

"Llaqad radiya Allaahu cani al mu'miniina ith yubaayicuunaka taxta al sh-shajarati fa calima maa fii quluubihim fa anzala al ssakiinata calayhim wa athaabahum fatxan qariiban(18)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay raalli ayuu ka noqday mu'miniinta markay kugula heshiinayaan Al Xudaybiyyah **الحديبية** inay gaalada Quraysh**قريش** la dagaallamaan oo ay gabagabeeyaan ayanna cararin, geedka hoostiisa, wuxuuna og yahay waxa quluubtooda ku jira oo run iyo oofin ah. Markaasuu wuxuu kusoo dejiyay xasillooni iyo raallinnimo, wuxuuna uga abaal mariyay furasho dhaw, oo ah furashada magaalada yuhuudda ee Khaybar**خيبر**(18)."

Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gadaashiisa ayuu ku tukaday.

Macmar**معمر** wuxuu Qataadah**قتادة** ka wariyay inuu yiri: "Aayadda

الَّذِينَ يَلْمِزُونَ الْمُطَّوِّعِينَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فِي الصَّدَقَاتِ وَالَّذِينَ لَا يَجِدُونَ إِلَّا جُهْدَهُمْ فَيَسْخَرُونَ مِنْهُمْ سَخِرَ اللَّهُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ (79)

"Allathiina yalmizuuna al mudhawwaciina mina al mu'miniina fii al ssadaqaati wa allathiina laa yajiduuna illaa juhdahum fa yaskharuuna minhum sakhira Allaahu minhum wa lahum cathaabun aliimun(79)**."**
Aayadda oo ah midda sagaal iyo toddobaatan ee Suuratu Tawbah**سورة التوبة** macneheedu waxaa weeye:

"Kuwa ceebeynaya oo duraya oo xamanaya kuwa mudhawwaciinta ka mid ah ee mu'miniinta ka mid ah oo sadaqooyinka ku tadhawwucaya oo bixinaya ayagoo aan lagu khasbin ee ayagu u gartay inay bixiyaan, iyo kuwa ceebeynaya kuwa sadaqaysanaya inta karaan kooda ah, oo markaas ku jeesjeesaya, Ilaahay ayaa ayagana ku jeesjeesaya oo camalkoodaas ka abaal marinaya, waxayna leeyihiin oo u sugnaatay cathaab xanuun badan(79)."

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa muslimiinta ku boorriyay inay sadaqo la baxaan, markaasuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** oo maalkiisoo idili ahaa sideed kun ayuu wuxuu sadaqaysta nuska maalkiisa oo ah afar kun. Markaasay munaafiqiintu waxay yiraahdeen:
"wuxuu maalkaan u bixiyay is tus tus, oo wuu is tus tus wayn yahay."
Markaasuu ninka la yiraahdo Abuu Cuqayl**أبوعقيل** wuxuu sadaqo ahaan u keenay qiyaas hal kiilo iyo xoogaa oo cunno ah. Markaasay munaafaqiintu waxay yirahdeen:
"Ilaahay waa ka kaaftoon yahay midkaan sadaqadiisa."
Markaasay Aayaddaani soo degatay.
Abuu Salamah**أبوسلمة** wuxuu aabihiis ka wariyay inu yiri:
"waxaan riyo ku arkay jannada, aniguna waxaan ku galay anigoo gurguuranaya (waa dadka maalka badan oo la xisaabinayo), waxaanna arkay inuusan geleyn dadka faqurada ah mooyee."
Markaasuu maal badan sadaqaystay ilaa ay laba lugood u furmaan, uuna Firdawsa **الفردوس** dhaxlay.

Saciid bin Zayd**سعيد بن زيد** wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo buurta Jabalu Al Nuur**جبل النور** dul saaran, ay buurtii dhaqdhaqaaqday, Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, burtii la hadlay, oo uu ku yiri:

"أثبت حراء! فإنما عليك نبي، أو صديق أو شهيد."

"Uthbut Xaraa'u!, fa innamaa calayka Nabiyyun, aw Siddiiqun aw shahiidun."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Xiraaow**حراء** deg oo xasil, korkaaagana ma aha cid aan ahayn Nabi iyo Runlow iyo Shahiide."

Waxaana markaas buurta dul saaran Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Bakar Al Siddiiqu**أبوبكر الصديق** iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab **عمر بن الخطاب**\ iyo Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** iyo Calii bin Abii Dhaalib **علي بت أبي طالب**\ iyo Dhalxah bin Cubaydu Allaahi**طلحة بن عبيد الله** iyo Al Zzubayu bin Al Cawwaam**الزبير بن العوام** iyo Sacad bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص** iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee."
Jabalu Al Nuur**جبل النور** wuxuu Kacbada saddex kiiloomitir ka xigaa xagga Waqooyi-Bari.

Cabdu Allaahi bin Mujammic\عبد الله بن مجمع wuxuu wariyay inuu Cumar bin Al Khdh-dhaab\عمر بن الخطاب ku yiri Ummu Kulthuum bintu Cuqbah\أم كلثوم بنت عقبة, haweenta Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, miyaa kugu yiri:

"أنكحي سيد المسلمين عبد الرحمن بن عوف؟"

"inkaxii sayyida al muslimiina Cabda Al Rraxmaani bin Cawfin?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"guurso sayyidka muslimiinta Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**?"
Waxay tiri:
"haa."

Macmar\معمر wuxuu Al Zuhriyyu\الزبير ka wariyay inuu Cubaydu Allaahi bin Cabdu Allaahi\عبيد الله بن عبد الله u wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rag uu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ku jiro xoolo siiyay, isagase uusan wax ka siin.

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaanu**عبد الرحمن** dibadda u baxay oo booyay. Markaasaa waxaa la kulmay Cumar**عمر** oo ku yiri:
"maxaa kaa boohiyay?"
Markaasuu u sheegay, wuxuuna yiri:
"waxaan ka baqayaa inuu u diiday inuu anigana wax i siiyo caro uu ii caraysan yahay ama wuxuu aniga iga arkay."

Markaasuu Cumar**عمر** warkaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warkaas gaarsiiyay, oo markaas yiri:

"لكني وكلته إلى آيمانه."

"laakinni wakaltuhu ilaa iimaanihi"
oo macnihiisu yahay:

"laakiin anigu waxaan u siin waayey anigoo u wakiishay xoogga iimaankiisa" oo waxaa weeye kuwa kale in loo siiyay si iimaankooda lagu xoojiyo isaguse uusan taas u baahnayn!"

Quraysh bin Anas**قريش بن أنس** wuxuu Muxammad bin Camr**محمد بن عمرو** ka wariyay inuu ka wariyay Aboo Salamah**أبوسلمة** oo ka wariyay Abuu Hurayrah**أبوهريرة** inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Alllaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"خياركم خياركم لنسائي."

"khiyaarukum khiyaarukum li nisaa'ii!"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"ikhyaartiinnu waa kuwa ugu khayr badan haweenkayga."
Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**\ wuxuu haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay beer lagu qiimeeyey afar boqol oo kun."

Wuu diiday inuu Khaliifo noqdo

Ibnu Wahab**إبن وهب**\ wuxuu yiri: "waxaa noo warramay ibnu Lahiicah**إبن لهيعة**\ oo ka wariyay Yaxyaa bin Saciid**يحيى بن سعيد**\ oo ka wariyay Abuu Cubayd bin Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Rraxmaan bin Azhar**أبوعبيد بن عبد الله بن عبد الرحمن بن أزهر**\ o ka wariyay aabihiis oo ka wariyay awoowihiis inuu Cuthmaan**عثمان**\ bukooday uuna ku dhacay Al Rucaafu**الرعاف**\ oo ah dhiig sanka ka yimaada.

Markaasuu wuxuu u yeeray Xumraan**حمران**\, uuna ku yiri:
"Dhig inaan aniga dabayday Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** u magacaabay inuu noqdo khaliifka."
Markaasuu u dhigay. Markaasuu Xumraan**حمران**\ soo dhaqaaqay oo uu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** u yimid, kuna yiri:
"Bishaareyso!"
Wuxuu yiri:
"maxaanna ku bishaarasytaa?"
Wuxuu yiri:
"Cuthmaan**عثمان**\ wuxuu kuu dhigay cahdiga**العهد**\ inaad isaga dabadiis adigu khaliif tahay."

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن**\ wuxuu istaagay inta u dhexeysa Qabriga iyo Minbarka wuxuuna yiri:
"Ilaahayow! Hadduu Cuthmaan**عثمان** xilkaas cahdigiisa ii dhigay inaan qabto isaga hortiis i dil." Ma noolayn markaas kaddib waxaan ahayn lix bilood ee waa la oofsaday."

Kitaabka Al Rriyaadu Al Nnadirah**الرياض النضرة**\

Al Muxibbu Al Dhabarii**المحب الطبري**\ (waana Abuu Jacfar Axmad bin Cabdu Allaahi bin Muxammad, Abuu Al Cabbasna**أبوجعفر أحمد بن عبد الله بن محمد أبو العباس**\ waa la yiri, kuna caan baxay Al Muxibbu Al Diini Al Dhabarii**المحب الطبري**\ , Sheekha Mashaayikhda Fiqiga iyo Xadiithka, ahaana Sheekha Makkah Al Mukarramah**شيخ مكة المكرمة**\ oo ah Imaamka leh kutubbada ay ka mid yihiin kitaabka wayn ee la yiraahdo Al Riyaadu Al Nadrati fii Manaaqibi Al Cashrati**الرياض النضرة في مناقب العشرة**\, oo Tobanka Jannada loogu bishaareeyey Axaadiithta kusoo aroortay ka warramaya, iyo "Al Samdhu Al Thamiinu fii Manaaqibi Ummuhaati Al Mu'miniina**السمط الثمين في مناقب أمهات المؤمنين**\" oo ku saabsan hooyooyinka Mu'miniinta, haweenka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu ku dhashay Makkah**مكة**\, ayaduuna ku dhinta, wuxuuna noolaa inta u dhexeysey lix boqol iyo shan iyo toban iyo lix boqol iyo afar iyo sagaashan Hijriga

Al Imaamu sheekhu mashaayikhi al fiqhi wa al Xadiithi Abuu Jacfar Axmad **الإمام شيخ المشايخ الفقه والحديث أبوجعفر أحمد** Allaha u naxariistee wuxuu kitaabkiisa Al Riyaadu Al Nnadrati**الرياض النضرة**\ kaddib markuu qodobbada aan kor ku soo sheegnay qiyaas

dhammaantood wada xusay wuxuu kaloo yiri:

Xiriirintiisa haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

"waxaa isaga Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** lagu gooni yeelay amaanada iyo ilaalinta haweenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Al Zzubayru ibnu Al Bakkaar**الزبير إبن البكار** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ahaa midkuu Nabigu ku aaminay ilaalinta haweenkiisa. Waxaana Xadiithka wariyay abuu Cumar**أبوعمر**."

Waxaa kaloo isaga gooni loo siiyay inuu ahaa wakiilka Ilaahay ee arliga, oo Calii**علي** Calayhissalaamu wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"عبد الرحمن بن عوف وكيل الله في الأرض."

"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf wakiilu Allaahi fii al ardi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waa wakiilka Ilaahay ee arliga."

Isaga iyo Cuthmaan**عثمان** waxaa gooni loo siiyay Aayad kusoo wada degatay oo ah:

الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ثُمَّ لَا يُتْبِعُونَ مَا أَنْفَقُوا مَنًّا وَلَا أَذًى لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ (262)

"Allathiina yunfiquuna amwaalahum fii sabiili Allaahi thumma laa yutbicuuna maa anfaquu mannan wa laa athan llahum ajruhum cinda Rabbihim wa laa khawfun calayhim wa laa yaxzanuuna(262)**."**
Waana Aayadda laba boqol laba iyo lixdan ee Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة:**

"kuwa nafaqayna oo sadaqada ku bixinaya jidka Ilaahay kaddibna aan dadka siiyeen u gallad iyo munno sheeganayn oo galladaysigoodu intuu gaaro dadkay siiyeen ay markaas ka xumaadaan oo dhibaato kasoo gaarto, kuwaasu waxay leeyihiin ajarkooda oo u yaalla Rabbigood agtiisa, korkoodana ma ah cabsi iyo tiiraanyo toona(262)."

Anas**أنس** Allaha raalli ka noqdee wuxuu yiri:
"waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** ku leh:

"بارك الله في مالك وخفف عليك حسابك يوم القيامة."

"baarka Allaahu fii maalika wa khaffafa calayka xisaabaka yawma al qiyaamati."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay ha kuu barakeeyo maalkaaga, xisaabtana korkaaga ha ka khafiifiyo maalinta qiyaame."

Cilmigiisa

Ibnu Cabbaas\إبن عباس, Allaha isaga iyo aabihiisba raalli ka noqdee, wuxuu yiri:
"Cumar**عمر** ayaa Shaam**الشام** aaday, markaasuu marku marayo Saragh**سرغ** ayaa waxaa lo sheegay inuu Shaam**الشام** daacuun kusoo degay.
Markaasuu asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, shiriyay oo uu kala tashaday siduu yeeli lahaa. Markaasay is khilaafeen. Markaasuu ra'yigiisu wuxuu waafaqay talada kuwa ku taliyay in dib loo noqdo. Markaasuu goostay in la noqdo.

Markaasaa waxaa yimid Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**, oo xaajadiisa ku maqnaa, markaasuu wuxuu yiri:
"arrinkaan anigaa cilmi u leh, oo waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh**:**

"إذا وقع بأرض فلا تقدموا عليه، وإذا وقع بأرض وأنتم بها فلا تخرجوا فرارا منه."

"ithaa waqaca bi ardin falaa taqdimuu calayhi, wa ithaa waqaca bi ardin wa antum bihaa falaa takhrujuu firaaran minhu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"haddu arli daacuun kusoo dego ha gelina, hadduuse kusoo dego adinku ku dhex jira ha ka bixina cararid aad daacuunka ka cararaysaan."

Anas**أنس** Allaha raalli ka noqdee wuxuu wariyay:
"Nabigu kan khamrada cabbay wuxuu la dhacay laamaha geedka timirta iyo kabaha . Abuu Bakarna**أبوبكر** wuxuu ku dhuftay afartan ulood. Markaasuu Cumar**عمر** markuu talada qabtay wuxuu yiri:
"dadka deegaankiisu wuxuu u dhowaaday beelaha beeraha leh, marka maxay idinla tahay in laga yeelo qofka khamro cabba?"
Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:
"waxaan u aragnaa inay ciqaabtiisu noqoto midda ugu khafiifsan xuduudda."
Markaasuu Cumar**عمر** qofka khamrada cabba wuxuu ku xukumay in lagu dhufto sideetan ulood, oo sideetan waa ka khafiifsan tahay (oo siduu Calii**علي** yiri in markuu khamrada cabbo wuu sakhraamayaa markaasuu been abuurayaa qofka beenta abuurana waxaa lagu dhuftaa sideetan ulood sida ku xusan Quraana , Waana Aayadda afaraad ee Suuratu Al Nnuuri**سورة النور**) boqolka ulood oo lagu dhufto kan zinaysta isagoo aan guur sad hore ugu qaadan." Waxaana wariyay Al Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم.**

Tawaaduciisa Ilaahay\تواضعه لله: jajabnaantiisa

Saciid bin Jubayr**سعيد بن جبير** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** markuu ku dhex jiro addoommadiisa lagama dhex aqoon."

Maalinta Badar\بدر : ina Cawf iyo ilmo Cafraa'u\العفراء

Al Bukhaarii**البخاري** iyo ghayrkiisba waxay Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** ka wariyeen inuu yiri:
"Anigoo safka ku jira Maalinta Badar**يوم بدر** ayaan labadeyda dhinac dhugtay, waxaanna arkay inay joogaan laba nin oo dhallinyaro ah. Markaasuu midkood isagoo saaxiibkiisa ka qarinaya ayuu si sir ah wuxuu igu yiri:
"Adeerow i tus Abuu Jahal**أبوجهل**!"
Markaasaan waxaan iri:
"Wiilka walaalkeeyow, maxaad ku falaysaa?"
Wuxuu yiri:
"Ilaahay ayaan ka ballan qaaday in haddaan arko aan dilo ama anigoo taas doonaya sokadiisa aniga la i dilo."
Markaasuu kii kalena wuxuu isaguna si sir igu yiri wax la mid ah wuxuu kan koowaad igu yiri.

Maraaksayan jirin wax iiga farax badan inaan laba nin oo ayagoo kale ah aan ku dhex jiro. Markaasaan u tilmaamay. Markaasey weerareen sida laba gorgor oo kale oo ay seefohooda la dheceen. Waana labada wiil oo ay dhashay Al Cafraa'**العفراء** ee Mucaath **معاذ** iyo Mucawwith**معوذ**."

Caruurta Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**

Al Muxibbu Al Dhabarii**المحب الطبري** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu lahaa sideed iyo labaatan cunug oo ay labaatan wiilal yihiin, sideedna gabdho yihiin. Wiilashiisu waxay ahaayeen:
(Kow) Muxammad**محمد**, isagoo kuniyo looga dhigay, wuxuuna ku dhashay islaamka dhexdiisa. (Waana Muxammadkaan**محمد** Sheekh Suufi aabihiis).
(Laba) Saalim Al Akbar**سالم الأكبر**, wuxuuna dhintay islaamka hortiis. Labadoodaasna hooyadooda dhashay waa Ummu Kulthuum bintu Cutbah bin Rabiicah bin Cabda Shams **أم كلثوم بنت عتبة بن ربيعة بن عبد شمس**, waxaana sidaas yiri Abuu Cumar**أبوعمر.** Ibnu Qutaybah-na**إبن قتيبة** iyo midka kitaabka Al Safwah**الصفوة** dhigayna waxay yiraahdeen inuu Muxammad**محمد** ay isku hooyo yihiin Xumayd**حميد** oo soo socda.
(Saddex) Abuu Salamah Al Faqiih**أبوسلمة الفقيه**, magaciisuna waa Cabdu Allaahi Al Asghar**عبد الله الأصغر,** hooyadiisna waa Tumaadur bintu Al Asbagh**تماضر بنت الأصبغ,** waxaana sidaas wariyay ibnu Qutaybah**إبن قعيبة** iyo ghayrkiisba.
(Afar) Ibraahiim**إبراهيم**, iyo
(Shan) Ismaaciil**إسماعيل**, iyo
(Lix) Xumayd**حميد**, hooyadoodna waa Ummu Kulthuum bintu Cuqbah bin Abii Mucaydh**أم كلثوم بنت عقبة بن أبي معيط,** wuxuuna ku wariyay Al Safwah**الصفوة.**

(Toddoba) Zayd\زيد, uuna ibnu Qutaybah\إبن قتيبة yiri inay hooyadiis tahay isla hooyada Ibraahiim\إبراهيم dhashay. Al Safwah\الصفوة wuxuu isaguna wariyay inay hooyadiis tahay hooyada dhashay Macan\معن, waana soo socdaa.
(Sideed) Macan\معن, iyo
(Sagaal) Cumar\عمر, labadooda hooyadoodna waa Sahlah bintu Caasim bin Cadiyy سهلة بنت قاسم بن عدي\.
(Toban) Curwah Al Akbar\عروة الأكبر, hooyadiisna waa Baxriyyah bintu Haani'u بحرية بنت هانئ\.
(Kow iyo toban) Saalim Al Asghar\سالم الأصغر, hooyadiisna waa Sahlah bintu Suhayl bin Cumar\سهلة بنت سهيل بن عمر.
(Laba iyo toban) Abuu Bakr\أبوبكر, hooyadiisna waa Ummu Xakiim bintu Qaaridh أم حكيم بنت قارط\.
(Saddex iyo toban) Cabdu Allaahi\عبد الله, hooyadiisna waa bintu Abii Al Khash-khaash بنت أبي الخشخاش\.
(Afar iyo toban) Cabdu Al Rraxmaanu\عبد الرحمن, hooyadiisna waa Asmaa'u bintu Salaamah\أسماء بنت سلامة.
(Shan iyo toban) Muscab\مصعب, hooyadiisna waa Ummu Xurayth\أم حريث oo ka mid ah qafaalka Bahraa'a\بهراء.
(Lix iyo toban) Suhayl Abuu Al Abyad\سهيل أبوالأبيض, hooyadiisna waa Majdu bintu Yaziid\مجد بنت يزيد.
(Toddoba iyo toban) Cuthmaan\عثمان, hooyadiisna waa Caraak bintu Kisraa عراك بنت كسرى\, oo ahayd gabadha boqorka iiraan\إيران oo addoon ahaan uu isagu u lahaa.
(Sideed iyo toban) Curwah\عروة, iyo
(Sagaal iyo toban) Yaxyaa\يحيى, iyo
(labaatan) Bilaal\بلال, oo saddexdaanba waxaa dhalay addoommo uu lahaa.

Gabdhihiisu waxaa weeye:
(Kow) Ummu Al Qaasim\أم القاسم, oo dhalatay zamanka jaahiliyada, hooyadeedna waa hooyada Saalim Al Akbar\سالم الأكبر dhashay. Al Safwah\الصفوة wuxuu yiri: hooyadeed waa bintu Shaybah bin Rabiicah\بنت شيبة بن ربيعة.
(Laba) Xumaydah\حميدة, iyo
(Saddex) Aamatu Al Rraxmaani Al Kubraa\آمة الرحمن الكبرى, oo labadooda hooyadood waa hooyada Xumayd\حميد dhashay.
(Afar) Aamatu Al Rraxmaani Al Sughraa\آمة الرحمن الصغرى, ayna isku hooyo yihiin Macan\معن.
(Shan) Ummu Yaxyaa\أم يحيى, hooyadeedna waa Zaynab bintu Al Sabaax\زينب بنت الصباح.
(Lix) Juwayriyah\جويرية, hooyadeedna waa Baadanah bintu Ghaylaan\بدانة بنت غيلان.
(Toddoba) Amiyah\أمية iyo
(Sideed) Maryama\مريم, oo labadooduba ay Muscab\مصعب isku hooyo yihiin.

Intaasaan uga baxaynnaa kitaabka Al Muxibbu Al Dhabarii\المحب الطبري.

Umulisada hooyada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Al Sh-shifaa'u\الشفاء hooyada dhashay Cabdu Al Rraxmaan bin Cawfعبد الرحمن بن عوف

Waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis umuliso u ahayd oo uu gacneheeda kusoo dhacay Al Shifaa'u bintu Cawf bin Al Xaarith bin Zuhrah **الشفاء بنت عوف بن الحارث بن زهرة**, oo ninkay u dhaxdo ina adeertiis ahayd.

Al Shifaa'u**الشفاء** waa Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf Al Zuhriyyi **عبد الرحمن بن عوف الزهري**, Allaha raalli ka noqdee, kana midka ah tobanka Jannada loogu bishaareeyey hooyadiis. Al Shifaa'u**الشفاء** waxay Aaaminah bintu Wahab**آمنة بنت وهب** ugu beegneyd eeddo, ayagoo u wada dhashay Qurayshta**قريش** reer Banii Zuhrah**بني زهرة**. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu soo dhacay isagoo ay indhihiisu Samada kor u dhuganayaan, labadiisa gacnoodna dhulka ayuu dhigay.

Noqoshada Banuu Zuhrah\بنوزهرة Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma colaadin oo Badar\بدر kama qayb gelin

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Markaasuu Al Akhnasu bin Shariiq bin Camr bin Wahb Al Thaqafii **الأخنس بن شريق بن عمرو بن وهب الثقفي** oo ahaa xaliifka Qurayshta**قريش** Banuu Zuhrah**بنوزهرة,** wuxuu ayagoo markaas Al Juxfah**الجحفة** ku sugan Banuu Zuhrah**بنوزهرة** ku yiri:
"Reer Banuu Zuhrow**بنوزهرة** , Ilaahay waa idiin badbaadiyay maalkiinna, wuuna idiin fakiyay ninkiinna la socday oo ahaa Makhramah bin Nawfal**مخرمة بن نوفل.** Adinkuna waxaad usoo baxdeen inaad difaacdaan isaga iyo maalkiisa. Marka, fulaynnimada aniga ii saara ee laabta, oo dani idiinkuma jirto inaad dagaal gashaan ayan faa'iido idiinku jirin, siduu midkaan -wuxuuna ka wadaa Abuu Jahal**أبوجهل**- doonayo inaan yeelno."

Markaasey Makkah**مكة** dib ugu laabteen, oo uusan nin u dhashay Banuu Zuhrah**بنوزهرة** ka qayb gelin Dagaalka Badar**بدر,** oo way adeeceen, wuxuuna ahaa nin ay adeecaan.

Banuu Zuhrah**بنوزهرة** waxaa ka dhalatay Aamina bintu Wahab**آمنة بنت وهب\,** oo ah hooyada dhashay Nabi Muxammad, sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Qabiil walba oo Quraysh**قريش** ahna waxaa kasoo baxay rag intaan ahayn reer Banuu Cadiyy bin Kacb**بنو عدي بن كعب** oo uusan nin keli ahba kasoo bixin. Banuu Cadiyy bin Kacb**بنو عدي بن كعب** waxaa ka dhashay Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab**أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب,** Allaaha raali ka noqdee.

Sidaas ayay Banuu Zuhrah-na**بنو عدي بن كعب** la laabatay Al Akhnas bin Shariiq **الأخنس بن شريق\.** Markaaseyan labadaas qabiil axadna Badar**بدر** goob joog ka ahayn.

Markaasey Qurayshi**قريش** dhaqaaqday. Waxaana jirtay inay Dhaalib bin Abii Dhaalib**طالب بن أبي طالب\,** oo ragga la socday, iyo rag kaloo Quraysh**قريش** ah uu hadal dhex maray, oo waxay yiraahdeen: "Wa Allaahi**والله** waan ogaannay reer Banuu

Haashim\بنو هاشم in in kastoo aad nasoo raacdeen ay hawadiinnu Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la jirto."
Markaasuu Dhaalib\طالب Makkah\مكة dib ugu laabtay, lana noqday kuwa noqday."

Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf, Bilaal iyo dilidda Umayyah bin Khalaf\أمية بن خلف

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف wuxuu yiri:
"Umayyah bin Khalaf\أمية بن خلف wuxuu Makkah\مكة ku ahaa saaxiibkay. Markaasna magaceygu wuxuu ahaa Cabda Camr\عبد عمر. Markaasaan markaan islaamay waxaan la baxay Cabda Al Rraxmaanu\عبد الرحمن annago Makkah\مكة joogna.

Markaasaan intaan Makkah\مكة joognay markuu ila kulmo wuxuu yirahdaa:
"Cabda Camrow\عبد عمر, ma waxaad mid kale ka dooratay magacay aabahaa iyo hooyadaa kuu bixiyeen?" Markaasaan waxaan iraahdaa:
"Haa".
Markaasu wuxuu yiraahdaa:
"Aniguse ma aqaanno Al Rraxmaanu\الرحمن . Marka noo kala yeel waxaan kuugu yeero, oo adiguna magacii hore markaan kuugu yeero iigu jawaabi maysid, aniguna kuugu yeeri mayo magac aanan aqoon."

Markaasaan markuu iigu yero Cabda Camrow\عبد عمر aanan u jawaabin.
Markaasaan waxaan ku iri:
"Abaa Caliyow\أبا علي, waxaad doonto ka dhig."
Wuxuu yiri:
"Hadaba waxaad tahay Cabdu Al Ilaah\عبد الإله."
Markaasaan waxaan iri:
"Waa yahay."
Markaasaan markaan soo maro wuxuu iigu yeeraa Cabdu Al Ilaah\عبد الإله oo aan aniguna u jawaabaa, oo aan markaas la sheekeystaa.

Markaasey markay ahayd Maalinta Badar\يوم بدر ayaan soo maray isagoo la taagan wiilkiisa Calii bin Umayyah\علي بن أمية oo gacanta haya, aniguna aan sito cambuur bireed aan kasoo furtay raggi lahaa, oo aan xambaarsanahay.
Markaasuu markuu i arkay ayuu wuxuu yiri:
"Cabda Camrow\عبد عمر." Markaasaanan u jawaabin.
Markaasuu wuxuu yiri:
"Cabda Al Ilaahow\عبد الإله!"
Markaasaan iri:
"Haa."
Wuxuu yiri:
"Aniga ma i dooneysaa, oo anigaa kaaga khayr badan dirac bireedkaan aad sidatide?"
Waxaan iri:
"Haa wa Allaahi\والله."

Markaasaan diracyada tuuray oo aan ku dhegay gacantiisa iyo gacanta wiilkiisa, isagoo leh:
"Maantoo kale wali hore uma arag. Oo miyeeydnaan caano dan ka lahayn (oo wuxuu ka wadaa intaad i dileysaan maad i qafaashaan oo aan isaga kiin furto geel badan oo caano badan)!"

Markaasaan labadoodaas lasoo dhaqaaqay. Markaasuu Umayyah bin Khalaf**أمية بن خلف** anigoo isaga iyo wiilkiisa u dhexeeya oo labadooda gacnood ku dheggan ayuu wuxuu igu yiri:
"Cabda Al Ilaahow**عبد الإله**, waa kee ninka adinka idin ka midka ah oo ku calaamadeysan baalka goroyada oo laabtiisa suran?"
Waxaan iri:
"Kaasuu waa Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib**حمزة بن عبد المطلب**."
Wuxuu yiri:
"Kaas weeye ninka wax badan nagu falay."

Anigoo sidaas labadooda u wada ayaa waxaa arkay Bilaal**بلال**, oo Umayyah**أمية** ayuu ahaan jiray midka Bilaal**بلال** Makkah**مكة** ku cathaabi jiray si uu islaamka uga baxo, oo markaasuu intuu keeno dhagaxda kulul ee Makkah**مكة** markay kululaato ayuu xagga dhabarkiisa u jiifiyaa, kaddibna uu amar ku bixiyaa oo dhagax weyn laabtiisa la saaraa. Markaasuu wuxuu ku yiraahdaa:
"Sidaas ayaad ahaaneysaa ama Diinta Muxammad**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka tag." Markaasuu Bilaal**بلال** wuxuu yiraahdaa:
"Axadun Axadaun**أحد أحد**", oo ah inuu Ilaahay Mid keli ah yahay.

Markaasuu Bilaal**بلال** markuu arkay ayuu wuxuu yiri:
"Waa madixii gaalada Umayyah bin Khalaf**أمية بن خلف!** Yaanan noolaan hadduu noolaado!"

Markaasaan waxaan iri:
"Bilaalow**بلال**, labadeyda qafaal miyaad sidaas ka leedahay!"
Wuxuu yiri:
"Waa madixii gaalada Umayyah bin Khalaf**أمية بن خلف**! Yaanan noolaan hadduu noolaado!"
Waxaan iri:
"Ma maqlaysaa midkay hooyada madow dhashayow?"
Wuxuu yiri:
"Waa madixii gaalada Umayyah bin Khalaf**أمية بن خلف**! Yaanan noolaan hadduu noolaado!"

Markaasuu codkiisa ugu dheer kula qayliyay oo yiri:
"Ansaarta Ilaahyow**يا أنصار الله**! Kani waa madaxa gaalnimada Umayyah bin Khalaf **أمية بن خلف**! Yaanan noolaan hadduu noolaado!"
Markaasey na hareereeyeen sida dugaagad oo kale, aniguna aan ka celinayo. Markaasuu nini seeftiisa galka kasoo siibay oo uu wiilkiisa lugta kudhuftay oo uu markaas ka gooyey

oo uu dhulka ku dhacay. Markaasuu Umayyah\أمية la qayliyay qaylo aanan ayadoo kale hore u maqal. Markaasaan waxaan iri:

"Naftaada la baxso, oo wa Allaahi\والله u malayn mayo inaad baxsan kartide, aniguna wax kuma tari karo." Markaasey seefohooda cadcad ugu googooyeen labadoodaba ilaa ay kasoo jeestaan."

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف wuxuu oran jiray:
"Allow Bilaal\بلال u naxariiso, diracyadeydiina waan tuuray, qafaalkeygiina wuu iga qaatay."

Ragga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku haray Maalinta Uxud\يوم أحد

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
"Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu sugnaaday, isagoo qaansadiisa fallaraha ka ganayey ilaa kala go'do, kaddibna dhagax ayuu la dhacay cadawga kasoo horjeeda, ayadoo ayan labadiisa cagood taakana dhaqaaqin. Mar walbana waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u imaaneysay koox asxaabtiisa ka mid ah, marna ay ka kala tegayaan, oo sidaasuu cadawga isaga celiyay oo ay uga dul tageen.

Abuu Yaclaa\أبويعلى wuxuu yiri:
"Calii\علي wuxuu yiri:
"Markay labada ciidan kala durkeen Maalinta Uxud\يوم أحد ayaan waxaan fiiriyey ragga la dilay. Markaasaan arki waayey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasaan waxaan iri: "Wa Allaahi\والله inuusan cararin, kuwa la dilayna waan ka dhex waayey. Hadaba waxaan u arkaa inuu Ilaahay noo carooday waxaan falnay daraadeed oo uu Nabigiisa Samada kor ugu qaaday. Marka, uma jeedo wax iiga khayr badan inaan dagaallamo ilaa la iga dilo. Markaasaan seefteyda galkeeda jebiyay oo aan cadawga ku qaaday. Markaasey ii banneeyeen oo iga kala waregeen. Markaasaan waxaan hortegey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo dhexdooda ku jira oo la dagaallamaya."

Al Xaakim\الحاكم wuxuu Sacd bin Abii Waqqaas\سعد بن أبي وقاص ka wariyay inuu yiri:
"Markuu dadku Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka kala tegey Maalinta Uxud\يوم أحد ayaan waxaan is iri:
"Nafteydaan daafacayaa oo aan dagaal ku qaadayaa, oo markaas ama waa shahiidayaa ama waxaan gaarayaa Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam. Anigoo sidaas ah ayaan waxaan arkay nin wajigiisa maro ku duuban tahay, aanna ogayn kuu yahay. Markaasey gaaladu ninkaas isugu yimaadeen oo aan is iri:
"Way dileen".
Markaasuu ninkaasu gacanta quruurux kasoo buuxsaday oo uu wajiyadooda ku tuuray. Markaasey xagga cirbohooda la gaddoomaeen oo gadaal gadaal u socdeen ayagoo wajiyadoodu ninkaas ku jeedaan ilaa ay buurta ka gaaraan. Markaasuu sidaas dhawr goor yeelay. Mana ogi ninkuu yahay, oo aniga iyo isagana waxaa noo dhexeeya Al Miqdaadu**المقداد.** Markaasaan anigoo doonaya inaan Al Miqdaadu**المقداد** weydiiyo ninkuu yahay, ayuu Al Miqdaadu**المقداد** wuxuu yiri:

"Sacadow**يا سعد**, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa kanaa oo wuu kuu yeerayaa." Markaasaan waxaan iri:
"Oo mee?"
Markaasuu farta iigu fiiqay. Markaasaan u kacay sida ayadoo ayan waxba igu dhicin oo kale. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hortiisa i fariisiyey. Markaasaan qaansadeyda fallaaraha ka tuuray anigoo leh:
"Ilaahayow waa fallaartaada ee cadawga ku gan", ayadoo uu Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, leeyahay:

"أللهم استجب لسعد. أللهم سدد رميته وأجب دعوته."

"Allaahumma istajib liSacdin. Allaahumma sadid ramyatahu wa ajib dacwatahu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahayow Scad**سعد** ka yeel. Ilaahayow ganiddiisa waafaji, ducadiisana yeel."

Waana ganayey ilaa aan ka dhammeeyo fallaaraha gabooyadayda ku jiray. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam inta gabooyihiisa ku jirta horteyda ku daadiyay, uuna ii dhiibay fallaar baal leh oo kuwa kale ka xoog badan."

Imaam Muslim**الأمام مسلم** wuxuu Sacad bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص** ka wariyay inuu yiri: "Maalinta Uxud**يوم أحد** waxaan ku arkay dhanka midigta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo bidixdiisaba laba nin oo dhar cadcad labbisan oo aanan markaas horteed iyo kaddibba arag. Waana Jibriil**جبريل** iyo Miikaaiil**ميكائيل** Calayhimussalaamu."

Riwaayad kalena wuxuu ku daray:
"oo si xoog leh u dagaallamay oo daafacaya."

Ibnu Sacad**إبن سعد** wuxuu yiri:
"Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu sugnaaday. Markaasey muslimiintu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka kala tageen -waana marka la yiri in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la dilay-, waxaana kala sugnaaday asxaabtiisa afar ito toban nin, oo kala toddoba Muhaajiriin**المهاجرين** ah oo Abuu Bakar**أبوبكر** ka mid yahay iyo toddoba Ansaarta**الأنصار** ah.
Afar iyo tobankaas waxay kala yihiin: (Kow) Abuu Bakar Al Siddiiqu**أبوبكر الصديق** . (Laba) Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب.** (Saddex) Cabdu Al Rraxmaanu ibnu Cawf**عبد الرحمن بن عوف.** (Afar) Sacd bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص.** (Shan) Dhalxah bin Cubaydu Allaahi**طلحة بن عبيد الله.** (Lix) Al Zzubayru ibnu Al Cawwaamu**الزبير بن العوام.** (Toddoba) Abuu Cubaydah Caamir ibnu Al Jarraax **أبو عبيدة عامر بن الجراح\.** Ragga Ansaartuna waxay ahaayeen: (Sideed) Abuu Dujaanah**أبودجانة.** (Sagaal) Al Xubaabu bin Al Munthir**الحباب بن المنذر** . (Toban) Caasim bin Thaabit **عاصم بن ثابت\.** (Kow iyo toban) Al Xaarithu bin Al Ssimmah**الحارث بن السمة** . (Laba iyo toban) Sahl bin Xunayf**سهل بن حنيف.** (Saddex iyo toban) Sacad bin Mucaath**سعد بن معاذ.** (Afar iyotoban) Usayd bin Xudayr**أسيد بن حضير**." Tirroyin kala oo u dhowna waa la wariyay.

Dhawacyada Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف Maalinta Uxud يوم أحد\

Ibnu Hishaam\إبن هشام wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** waxaa laga dhaawacay afka oo ilkihiisa la jebiyay, waxaana lagu dhuftay labaatan ama ka badan oo dhaawac oo ay qaarkood lugtiisa ku dheceen oo uu markaas u dhutiyay."

Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf عبد الرحمن بن عوف iyo Khaalid bin Al Waliidu خالد بن الوليد\

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Jaxdam**جحدم** markay hubka ka dhigeen oo uu arkay wuxuu Khaalid**خالد** Banii Jathiimah**بني جذامة** ku falayo ayuu wuxuu yiri:
"Banii Jathiimay**بني جذامة,** dagaalka waa la idiinka adkaaday, waanna idiinka digay waxaad ku dhacdeen."

Khaalid bin Al Waliidu**خالد بن الوليد** iyo Cabdu Al Raraxmaanu bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** waxaa dhex maray hadal arrinkaas ku saabsan.

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu Khaalid**خالد** ku yiri:
"Camalkii jaahiliyada ayaad islaamka dhexdiisa ku dhaqantay."
Khaalid**خالد** wuxuu yiri:
"Aabahaa ayaan u aargoyay."
Ina Cawf**إبن عوف** wuxuu yiri:
"Been ayaad sheegtay, oo anigaa dilay ninka aabahay dilay, waxaadse u aargoosanaysay adeerkaa Al Faakih bin Al Mugiirah**الفاكه بن المغيرة**."

Markaasuu wada hadalkaasu xumaaday oo shari dhex martay. Markaasuu warku Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaaray oo u yiri:

"مهلا يا خالد، دع عنك أصحابي. فوالله لو كان لك أحدا ذهبا ثم أنفقته في سبيل الله ما أدركت غدوة رجل من أصحابي و لا روحته."

"Mahlan yaa Khaalidu, dac canka asxaabii. Fa wa Allaahi law kaana laka Uxudan thahaban thumma anfaqtahu fii sabiili Allaahi maa adrakta ghadwata rajulin min asxaabii wa laa rawxatuhu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Aayarkaa Khaalidow**خالد!** Daa asxaabtayda, oo wa Allaahi**والله** haddaad lahaan lahayd buurta Uxud**أحد** oo dahab ah oo aad ku bixin lahayd jidka Ilaahay, ma gaari kartid ghadwata rajulin**غدوة رجل:** ghadwah**غدوة** waxaa la yiraahdaa socodka maalinta inteeda hore, al rawaaxuna**رواح** waa socodka gelinka dambe. Marka al ghadwatu waa socodka mar keli ah oo gelinka intiisa hore, al rawxatuna waa mar keli ah oo socodka galabtii. Ibnu Athiir**إبن أثير** wuxuu yiri:

"Xadiithku wuxuu wariyay: "laa ghadwatun\لا غدوة wa laa rawxatun fii sabiili Allaahi ولا رواح في سبيل الله\, oo waxaad moodda inuu macnehiisuna yahay: "ma gaartid mar keli ah oo ay jihaad u baxaan ama ay kasoo noqdaan". Lisaanu Al Carb\لسان العرب isaguna sidaas ayuu ku fasiray.
Qisadaanna waxay ku jirtaa Duullaanka uu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u diray carabta reer miyiga ah Banii Jathiimah\بني جذيمة ee Kinaanahكنانة uuna Khaalid bin Al Waliidu\خالد بن الوليد madax uga dhigay furashada Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة dabadeed, sanadka sideedaad ee Hijrada.

Duullaanka Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف ee Duumatu Al Jandal\دومة الجندل

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Cadhaa' bin Abii Rabaax\عطاء بن أبي رباح wuxuu yiri:
"waxaan maqlay nin reer Al Basrah\البصرة ah oo Cabdu Allaahi bin Cumar bin Al Khadh-dhaab\عبد الله بن عمر بن الخطاب weydiinaya cimaamada saynteeda oo uu ninka duubta dhabarkiisa ku sii daayo. Markaasuu Cabdu Allaahiعبد الله wuxuu yiri:
"waxaan inshaa'a Allaahu\إن شاء الله tas kaaga sheegayaa cilmi aan u leeyahay oo waxaan ahaa ninka tobanaad ee toban nin oo asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ah oo masjidkiisa ku sugnaa, ahaana (Kow) Abuu Bakr\أبو بكر, (Laba) Cumar\عمر, (Saddex) Cuthmaan\عثمان, (Afar) Calii\علي, (Shan) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف, Lix) ibnu Mascuud\إبن مسعود, (Toddoba) Mucaath bin Jabal\معاذ بن جبل, (Sideed) Xuthayfah bin Abii Al Yamaan\حذيفة بن أبي يمان, (Sagaal) Abuu Saciid Al Khudriyyi\أبو سعيد الخدري, (Toban) Cabdu Allaahi bin Cumar bin Al Khadh-dhaab\عبد الله بن عمر بن الخطاب, aniguna aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la joogo.

Markaasaa waxaa yimid nin Ansaarta\الأنصار ka mid ah oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaamay, kaddibna uu fariistay, uuna yiri:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayka, mu'miniinta keebaa ugu fadli badan?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أحسنهم خلقا."

"axsanahum khuluqan",
oo macnihiisu yahay:

"kooda ugu akhlaaq fiican."
Wuxuu hadana yiri:
"kee baa ugu caqli badan?"

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أكثرهم ذكرا للموت، وأحسنهم استعدادا له قبل أن ينزل به أولائك الأكياس."

"aktharuhum thikran lil mawti, wa axsanahum isticdaadan lahu qabla an yanzila bihi uulaa'ika al akyaasu",
oo macnihiisu yahay:
"kooda geerida ugu xusuus badan, sida ugu fiicanna isugu diyaariya ka hor intayan kusoo deganin. Kuwaasaa caqli badan."

Markaasuu ninku aamusay, kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu annaga noo soo jeestay, uuna yiri:

"يا معشر المهاجرين، خمس خصائل إذا نزلن بكم، وأعوذ بالله أن تدركوهن: إنه لم تظهر الفاحشة في قوم قط حتى يعلنوا بها إلا ظهر فيهم الطاعون والأوجاع، التي لم تكن في أسلافهم الذين مضوا، ولم ينقضوا المكيال والميزان إلا أخذوا بالسنين وشدة المؤنة وجور السلطان، ولو يمنعوا الزكات من أموالهم إلا منعوا القطر من السماء، فلو لا البهائم ما مطروا، وما نقضوا عهد الله وعهد رسوله إلا سلط عليهم عدوا من غيرهم، فأخذ بعض ما كان في أيديهم، وما لم يحكم أئمتهم بكتاب الله وتجبروا فيما أنزل الله إلا جعل الله بأسهم بينهم."

"yaa macshara Al Muhaajiriina, khamsu khisaa'ilin ithaa nazalna bikum, wa acuuthu bi Allaahi an tudrikuuhunna innahu lam tathar al faaxishatu fii qawmin qadh-dh xattaa yuclinuu bihaa illaa thahara fiihim al dh-dhaacuunu wa al awjaacu, allatii lam takun fii aslaafihim allathiina madaw, wa lam yanquduu al mikyaala wa al miizaana illaa ukhithuu bi al ssiniina wa shiddata al mu'nati, wa jawra al ssuldhaani, wa law yamnacuu al zzakaata min amwaalihim illaa municuu al qadhara mina Al Ssamaa'i, fa law laa al bahaa'ima maa mudhiruu, wa maa naqaduu cahda Allaahi wa cahda RasuuliHi illaa sullidha calayhim caduwwun min ghayrihim, fa akhatha bacda maa kaana fii aydiihim, wa maa lam yaxkumu a'immatuhum bi Kitaabi Allaahi wa tajabbaruu fiimaa anzala Allaahu illaa jacala Allaahu ba'saHu baynahum."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"ragga Muhaajiriintow**المهاجرين**, shan waxyaalood hadday idinku soo degaan, Ilaahay ayanna ka magan gelayaa inaad gaartaan markay soo degayaan: (Kow) markay zinadu qawm kasoo ban baxdo oo ayan qarsan oo ay laba soo bannaan baxaan ee waa tay illaa kasoo baxaan daacuun iyo cudurro aan ku dhici jirin qawmamka ayaga ka horreeyey oo gudbay (oo ay culummada muslimiintu hadda yiraahdeen waa cudurka AIDS/HIV). (Laba) Markay beegga iyo miisaanka dhimaanna waxaa lagu ridaa abaar iyo gaajo iyo dawlad xaqdarro kula dhaqanta oo qawmkaas xoogga ka qaadda. (Saddex) Hadday zakada maalkooda diidaan inay bixiyaan, waxaa laga celiyaa roobka Samada uga yimaada, oo haddayan xoolaha bahaa'imka ahaan lahayn roobba lama siiyeen. (Afar) Hadday cahdiga Ilaahay buriyaan iyo cahdiga Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa lagu sallidaa cadaw ayaga ghayrkood ah, oo aan muslin ahayn weeye ee gaal ah, oo waxay haystaan qaarkood ka qaata. (Shan) Markay madaxdoodu wax ku

xukumi waayaan Kitaabka Ilaahay, ayna iskala weynaadaan oo ka kibraan wuxuu Ilaahay soo dejiyay, Ilaahay dhexdooda ayuu colaad iyo dagaal iyo cabsi yeelaa."

Amiirnimada iyo cimaamadda loo duubay ibnu Cawf\إبن عوف

Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف amray duullaankuu u diray.
Markaasuu subixii dambe wuxuu yimid isagoo soo duubtay cimaamad dun madow laga sameeyey.
Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isu soo dhoweeyey oo uu cimaamadda furay, uuna markaas isagu Sallaa Allahu Calayhi Wasallam u duubay, dhabarkiisana ku sii daayay sayn afar farood ama wax la mid ah leh, uuna yiri:

"هكذا يا ابن عوف فاعتم، فإنه أحسن وأعرف."

"haakathaa yaa ibna Cawf fa ictamm, fa innahu axsanu wa acrafu",
oo macnihiisu yahay:

"sidaas u duubo cimaamadda ina Cawfow**إبن عوف** , oo sidaasaa qurxoon, loona badan yahaye oo la yaqaannaaye."

Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Bilaal\بلال amray inuu calanka dagaalka u dhiibo. Markaasuu u dhiibay.

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Ilaahay Tacaalaaku\الله تعالى xamdiyay, naftiisana uu ku salliyay, kaddibna uu yiri**:**

"خذ يا ابن عوف، أغزوا جميعا في سبيل الله، فقاتلوا من كفر بالله. لا تغلوا و لا تغدروا، و لا تمثلوا، و لا تقتلوا وليدا. فهذا عهد الله و سيرة نبيه فيكم."

"khuth yaa ibna Cawf, ughzuu jamiican fii sabiili Allaahi, fa qaatiluu man kafara bi Allaahi. Laa taghulluu wa laa taghdiruu, wa laa tumath-thiluu, wa laa taqtuluu waliidan. Fa haathaa Cahdu Allaahi wa siiratu NabiyyiHi fiikum".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"qaado ina Cawfow**إبن عوف** , dhammaantiinna jidka Ilaahay ku duula, lana dagaallama kuwa Ilaahay ku gaaloobay. Maalka gaalada laga furtana ha khayaanina qaybta horteed, khayaanana ha samaynnina. Maydkana wax ha ka goynina aad ku foolxumayneysaan, cunugna ha dilina. Kaas weeye cahdiga Ilaahay iyo siirada, waa jidkee, Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee dhexdiinna ah."

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** calanka dagaalka qaatay (oo uu ibnu Hishaam\إبن هشام yiri: "oo uu Duumatu Al Jandal**دومة الجندل** la aaday.").

Waxaana gacantiisa shariifka ah ugu guntay calanka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu

Calayhi Wasallam, siduu Al Muxibbu Al Dhabarii u wariyay.

Ibnu Cawf\إبن عوف oo Cumar\عمر kala tashaday doorashada Abuu Bakar

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Xadiithka Saqiifada Banii Saacidah\سقيفة بني ساعدة waxaa ka mid aha inuu Cabdu Allaahi bin Cabbaas\عبد الله بن عباس yiri:

"أخبرني عبد الرحمن بن عوف قال: وكنت في منزله بمنى أنتظره، وهو عند عمر في آخر حجة حجها عمر، قال: "فرجع عبد الرحمن بن عوف من عند عمر، فوجدني في منزله بمنى أنتظره، وكنت أقرئه القرآن، قال إبن عباس:، فقال لي عبد الرحمن بن عوف: "لو رأيت رجلا أتى أمير المؤمنين، فقال: "يا أمير المؤمنين، هل لك في فلان يقول: "والله لو قد مات عمر بن الخطاب لقد بايعت فلانا، والله ما كانت بيعة أبي بكر إلا فلتة فتمت." قال: "فغضب عمر، فقال: "إني إن شاء الله لقائم العشية في الناس، فمحذروهم هؤلاء الذين يريدون أن يغصبوهم أمرهم." قال عبد الرحمن: فقلت: "يا أمير المؤمنين لا تفعل، فإن الموسم يجمع رعاع الناس وغوغائهم، وإنهم هم الذين يغلبون على قربك، حين تقوم في الناس، وإني أخشى أن تقوم فتقول مقالة يطير بها أؤلائك عنك كل مطير، ولا يعوها، ولا يضعوها على مواضعها، فأمهل حتى تقدم المدينة فإنها دار السنة، وتخلص بأهل الثقة وأشراف الناس فتقول ما قلت بالمدينة متمكنا، فيعي اهل الفقه مقالتك، ويضعوها على مواضعها." قال: "فقال عمر: "أما والله إن شاء الله لأقومن بذلك أول مقام أقومه بالمدينة."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ii sheegay oo yiri anigoo degmadiisa Mina**منى** jooga oo isaga sugaya, isaguna uu Cumar**عمر** la jiro, xajka ugu dambeeyey oo uu Cumar**عمر** xajjiyay.

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** kasoo laabtay Cumar**عمر**, uuna iga helay anigoo meeshuu Mina**منى** degay jooga oo isaga sugaya, oo Quraankaan bari jiray.

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu igu yiri:
"haddaad arki lahayd nin Amiiru Al Mu'miniina**أمير المؤمنين** u yimid oo yiri:
"Amiiru Al Mu'miniinow**أمير المؤمنين** , bal ka warran hebel oo yiri:
"wa Allaahi**والله** markuu Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** dhinto waxaan baayacayaa oo dooranayaa hebel, oo wa Allaahi**والله** doorashada Abuu Bakar**أبوبكر** ma ayan ahayn waxaan ahayn qalad degdeg lagu galay, kaddibna la saxay."

Markaasuu Cumar**عمر** carooday oo uu yiri:
"galabtaan dadka la hadlayaa, oo aan uga digayaa kuwaas doonaya inay amarkooda ka fara maroorsadaan oo ka xoogaan."
Markaasaan waxaan ku iri:

" Amiiru Al Mu'miniinowأمير المؤمنين , ha yeelin, oo xajku wuxuu kulmiyaa raaciyada iyo majaha dadka, ayagaana dadka kuugu soo dhowaanaya markaad hadal u istaagtid. Aniguna waxaan ka baqayaa inaad istaagtid oo aad tiraahdid hadal ay kuwaasu ula kala duulaan dalalkoo idil, ayagoona aan waxaad tiri weeleyn, aanna hadalkaaga dhigayn meesha ku habbooneyd in la dhigo. Marka u kaadi intaad Al Madiinah\المدينة uga laabatid, taasoo ah Daarta Sunnada\دار السنة, oo aad markaas u tagtid dad lagu kalsoon yahay iyo madaxda dadka, oo aad markaas waxaad hadda tiri aad Al Madiinah\المدينة ku tiraahdo, adigoo sugan oo uu markaas dadka fiqiga ehelka u ahi uu hadalkaaga weeleeyo oo meeshuu ku habboon yahay ay dhigaan."
Markaasuu Cumar\عمر wuxuu yiri:
"wa Allaahi inshaa'a Allaahu\والله إن شاء الله taas waan la istagayaa marka ugu horreysa oo aan Al Madiinah\المدينة dadka ku dhex istaago."

Khudbada Cumar\عمر ee doorashada Abuu Bakar\أبوبكر

Ibnu Cabbaas\إبن عباس wuxuu yiri:

"فقدمنا المدينة في عقب ذي الحجة، فلما كان يوم الجمعة عجلت الرواح حين زالت الشمس، فأجد سعيد بن زيد بن عمرو بن نفيل جالسا إلى ركن المنبر فجلست حذوه وتمس ركبتي ركبته، فلن أنشب أن خرج عمر بن الخطاب، فلما رأيته مقبلا، قلت لسعيد بن زيد: "ليقولن العشيةعلى هذا المنبر مقالة لم يقلها منذ استخلف"؛ قال: "فأنكر علي سعيد بن زيد ذلك، وقال: "ما عسى أن يقول مما لم يقل قبله." فجلس عمر على المنبر، فلما سكت المؤذنون، قام فأثنى على الله بما هو أهل له، ثم قال: "أما بعد،
"فإني قائل لكم اليوم مقالة قد قدر لي أن أقولها، ولا أدري لعلها بين يدي أجلي، فمن عقلها ووعاها فليأخذ بها حيث انتهت به راحلته، ومن خشي أن لا يعيها فلا يحل لأحد أن يكذب علي. إن الله بعث محمدا، وأنزل عليه الكتاب، فكان مما أنزل عليه آية الرجم، فقرأناها وعلمناها ووعيناها، ورجم رسول الله صلى الله عليه وسلم ورجمنا بعده، فأخشى إن طال بالناس زمان أن يقول قائل: والله ما نجد الرجم في كتاب الله، فيضلوا بترك فريضة أنزلها الله، وإن الرجم في كتاب الله حق على من زنى إذا أحصن من الرجال والنساء، وإذا قامت البينة أو كان الحبل أو الإعتراف. ثم إنا قد كنا نقرأ من كتاب الله: "لاترغبوا عن آبائكم فإنه كفر بكم أن ترغبوا عن آبائكم." ألا إن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: "لاتطروني كما أطري عيسى ابن مريم، وقولوا عبد الله ورسوله." ثم إني قد بلغني أن فلانا قال: والله لو قد مات عمر بن الخطاب لقد بايعت فلانا، فلا يغرن امرأ أن يقول: "إن بيعة إبي بكر فلتة فتمت"، وإنما قد كانت كذلك إلا أن الله قد وقا شرها، وليس فيكم من تنقطع الأعناق إليه مثل أبي بكر، فمن بايع رجلا عن غير مشورة من المسلمين، فإنه لا بيعة له هو ولا الذي بايعه تغرة أن يقتلا، إنه كان من خبرنا حين توفى الله نبيه صلى الله عليه وسلم أن الأنصار خالفونا، فاجتمعوا بأشرافهم في سقيفة بني ساعدة، وتخلف عنا علي بن أبي طالب والزبير بن العوام ومن معهما، واجتمع المهاجرون إلى أبي بكر، فقلت لأبي بكر: "إنطلق بنا إلى إخواننا من الأنصار"، فانطلقنا نؤمهم حتى لقينا منهم رجلان صالحان، فذكرا لنا ما تمالأ عليه القوم، وقال: "أين تريدون يا معشر المهاجرين؟" قلنا: "نريد إخواننا هؤلاء من الأنصار"، قالا: "فلا عليكم أن لا تقربوهم يا معشر المهاجرين، أقضوا امركم." قال: "قلت: "والله لنأتينهم،" فانطلقنا حتى أتيناهم في سقيفة بني ساعدة، فإذا بين ظهرانيهم رجل مزمل فقلت: "من هذا؟" فقالوا: "سعد بن عبادة"، فقلت: "ما له؟" فقالوا: "وجع". فلما جلسنا تشهد خطيبهم، فأثنى على

الله بما هو له أهل، ثم قال: "أما بعد، فنحن أنصار الله وكتيبة الإسلام، وأنتم يا معشر المهاجرين رهط منا، وقد دفت دافة من قومكم"، قال: "وإذا هم يريدون أن يحتازونا من أصلنا، ويغصبونا الأمر، فلما سكت أردت أن أتكلم، وقد زورت في نفسي مقالة قد أعجبتني، أريد أن أقدمها بين يدي أبي بكر، وكنت أداري منه بعض الحد، فقال أبو بكر: "على رسلك يا عمر!" فكرهت أن أغضبه، فتكلم، وهو كان أعلم مني وأوقر، فوالله ما ترك من كلمة أعجبتني من تزويري إلا قالها في بديهته، أو مثلها أو أفضل، حتى سكت." قال: "أما ما ذكرتم فيكم من خير، فأنتم له أهل، ولن تعرف العرب هذا الأمر إلا لهذا الحي من قريش، هم أوسط العرب نسبا ودارا، وقد رضيت أحدهذين الرجلين، فبايعوا أيهما شئتم"، وأخذ بيدي وبيد عبيدة بن الجراح، وهو جالس بيننا، ولم أكره شيأ مما قاله غيرها، كان والله أن أقدم فتضرب عنقي، لايقربني ذلك إلا إثم، أحب إلي من أن أتأمر على قوم فيهم أبو بكر. قال قائل من الأنصار: "أنا جذيلها المحكك وعذيقها المرجب، منا أمير ومنكم أمير يا معشر قريش". قال: "فكثر اللغط، وارتفعت الأصوات، حتى تخوفت الاختلاف، فقلت: "أبسط يدك يا أبا بكر"، فبسط يده، فبايعته، ثم بايعه المهاجرون، ونزونا على سعد بن عبادة، فقال قائل: "قتلتم سعد بن عبادة"، قال: فقلت: "قتل الله سعد بن عبادة."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markaasaan waxaan Al Madiinah**المدينة** nimid dhammadka bisha Thuu Al Xajjah**ذوالجدة**. Markaasay markay ahayd maalinta jimcaha ah ayaan masjidka usoo degdegay, markay qorraxdu beerka Samada ka iilatay, waxaanna u imid Saciid bin Zayd bin Camr bin Nawfal**سعيد بن زيد بن عمرو بن نفيل** oo rukniga Minbarka**المنبر** ag fadhiya, oo aan dhiniciisa fariistay, ayadoo uu jilibkaygu jilibkiisa ku dheggan yahay. In yar markaan fadhiyayba waxaa soo galay Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** . Markaasaan markaan arkay isagoo soo socda ayaan waxaan Saciid bin Zayd**سعيد بن زيد** ku iri:
"galabta wuxuu minbarka ka oran doonaa hadal uusan oran tan iyo intuu xilka khaliifnimada qaaday."
Markaasuu Saciid**سعيد** taas igu diiday, uuna yiri:
"muxuu oran karaa oo uusan tan iyo hadda oran?"

Markaasuu Cumar**عمر** manbarka ku fariistay, oo markuu mu'ath-thanku aamusay uu kacay oo uu Ilahay siduu u mudan yahay u ammaanay, kaddibna uu yiri:

"intaas dabadeedna, anigu waxaan maanta idinku leeyahay hadal la ii qadaray inaan iraahdo. Mana ogi, oo waxaaba dhici karta inay tahay ajashayda horteed. Marka qofka hadalkaygaas kasa oo weeleeya ha la aado oo u qaato meeshuu gaadiidkiisu geeyo, waa safarkiise, oo uu u socday. Qofka ka baqana inuu weeleeyo, axadna xalal uma aha oo uma bannaana inuu been iga sheego. Ilaahay wuxuu soo diray Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna kusoo dejiyay Kitaab, wuxuu kusoo dejiyayna waxaa ka mid ahaa Aayadda rajmiga, oo waan akhrinnay oo nala baray, waana weeleynnay. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu rajmay, dabadiisna annagaa rajminnay. Marka, waxaan ka baqayaa inuu zamanku dadka ku dheeraado, oo uu markaas midi yiraahdo: "wa Allaahi**والله**\ inaanan ka heleyn Kitaabka Ilaahay rajmiga**الرجم**, oo ay markaas ku baadiyoobaan ka tegidda fardi Ilahay soo dejiyay. Rajmiguna wuxuu run ahaan ku jiraa kitaabka Ilaahay in la rajmiyo oo dhagax lala dhaco

ilaa uu ka dhinto markuu zinaysto qof guur sad kusoo qaatay oo rag iyo dumarba, bayyinaduna ay ku caddaato oo lagu sugo, ama uurba uu jiro, ama la qirto. Waxaa kaloo ka mid ah waxaan kitaabka Ilaahay ka akhrinnay:

"لا ترغبوا عن آبائكم فإنه كفر بكم أن ترغبوا عن آبائكم."

"laa targhabuu can aabaa'ikum fa innahu kufrun bikum an targhabuu can aabaa'ikum",
oo macneheedu yahay:

"aabayaalkiinna idin dhalay oo aad ku abtirsataan aabayaal kale ha ka dooranninа, maxaa yeelay waxay idinku tahay gaalnimo inaad aabayaalkiin kuwa kale ka doorataane." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"لاتطروني كما أطري عيسى إبن مريم وقولوا عبد الله ورسوله."

"laa tudhruunii kamaa udhriya Ciisaa ibnu Maryama wa quuluu Cabdu Allaahi wa Rasuuluhu ",
oo macnihiisu yahay:

"ha ii faanina sida loo faaniyay oo looga been sheegay Ciise ina Maryama**عيسى ابن مريم** ee waxaad tiraahdaan waa addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Intaas kaddibna waxaa isoo gaartay inuu hebel yiri:
"wa Allaahi**والله** markuu Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** dhinto waxaan doorannaynaa hebel."

Marka, yuusan axadna ku dagmin inuu yiraahdo inay doorashada Abuu Bakar**أبوبكر** ahayd qalad lagu degdegay, kaddibna la saxay. Sidaas ayayna ahayd, laakiin Ilaahay ayaa sharkeeda celiyay. Adinkana idinkuma jiro nin loo adeecayo oo qoorta loo hoorsanayo sidaa Abuu Bakar**أبوبكر** oo kale.

Marka ninka baayaca nin kale isagoo aan muslimiinta la tashan, doorashadiisa waxba kama jiraan, isaga iyo midkuu doortayba, waxaanna uga baqayaa in labadoodu dilid ku dhacaan oo la dilo.

Khabarkeenna marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsaday, waxaa ka mid ahaa inay Ansaartu**الأنصار** na khilaaftay, oo ay markaas madaxdoodu ku shireen beerta Saqiifatu Banii Saacidah**سقيفة بني ساعدة.**

Waxaana naga haray Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب** iyo Al Zzubayru bin Al Cawwaamu**الزبير بن العوام** iyo inta labadooda la jirtay. Muhaajiriintuna**المهاجرين** waxay isugu yimaadeen Abuu Bakar**أبوبكر.**

Markaasaan Abuu Bakar**أبوبكر** waxaan ku iri:
"noo gee walaaleheennaas Ansaarta**الأنصار** ah."

Markaasaan dhaqaaqnay oo intaan usii soconnay aan la kulannay laba nin oo suuban, oo noo sheegay waxay raggasu go'aan ah oo ay gaareen. Midkoodna wuxuu yiri:
"ragga Muhaajiriinta ahow, xaggee baad u socotaan?"
Waxaan niri:
"Waxaan u soconnaa walaalehennaas Ansaarta\الأنصار ah. "

Waxay labadooduba yiraahdeen:
"dambi korkiinna ma aha haddaydnaan u tegin ragga Muhaajiriinta\المهاجرين ahow! Adinku amarkiinnaa go'aansada."
Waxaan iri:
"wa Allaahi\والله waan u tegeynnaa."

Markaasaan dhaqaaqnay oo aan beerta Banii Saacidah\بني ساعدة nimid (Saqiifah\سقيفة macneheedu waa beer), waxaanna u nimid ayagoo uu dhexdooda joogo nin maro ku duuban.
Markaasaan waxaan iri:
"kanna waa kee?"
Waxay yiraahdeen:
"waa Sacd bin Cubaadah\سعد بن عبادة".
Waxaan iri:
"muxuuna qabaa?"
Wuxuu yiri:
"waa xanuunsan yahay."

Markaasaan markaan fariisannay uu ninka u hadlayay ashahaatay oo uu Ilaahay u ammaanay siduu u mudan yahay, kaddibna uu yiri:
"intaas dabadeedna, annagu waxaan nahay Ansaarta\الأنصار Ilaahay iyo guutada islaamka, adinkuna ragga Muhaajiriinta\المهاجرين ahow waxaad tihiin koox iyo jilib annaga naga mid ah, koox idinka mid ahna way nala soo degeen."

Waxayba doonayaan inay asalkeennaba naga gooyaan oo ay amarkeennaba naga fara maroorsadaan. Markaasaan markuu aamusay damcay inaan hadlo, anigoo nafteyda ku diyaarsaday khudbo aan u bogay, oo aan doonayo inaan Abuu Bakar\أبوبكر hortiisa ka iraahdo, waxaanna ku aqiinnay Abuu Bakarأبوبكر xoogaa hadal adkaan ah aan doonayay inaan hadalkayga ku jilciyo. Markaasuu Abuu Bakarأبوبكر wuxuu yiri:
"Sug Cumarow\عمر."

Markaasaan kahday inaan ka caraysiiyo. Markaasuu Abuu Bakarأبوبكر hadlay. Isagaana iga cilmi badnaa, igana haybad weynaa. Markasuusan wa Alaahi\والله ka tegin erayna oo ku jiray khudbadaan nafteyda ku diyaarsaday oo aan u bogay, wuxuuna u yiri si qurux miiran ah, oo wax la mid ahba ayan jirin, oo ama ayadii oo kale ah ayu yiri, ama eray ka sarreeya. Markaasuu aamusay. Wuxuuna yiri:

"fiicnaanta aad isku sheegteen waad mudan tihiin oo leedihiin. Amarkaanse Carabtu uma aqoonsana cidaan qabiilkaan Quraysh\قريش ahayn, ayagoo Carab ugu laan dheereysan iyo

wadanba. Aniguna waxaan raalli idiinka noqday mid labadaan nin ka mid ah ee midkaad doontaan doorta." Markaasuu wuxuu qabtay gacantayda iyo gacanta Abii Cubaydah bin Al Jarraax**أبي عبيدة بن الجراح,** isagoo labadeenna na dhex fadhiya. Hadalkiisana kama aanan kahan waxaan taas ahayn, oo wa Allaahi**والله** waxaan taas ka dooran lahaa in qoorta la iga gooyo, taasna uusan ii geyneyn waxaan dambi ahayn, aan kana jeclahay taas inaan amiir u noqdo rag uu Abuu Bakar**أبوبكر** ku jiro.

Markaasuu nin Ansaarta**الأنصار** ka mid ihi wuxuu yiri:
"anigu waxaan ahay midka tolkiisa lagu daawoobo, sida qoriga loo suro geela cadhada qaba inuu isku xoqqo oo uu markaas ku bogsoodo. Waxaana ahay geed timireedkeeda ugu weyn (oo ah in geedka timirta oo fiicnaanta badan in marka dhererkeeda iyo timirta saaran loo baqo inay soo dhacdo ayaa waxaa hareeraha looga dhisaa dhismo ama dhagax ama qori). Annagana waxaa naga mid ah amiir , adinkana amiir, ragga Qurayshow**قريش.**"

Markaasay dooddu badatay, codkana kor loo qaaday, oo aan markaas in la is khilaafo ka baqay. Markaasaan waxaan iri:
"Soo fidi gacantaada Abuu Bakarow**أبوبكر**."

Markaasuu gacantiisa soo fidiyay oo aan baayacay. Kaddibna waxaa baayacay Muhaajiriinta**المهاجرين ,** kaddibna waxaa baayacay Ansaarta**الأنصار.**

Markaasaan waxaan soo dul marnay Sacd bin Cubaadah**سعد بن عبادة,** oo uu nin ayaga ka mid ihi yiri:
"waad disheen Sacd bin Cubaadah**سعد بن عبادة**."
Markaasaan waxaan iri:
"Allaha dilo Sacd bin Cubaadah**سعد بن عبادة**."
Beertaan waxaan kasoo hadalnay markaan Shiikhaal kasoo hadalnay.

Labada nin oo Abuu Bakar**أبوبكر** iyo Cumar**عمر** dariiqa kula kulmay markay us socdeen beerta Banii Saacidah**بني ساعدة** waxay ahaayeen Ansaar**الأنصار,** oo midkood wuxuu ahaa Cuwaym bin Saacidah**عويم بن ساعدة,** kan kalena Macn bin Cadiyy**معن بن عدي** oo u dhashay Banii Al Cajlaan**بني العجلان .** Cuwaym bin Saacidah**عويم بن ساعدة** waa midka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka la weydiiyay:
"waa kuwee kuwa uu Ilaahay Cazza wa Jalla ka yiri:

لَا تَقُمْ فِيهِ أَبَدًا لَمَسْجِدٌ أُسِّسَ عَلَى التَّقْوَى مِنْ أَوَّلِ يَوْمٍ أَحَقُّ أَنْ تَقُومَ فِيهِ فِيهِ رِجَالٌ يُحِبُّونَ أَنْ يَتَطَهَّرُوا وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُطَّهِّرِينَ (108)

"**Laa taqum fiihi abadan la masjidun ussisa calaa al ttaqwaa min awwala yawmin axaqqu an taquuma fiihi fiihi rijaalun yuxibbuuna an yatadhahharuu wa Allaahu yuxibbu al mudh-dhahhariina**(108)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ha dhexjoogsan oo dhexdiisa ha ku tukan, waana masjidu al diraar oo ay gaalo iyo munaafiqiin Masjidu Qubaa'a**مسجد قباء** agtiisa ka dhiseen si ay muslimiinta u kala gooyaan oo qaybiyaan oo taagtooda ku kala dhanbalaan, oo ay dhibiddaas daraadeedba u dhiseen, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay Aayaduu soo degatay, uu gubay, meeshuu ku yiillayna ka dhigay meel qashinqub ah oo waxa xun oo qurmoon lagu daadiyo, haddana wuxuu kasoo horjeedaa Masjidu Qubaa'a**مسجد قباء** waana xafiisyo ganacsi. Waxaa mudan inaad dhexdiisa ku tukatid masjid maalinta koowaadba lagu asaasay taqwada iyo cabsida Ilaahay.

Al Qurdhubii**القرطبي** wuxuu wariyay inuu ibnu Cabbaas**إبن عباس** iyo Al Daxxaak**الضحاك** iyo Al Xasan**الحسن** jamaaco ay ka mid yihiin waxay yiraahdeen waa Masjidu Qubaa'a **مسجد قباء** waxayna go'aankoodaas la xiriiriyeen " مِنْ أَوَّلِ يَوْمٍ**min awwala yawmin**"

"Maalinta ugu horreyseyba"**,** ayadoo Masjidu Qubaa'a**مسجد قباء** lagu aasaasay maalinta ugu horreeysey oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah**المدينة** yimid, lagana hor dhisay Masjidka Al Masjidu Al Nabawii**المسجد النبوي,** Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu kaloo wariyay inuu Abuu Hurayrah**أبو هريرة** yiri:
"Aayaddaani waxay kasoo degatay dadka Qubaa'a**قباء** dega:

فِيهِ رِجَالٌ يُحِبُّونَ أَنْ يَتَطَهَّرُوا وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُطَّهِّرِينَ (108)

"**fiihi rijaalun yuxibbuuna an yatadhahharuu wa Allaahu yuxibbu al mudh-dhahhariina"**, wuxuuna yiri:
"Waxay ku istinjoon jireen biyo markaasey Aayaddaani kasoo degatay."

Qataadah**قتادة** wuxuu yiri:
"Markay Aayaddaani soo degatay ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dadka Qubaa'a**قباء** dega ku yiri:

"إن الله سبحانه قد أحسن عليكم الثناء في التطهر فما تصنعون؟"

"Inna Allaaha Subxaanahu qad axsana calaykum al th-thnaaa'a fii al tadhahhuri famaa tasnacuuna?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay Subxaanahu wuu wanaajiyay ammaantiina xagga nadafadda ee maxaad samaysaan?" Waxay yiraahdeen:
"Raadka saxarada iyo kaadida (kaddib markay dhagax isaga tiraan) ayaan biyo ku dhaqnaa." Xadithkaanna waxaa wariyay Abuu Daauud**أبوداود.** Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam xadiithka Al Daaraqudhniyyu**الدارقطني** ee Anas bin Maalik**أنس بن مالك** wuxuu ku yiri:

"هو ذلك فعليكموه!"

"Huwa thaaka facalaykumuuhu",
oo macnihiisu yahay:

"Waa kaase ku dhegganaada oo sameeya ee ha ka tegina" uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"نعم المرء منهم عويم بن ساعدة."

"nicma al mar'u minhum Cuwaym bin Saacidah",
oo macnihiisu yahay:

"waa rag nicmaysan, waxaana ka amid ah Cuwaym bin Saacidah\عويم بن ساعدة."

Macn bin Cadiyyina\معن بن عدي, waxaa nasoo gaartay inay dadku Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku dul ooyeen, markuu Ilaahay Cazza wa Jalla الله عزوجل\ oofsaday, ayna yiraahdeen:
"wa Allaahi\والله waxaan jeclaan lahayn inaan hortiis dhimanno, oo waxaan ka baqaynnaa inaan dabadiis fitnownno."

Macn bin Cadiyyina معن بن عدي wuxuu yiri:
"laakiin wa Allaahi والله anigu ma jecli inaan hortiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhinto, si aan u rumeeyo isagoo mayd ah, sidaan u rumeeyey isagoo nool."

Macn\معن waxaa shahiidnimo loogu dilay Maalinta Al Yamaamah\يوم اليمامة, khilaafada Abuu Bakr\أبوبكر , maalinta Musaylimah al kath-thaab\مسيلمة الكذاب."

. Saqiifatu Banii Saacidah سقيفة بني ساعدة

Saqiifah\سقيفة macneheedu waa beer, beertaanna sideedii ayay weli u jirtaa, isla magaca ayayna wadataa.

Beertaas dhexdeeda Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu ku tukaday, biyana ka cabay. Waxaana iska lahaa qabiilka Ansaarta\الأنصار ah ee Banii Saacidah\بني ساعدة oo fariisan jiray.

Beertaasu waa barta ay ka dhacday doorashada siyaasiga oo islaamka ugu horreeysa oo lagu doortay Abuu Bakr Al Siddiiqu\أبوبكر الصديق, khaliifka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ah madaxweynaha dawladda islaamka ee ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Beertaasu waxay Masjidu Al Nabawii\مسجد النبوي xagga galbeed ka xigtaa oo ayan waxba u dhexeyn laba boqol iyo lix mitir. Beertaasu waxay furantahay oo la geli karaa, sidaan anigu ku arkay barqadii intaan salaadda duhur la tukan horteed, oo ay shaqaale waraabiya

oo dayac tira ku jiraan, kaddibna albaabkaa loo xiraa. Mar kastase waa la arki karaa dhexdeeda oo darbi dhagaxa ah kuma wareegsana ee waxaa un ka taataagan ulo biro ah. Beerta dhexdeedana waxaa ku yaalla geedo timireed iyo geedo kale iyo dhir kala duwan. Haddaan xusuustayda ka qiyaasana dhererkeeda iyo ballarkeeduba waa ilaa sodoon mitir iyo soddon mitir ama wax intaas u dhow, oo in yar ka yar ama in yar ka badan.

Saqiifatu Banii Saacidah**سقيفة بني ساعدة.** Xasanwali 1433H/2012M.

Dhimashada Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf\عبد الرحمن بن عوف

Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ku dhintay sanadka kow iyo soddonaad Al Madiinah**المدينة**, isagoo shan iyo toddobaatan sano jira, wuxuuna ka dardaarmay konton kun oo Diinaar inay sadaqo u tahay, siduu Curwah bin Al Zzubayru **عروة بن الزبير** u wariyay.

Al Zuhriyyu**الزهري** wuxuu yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** wuxuu u dardaarmay nin kastoo Badar**بدر** ka qayb galay afar boqol oo Diinaar, waxayna ahaayeen boqol nin (waa inta markaas noolayd ayay ila tahay). Markaasay wada qaateen, waxaana ka mid ahaa ragga qaatay Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان**. Wuxuu kaloo sadaqo ahaan uga dardaarmay kun faras."

Ibnu Al Athiir**إبن الأثير** wuxuu yiri:

"Markuu dhintay wuxu Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب** yiri:
"iska tag ina Cawfow**إبن عوف**, waxaad soo gaartay saafinnimadeeda, waxaadna ka hor martay markay ciriiri noqotay."

Sacd bin Abii Waqqaas**سعد بن أبي وقاص** oo janaazadiisa wax ka siday wuxuu lahaa: "Waa jabalaah**واجبلاه!**" oo ah "Buurtiiyey!"

Wuxuu ka tegay maal fara badan, oo uu ka mid yahay dahab faasas lagu goyay ilaa ay ragga goynayay ay gacnuhu hambalaaluqeen. Wuxuu ka tegay kun rati, boqol faras, saddex kun oo neef oo ari ah oo Al Baqiicu**البقيع** daaqda.

Wuxuu lahaa afar haweeney, oo middiiba sideetan kun la siiyay.

Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu ahaa nin (dheer, siduu ibnu Sacd**إبن سعد** u wariyay) cad oo guduud la cabsiiyay, waji qurxoon, haraggiisuna khafiif yahay, indho waawayn, bashimo madow, san qaroor leh, timaha madaxa oo badan leh, labadiisa gacnoodna, waana ilaa cumaacumaha oo xooggiisa tilmaamaya, waawayn yihiin, farihiisuna ay adag yihiin. Garkiisa iyo timaha madixiisana markay cirrobeen midab ma marin jirin.
Waa intaas warkiisu.

Kitaabka Al Isaabah\الإصابة ee Ibnu Xajar Al Casqalaanii\إبن حجر العسقلاني

Al lmaam al xaafith abuu Al Fadl Axmad bin Caliyyi bin Muxammad bin Muxammad bin Caliyyi bin Xajar al Kinaanii al Casqalaanii **الإمام الحافظ أبو الفضل بن علي بن محمد بن محمد بن علي بن حجر الكناني العسقلاني**, kaddibna al Misrii**المصري** al Shaaficii**الشافعي**, oo dhashay sanadka Hijriga ee toddoba boqol iyo saddex iyo toddobaatan, marka horena bartay al adab iyo gabayada oo fiidda ka gaaray, kaddibna wuxuu bartay Xadiithka oo uu culummo badan ka bartay, oo uu funuuntiisa oo idil fiidda ugu sarreysa ka gaaray ilaa uu ka gaaray in loo soo safro si looga barto Xadiithka, wuxuuna noqday oo u sugnaatay madaxtinnimada Xadiithka ee adduunkoo idil, wuxuuna dhigay kutubbo badan, yeerinna looga qoray kun majlis in ka badan. Waxaana kutubbadiisa ka. mid ah Fatxu Al Baarii bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii**فتح الباري بشرح صحيح البخاري.**

Ibnu Xajar Al Casqalaanii wuxuu kitaabkiisa taraajimta uu saxaabada uga warbixinayo cinwaankiisuna yahay "Al Isaabah Fii tamyiizi Al Ssaxaabah**الإصابة في تمييز الصحابة**" wuxuu Xadiith-kiisa #5202 uuna uga warbixinayo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **عبد الرحمن بن عوف** ku yiri waxay ka mid yihiin:

Macmar**معمر** wuxuu Al Zuhriyyu**الزهري** ka wariyay inuu yiri:
Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف** wuxuu zamanka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam sadaqaystay nus maalkiisa; kaddibna wuxuu sadaqaystay afartan kun oo diinaar; kaddib wuxuu gaadiid ahaan u bixiyay oo rag mujaahidiin ah ku qaaday shan boqol oo faras iyo shan boqol oo halaad oo rukuub ah. Maalkiisa inta badani wuxuu ka kasbay ganacsi. Xadiithkana waxaa wariyay ibnu Al Mubaarak**إبن المبارك.**

Waxaa la yiri: "maalin kali ah ayuu sodoon addoon xoreeyey."

Ibnu Mubaarak wuxuu kitaabkiisa "Al Zuhdi**الزهد**" yiri:
"Shucbah**شعبة** wuxuu nooga wariyay Sacd bin Ibraahiim**سعد بن إبراهيم** inuu aabihiis yiri:
"Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** salaadda duhur horteed wuxuu tukan jiray salad dheer, markaasuu markuu addinka maqlo ayuu marada si xoog leh u xiran jiray una soo bixi jiray."
Cumar wuxuu yiri:

"عبد الرحمن سيد من سادات المسلمين."

Oo macnihiisu yahay:
"Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** waa nin madaxda muslimiinta ka mid ah."

Al Tirmithii**الترمذي** wuxuu wariyay, siduu u wariyay Al Siraaju**السراج** oo ku wariyay kitaabkiisa "Taariikhda**تاريخه**" kana wariyeen Nawfal bin Iyaas al Huthaliyyu **نوفل بن إياس الهذلي\,** oo yiri:

"Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** isku majlis ayaan ahayn – wuxuuna ahaa nin la fariisto oo nicmo leh – markaasuu maalin gurigiisa noo waday. Markaasuu galay uuna qubaystay, kaddibna uu soo baxay. Kaddib waxaa naloo keenay saxan ay saran yihiin muufo iyo hilib. Markaasuu booyay. Markaasaan waxaan ku iri:

"Abaa Muxammadow**أبا محمد**, maxaa kaa boohisiinaya?"

Wuxuu yiri:

"Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu dhintay isaga iyo reerkiisa oo aan muufada shaciirka laga sameeyey ka dhergin, aniguna uma jeedo in dib naloogu digay wax annaga khayr noo leh inay tahay."

Jacfar bin Burqaan**جعفر بن برقان** wuxuu yiri:

"Waxaa isoo gaaray inuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** xoreeyey soddon kun oo qof."

Abuu Nucaym ayaana ku wariyay kitaabkiisa ""Al Xilyah**الحلية**".

Dhan kalena, Xafs bin Cumar bin Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf **حفص بن عمر بن عبد الرحمن بن عوف** wuxuu yiri:

"Zamanka jaahiliyada ayuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** khamrada xaaraan isaga dhigay."

Wuxuu dhintay sanadka kow iyo soddon, waxaa kaloo la yiri laba iyo soddon kanoo caansan, wuxuuna noolaa laba iyo toddobaatan sano. Waxaa kaloo la yiri bal shan iyo toddobaatan. Tan hore ayaana sugan. Waxaana lagu duugay Al Baqiic**البقيع**, waxaana ku tukaday Cuthmaan**عثمان** . Waxaa kaloo la yiri bal waxaa ku tukaday Al Zubayru bin Al Cawwaamu**الزبير بن العوام.**

Waa intaas warkaan ibnu Xajar**إبن حجر** kasoo qaadannay Allaha dambigiisa dhaafee.

Al Qaffaal Al Sh-shaashii, Al Imaamu Al Callaamah, Al Faqiih Al Usuuliyyi Al Llughawiyyi, caalimu Khurasaan Abuu Bakr, Muxammad bin Caliyyi bin Ismaaciil Al Sh-shaashii Al Sh-shaaficii, Al Qaffaalu Al Kabiiru, imaamu waqtihi, bimaa waraa'a Al Nahri, wa saaxibu al tasaaniif

القفال الشاشي، الإمام العلامة، الفقيه، الأصولي، اللغوي، عالم خرسان أبوبكر، محمد بن علي بن إسماعيل الشاشي الشافعي، القفال الكبير، إمام وقته، بما وراء النهر، وصاحب التصانيف

Aabayaalka uu Sheekh Suufi ku abtirsado waxaa ka mid ah Abuu Bakr, Muxammad bin Caliyyi bin Ismaaciil Al Sh-shaashii**أبوبكر، محمد بن علي بن إسماعيل الشاشي**

.

Al Imaamu Al Th-thahabii**الإمام الذهبي** wuxuu kitaabkiisa Siyaru Aclaamu Al Nnubalaa'i **سير أعلام النبلاء** mujalladka laba iyo tobnaad bogga saddex boqol saddex iyo toddobaatan ku yiri:

"Al Xaakimu**الحاكم** wuxuu yiri:

"Al Qafaalu**القفال** isagaa zamankiisa dadka ugu cilmi badnaa arliga la yiraahdo "Maa waraa'a Al Nnahri**ما وراء النهر**" oo ah "inta wabiga ka dambeysa" cilmiga ussuusha

الأصول\, isagaana ugu safrid badnaa isagoo barashada Xadiithka doonaya."

Wuxuu cilmiga ka bartay Abaa Bakr bin Khuzaymah\أبا بكر بن خزيمة, iyo ibnu Jariir Al Dh-dhabarii\إبن جرير الطبري, iyo Cabdu Allaahi bin Isxaaq Al Madaa'inii عبد الله بن إسحاق المدائني\, iyo Muxammad bin Muxammad Al Baaghandii\محمد بن محمد الباغندي, iyo Abaa Al Qaasim Al Baghawii\أبا القاسم البغوي, iyo Abaa Caruubah Al Xarraanii\أبا عروبة الحراني iyo dhabaqadooda oo ah culummada ay isku zamanka noolaayeen.

Al Xaakimu\الحاكم wuxuu wariyay inuu Al Qaffaalu\القفال ku dhintay Al Shaash\الشاش dhammaadka sanadka saddex boqol shan iyo lixdan.
Waxaa sidoo kale isaguna yiri Sacdu Al Ssamcaanii\سعد السمعاني, kuna daray inuu dhashay sanadka laba boqol kow iyo sagaashan.

Wuxuu allifay kutubbo badan oo uusan axadna wax la mid ah hore u dhigin. Isagaana ahaa kan ugu horreeya oo kitaab ka dhigay doodda wanaagsan ee fuqahada, wuxuuna allifay kitaab ku saabsan usuuli al fiqhi\أصول الفقه. Wuxuu sharxay kitaabka Imaam Al Sh-shaaficii\الإمام الشافعي ee "Al Rrisaalah\الرسالة".

Al Qaffaal\القفال ayuu ka faafay cilmiga fiqiga Al Sh-shaafici\الفقه الشافعي oo isagaa dadka baray inta wabiyada ka dambeysa.

Wiilkiisa Al Qaasimu\القاسم wuxuu allifay kitaabka "Al Taqriibu\التقريب", oo ah kitaab aad u faa'iido badan, waxaana kasoo guuriyay sheekha dhigay kitaabka "Al Nihaayah\النهاية" o ah imaamu Al Xaramayni\إمام الحرمين, iyo kan dhigay kitaabka "Al Wasiidhu\الوسيط" (Kitaab Al Wasiidhu\الوسيط la yiraahdana waxaa dhigay Al Imaamu Abuu Xaamid Al Ghazaalii\الإمام أبو حامد الغزالي, Allaha u naxariistee) oo ku guuriyay "kitaabu Al Rrahni \كتاب الرهن", oo qaldayoo ku magaacabay Abaa Al Qaasimu\أبا القاسم.

Al Ssamcaanii\السمعاني wuxuu yiri:
"Abuu Bakr\أبوبكر wuxuu allifay kitaabka "Dalaa'ilu Al Nubuwwati\دلائل النبوة", iyo kitaabka "Maxaasinu Al Shariicah\محاسن الشريعة"."

Al Xaliimii\الحليمي wuxuu yiri:
"sheekheenna Al Qaffaalu\القفال wuxuu ahaa midka ugu cilmi badan intaan la kulmay ee culummada casrigiisa."

Al Shayku Muxyii Al Ddiini Al Nnawaawii\الشيخ محيى الدين النووي wuxuu yiri:
"haddii la sheego Al Qaffaalu Al Sh-shaashii\القفال الشاشي isagaa loo dan leeyahay, haddiise la yiraahdo Al Qaffaalu Al Marwazii\القفال المروزي waxaa loo dan leeyahay Al Qaffaalu Al Ssaghiiru\القفال الصغير ahna midka sanadka afar boqolaad kaddib noolaa.
Al Sh-shaashii\الشاشي wuxuu warkissu kusoo noqnoqdaa marka laga hadlayo tafsiirka iyo Xadiithka iyo usuulu al fiqhi\أصول الفقه iyo al kalaamu\الكلام oo ah doodda. Al Marwaziyyuna\المروزي wuxuu magaciisu kusoo noqnoqdaa culuumta fiqiga." Waa intaas warka Al Nnawawii\النووي.

Abuu Xasan Al Saffaar\أبوحسن الصفار wuxuu yiri:

"waxaan maqlay Abaa Sahl Al Ssucluukii\أبا سهل الصعلوكي oo la waydiiyay tafsiirka siduu u arko kitaabka tafsiirka ee Al Qaffaalu\القفال markaasuu wuxuu yiri:
"dhinac wuu qaddisay oo daahiriyay oo wayneeyey, waji kalena wuu wasakheeyey, uuna ka wado wajiga inuu u gargaaray Al Ictizaalu\الإعتزال, oo ahaa kuwa ka tegay majliska Al Xasan Al Basriyyi\مجلس حسن البصري."

Al Thahabii\الذهبي wuxuu yiri:
"dhimashadiisu way nasoo martay, kaamilnimaduna waa caziiz, caalinkana waxaa lagu ammaanaa waxa badan oo fadli ah oo uu leeyahay, lagumana dhex duugo oo deeqihiisa laguma dhex qariyo hal ceeb ah oo uu yeesho mar uu simbiririxday. Waxaana dhici karta inuu kasoo noqday. Waxaana loogu dambi dhaafayaa inuu si waasac ah ugu soo jeestay doonidda xaqqa, wa laa quwwata illaa bi Allaahi\ولا قوة إلا بالله."

Abuu Bakr Al Bayhaqii\أبوبكر البيهقي (waana Abuu Bakr Axmad bin Al Xusayn Al Bayhaqii\أبوبكر أحمد بن الحسين البيهقي oo allifay kutubbo badan oo Xadiithka iyo Siirada iyo Fiqiga, kana mid ah culummada waawayn ee math-habka shaaficiga, noolaana inta u dhexeysay saddex boqol afar iyo sideetan ilaa afar boqol sideed iyo konton Hijriga) wuxuu kitaabkiisa "Shucabu Al Iimaani\شعبة الإيمان" ku yiri:
"waxaa noogu luqeeyey Abuu Nasr bin Qataadah\أبونصر بن قتادة o yiri waxaa noogu luqeeyey Abuu Bakr Al Qaffaal\أبوبكر القفال oo yiri:

1.أوسع رحلي على من نزل وزادي مباح على من أكل
2.نقدم حاضر ما عندنا وإن لم يكن غير خبز وخل
3.فأما الكريم فيرضى به وأما اللئيم فمن لم أبال

1. Uwassicu raxlii calaa man nazal
   Wa zaadii mubaaxun calaa man akal.
2. Nuqaddimu xaadira maa cindanaa
   Wa in lam yakun ghayra khubzin wa khallin.
3. Fa ammaa al kariimu fa yardaa bihi
   Wa ammaa al lla'iimu fa man lam ubal.

Saddexdaas tixood macnohoodu waxaa weeye:

1. Qofka ii soo martiya sii waasac ah ayaan gurigayga u dejinayaa
   Cunnadayduna way u bannaan tahay qofka cuna.
2. Waxaanna siinaynaa waxaan cunno ah oo haysanno
   Haba ahaadaan waxaan rooti iyo khal ahayne.
3. Markaasuu qofka kariimka ahi waxaas aan siinnay raalli ku noqonayaa
   Midka xun wuxuu yiraahdana anigu dan kama lihi.

Waa intaas warka Al Th-thahabii \الذهبيee ku saabsan Al Qaffaal\القفال, Allaha labadoodaba raalli ka noqdee.

Al Sh-shaashii\الشاشي/Shaanshi

Al Qafaal\القفال iyo Sheekh Suufi waxaa Al Sh-shaashii\الشاشي loo yiri, oo soomaalidu

Shaanshiyo u beddeshay, inuu Al Qaffaalu\القفال degganaa magaalada la yiraahdo Al Shaash\الشاش.

Al Thahabii\الذهبي wuxuu kitaabkiisa aan soo xusnay ku wariyay, iyo Al Doktoor Shawqii Musdhafaa Abuu Khaliil-na\الدكتور شوقي أبوخليل kitaabkiisa la yiraahdo Adhlasu Al Taariikhi Al Carabii Al Islaamii\أطلس التاريخي العربي الإسلامي, iyo ghayrkoodba inay Al Shaash\الشاش ahayd magaalo ku tiillay magaalada maanta la yiraahdo Tashkent oo ah caasimadda jamhuuriyadda Uzbekistaan agteeda. Gobolkaas iyo Muqdisho waxay ka tirsanaayeen dawladda islaamka , oo laga degi jiray meesha la doono.

Shariif Caydaruus bin Al Shariif Calii An Nadiirii Al Calawii Al Suumaalii
الشريف عيدروس بن الشريف علي العيدروس النضيري العلوي الصومالي

Shariif Caydaruus bin Al Shariif Calii An Nadiirii Al Calawii Al Suumaalii **الشريف عيدروس بن الشريف علي العيدروس النضيري العلوي الصومالي**, guddomiyaha Al Maxfal Al Islaamii\المحفل الإسلامي ee Muqdisho, Allaha u naxariistee, wuxuu kitaabkiisa "Bughyatu Al Aamaali fii Taariikhi Al Ssumaal\بغية الآمال في تاريخ الصومال ", laguna daabacay Madbacada Maamulka Talyaaniga ee AFIS (Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia), Muqdisho laba iyo tobanka bisha Shawwaal\شوال kun saddex boqol afar iyo toddobaatanka Hijriga, una dhiganta afarta bisha Juunyo kun sagaal boqol shan iyo konton Miilaadiga.
Wuxuu bogga laba iyo afartan ku yiri:

"sanadka boqol sagaal iyo afartan hijriga qabaa'il carbeed ayaa ka yimid Sanca\صنعاء iyo Ciraaq\عراق iyo ghayrkoodba ee dalalka kale waxayna yimaadeen Muqdisho. Waxayna ahaayeen afartan qabiil oo mid dhimman. Waxaa ka mid ahaa: laba iyo toban ka tirsan Judcataa\جدعتى (oo ah Shaashiyiinta – waana Shaanshida), iyo lix ka tirsan Al Cuqbaa\العقبى (Duruqbah), iyo saddex ka tirsan Al Cafiifii\العفيفي (Gudmane), iyo lix ka tirsan Al Ismaaciilii\الإسماعيلي, iyo laba iyo toban ka tirsan Qaxdhaaniyiinta\القحطانيين (Aali Faqiih-Reer Faqay) oo ka yimid beledka Al Maqraa\المقرى ee Sanca\صنعاء oo ah (waana reer Faqayga) ubadka Sulaymaan bin Yacquub bin Qaxdhaan bin Waa'il bin Xujr **سليمان بن يعقوب بن قحطان بن وائل بن حجر** Saxaabiga wafdi ahaan ugu yimid Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam sanadka toddobaad ee Hijrada; waxaana la yiri inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam asxaabtiisa ugu bishaareeyey intuusan u imaan ka hor, uuna yiri:

"يأتيكم بقية أبناء الملوك."

Xadiithka macnihiisuna waxaa weeye:

"Waxaa idiin imaanaya kuwa ka haray dhasha boqorrada."

Markuu yimidna, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu soo dhoweeyey, agtiisa ayuuna fariisiyay, wuxuuna dhulka u goglay go'iisa, wuxuuna ugu duceeyey inuu Ilaahay caruurtiisa barakeeyo."

Reer Faqay waxay hayaan qaallinnimada Muqdisho iyo guntinta nikaaxa, kaddib markay sidaas ku heshiiyeen dhammaan qabaa'ilka aan kor ku soo sheegnay. Inay ayagu nikaaxa guntaanna waa waxay ayagu is ka dhaxlaan oo aabayaalku awoowayaalkay ka dhaxlaan. Sanadkaas dabadiisna waxaa Muqdisho yimid qabiilka Aali Al Makhzuumii**آل المخزوم** (waana Reer Sheekh) (ahna dhasha Al Shaykhu Cabdu Al Caziiz bin Muxammad bin Abii Bakr Al Makhzuumii**الشيخ عبد العزيز بن محمد بن أبي بكر المخزومي,** ahna midka kasoo haajaray wadankiisa Carqadh**عرقط** (sidaasaan u malaynayaa oo farta carabiga ah meshaan si fiican uma muuqato: Xasanwali) waana kan iska leh minaaradda ku taalla dekadda Muqdisho agteeda."

Shariif Caydaruus wuxuu bogga shan iyo afartan ku yiri:
"Sanadka boqol sagaal iyo lixdan Hijriga ahna waxaa xagga Dawladda Cabbaasiyiinta **العباسيين** ka yimid ergay, una yimid suldaannada Afrika, mid walba oo ayaga ka mid ahna u sida qoraal uu ergaygu ku bishaaraysto, magaciisuna waa Yaxyaa bin Cimraan Al Cantarii**يحيى بن عمران العنتري.** Ergaygu wuxuu ka helay suldaannada Afrika muraadkiisii oo idil. Ergaygaan Al Cantarii**العنتري** wuxuu u dhashay qabiilka Cansa bin Hamdaan **عنس بن همدان** oo macruuf ah la yaqaanno, nasabkiisuna wuxuu gala Yacrub bin Qaxdhaan bin Huud**يعرب بن قحطان بن هود** Calayhissalaamu.

Waxaa Muqdisho yimid oo soo gaaray qabaa'il kale, ayna ka mid yihiin Aali Camuudii **آل عمودي**, iyo Aali Baa Siddiiq**آل باصديق**, iyo Aali Baa Mukhtaar**آل بامختار**,, iyo Aali Baa Xamiish**آل باحميش**, iyo Aali Asmaankii Xaaji Calii**آل اسمنكي حاج علي**, iyo Aali Baa Fadal **آل بافضل**, iyo Aali Cabdi Al Samad Al Jahwii**آل عبد الصمد الجهوي**, iyo Aali Calaa'u Al Diini **آل با فضل**, iyo Aali Bakrii**آل بكري**, iyo Aali Hamdaan**آل همدان**, iyo Aali Fakhru Al Ddiin **آل فخر الدين**, iyo Aali Shamsu Al Ddiin**آل شمس الدين**, iyo Aali Cumaru Al Ddiini**آل عمر الدين**, iyo Aali Al Waa'ilii**آل الوائلي**, iyo Aali Baa Jamaal**آل با جمال**, iyo Aali Al Amawii**آل الأموي,** iyo Aali Al Xaatimii**آل حاتمي**, iyo Aali Al Shaawush bin Calii**آل الشاوش بن علي.**

Haddana waxaan ka warbixinayaa qabiilka Al Shaashiyah**الشاشية,** iyo meeshay asalkoodu ka yimaadeen, iyo sababtay ugu soo guureen arligaan iyo sababta loogu nisbeeyey oo loo yiri Shaashii**شاشي**.

Culummadooda la yaqaanno waxaa ka mid ah Sheekha mashaayikhdeenna**شيخ مشايخنا** Al Shaykh Cabdu Al Rraxmaan (oo lagu koofaaro Al Shaykh Suufii) bin Al Shaykh Cabdu Allaahi Al Shaashii**الشيخ عبد الرحمن بن الشيخ عبد الله الشاشي;** iyo Al Shaykh Muxammad bin Faqiih Yuusuf Al Shaashii**الشيخ محمد بن فقيه يوسف الشاشي,** iyo labadooda ghayrkoodba.

Waxaana Shaashii**شاشي** loo yiri ayadoo loo nisbeeyey "Shaash**شاش**" oo ah magaalada ugu fiican ee gobolka "inta wabiga ka dambaysa Waraa'a Al Nahri**ما وراء النهر**", deegaankaas oo idilna magacaas waa la siiyaa, waxayna ka tirsanayd gobolkay caasimad u ahayd Samarqand**سمرقند,** siduu u xusay qaamuuska "Al Misbaaxu Al Muniir **قاموس المصباح المنير**" bogga saddex boqol kow iyo konton juzka koowaad; iyo kitaabka "Taariikhu ibnu Khalduun**تاريخ إبن خلدون**" juzka lixaad bogga boqol iyo toddoba oo yiri:

"Markay dhaceen dagaallada ka dhexeeyay Al Khadhaa**الخط** iyo Khawaarizm Shaah **خوارزم شاه** sanadka shan boqol laba iyo labaatan Hijriga, ayna ka baqeen inay gacanta ku

dhigaan dalka muslimiinta, ayadoo uu "Kashlaa Khaan**خشلى خان**" uu gacanta ku dhigay oo qabsaday Khaashghar**كاشغر** iyo beledka Turkistaan**تركستان** iyo Saaghuun**ساغون**, kaddibna uu Khawaarizm Shaah**خوارزم شاه** soo aaday inuu qabsado "Al Shaash**الشاش**" iyo Farghaanah**فرغانة** iyo Isxaan**اسحان** iyo Kaashaan**كاشان** iyo degmooyinka hareerohooda ah oo aayan jirin beled Ilaahay oo ka fiican oo ka barwaaqo badan, kana guryo qurxoon. Markaasay dadkii degganaa kasoo bexeen una soo guureen arliga islaamka ee kale, sida Masar**مصر** iyo Muqdisho iyo Baghdaad**بغداد** iyo ayagaas ghayrkoodba.

Markaasuu beledka Al Shaash**الشاش** kharaabiyay oo burburiyay iyo dhammaan ghayrkeedba, cabsi laga qabo inuu gacanta ku dhigo oo qabsado Tartarka gaalada ah, ahna qabiil ka mid ah turkiga.

Magaalada Al Shaash**الشاش** waxaa ku badnaa fawaakihda**الفواكه** oo nooc walba leh iyo nicmo aad u fara badan.
Markaasay dawladdu waxay ka baqday in hadday Tartarku arkaan barwaaqadaas beledku leeyahay inay hadday qabsadaan ay dib uga bixi waayaan arliga islaamka, ayadoo ay tahay jannada adduunka.
Marka Subxaana Allaahi, Midkaa aan is beddelayn aanna zuulayn **سبحان الله الذي لا يحول ولا يزول**, boqortooyaduna waxay u sugnaatay Ilaahay, horena isagaa u lahaa, kaddibna isagaa iska leh." Waa intaas warkuu Shariifku kitaabkaas kasoo qaatay.

Kitaabka Mucjimu Al Buldaani**معجم البلدان** uuna dhigay Abuu Cabdu Allaahi Al Yaaquutii**أبو عبد الله الياقوتي**, baabka shiinka**ش** alif lagu taagay ee bogga laba boqol laba iyo toban iyo inta ka dambaysaba wuxuu yiri:

"Shaash**شاش**": waa magaalo la yiraahdo Shaash**شاش**, dadka loo nisbeeyana ay yaryihiin. Laakiin Al Shaash**الشاش**, midday kasoo bexeen culummadu, loona nisbeeyey khalqi fara badan oo ka mid ah kuwa Xadiithka wariya iyo faseexnimadaba, waxay ku taallaa "Maa waraa'a Al Nahri**ما وراء النهر**", ahna inta ka dambaysa wabiga "Sayxuun**سيحون**" oo arliga Turkiga xuduud la leh (waana wabiga maanta la yiraahdo Syr Darya, oo dhererkiisu yahay laba kun laba boqol laba iyo toban kiiloomitir, iskuna mara dalalka maanta la kala yiraahdo Uzbekistan, Tajikistaan, Kazakhistaan, kuna biyo shuba badda "Kaspian Sea": waxaan kasoo qaatay Wikipedia iyo kuwa kaleba: Xasanwali), dadkeeduna waxay raacsan yihiin math-habka shaafciyada**المذهب الشافعي**. Math-habkaasu wuxuu ugu faafay dalkaas ay dadkiisa inta badani math-habka Abuu Xaniifah**أبوحنيفة** haysteen…Abuu Bakr Muxammad bin Calii bin Ismaaciil Al Qaffaal Al Shaashii **أبوبكر محمد بن علي بن إسماعيل الشاشي**, waa ka tegay wuxuuna fiqiga kasoo qaatay meelo kale, kaddibna wuu kusoo laabtay. Markaasay dadka beledkaasi qaateen math-habkiisa. Wuxuuna dhintay sanadka saddex boqol lix iyo lixdan

Hijriga. Wuxuu keli ku ahaa oo dadka adduunka intiisa kale ugu kormaray fiqiga iyo tafsiirka iyo afka carabiga. Wuxuu dhashay sanadka laba boqol kow iyo sagaashanka Hijriga. Markaas safaray si uu cilmiga usoo barto, wuxuuna kasoo qaatay Dimashq**دمشق** iyo Ciraaq**عراق** iyo labadoodas ghayrkoodba.

Wuxuu dhegeystay oo ka qaatay Abaa Curuubah**أبا عروبة**, iyo Abaa Bakr bin Khuzaymah**أبن بكر بن خزيمة**, iyo Muxammad bin Jariir Al Dhabarii**محمد بن جرير الطبري**, iyo Abaa Bakr Al Baaghandii**أبا بكر الباغندي**, iyo Abaa Bakr bin Durayd**أبا بكر بن دريد**.

Isagana waxaa ka wariyay Al Xaakim Abuu Cabdu Allaahi**الحاكم أبو عبد الله** iyo Abuu Cabdu Al Rraxmaan Al Sulamii **أبوعبد الرحمن السلمي**.

Al Shaash**الشاش** waxaa kaloo loo nisbeeyaa Abuu Al Xasan Calii bin Al Xaajib bin Junayd Al **Shaashii****أبوالحسن علي بن الحاجب بن جنيد الشاشي**, mid ka mid ah ku cilmi doonka ugu safrah, oo tegay Khurasaan**خرسان** iyo Al Ciraaq**العراق**, iyo Al Xijaaz**الحجاز**, iyo Al Jaziirah**الجزيرة**, iyo Al Shaam**الشام**.

Wuxuu ka wariyay Yuunus bin Cabdu Al Aclaa**يونس بن عبد الأعلا** iyo Calii bin Khashram **علي بن خشرم**. Isagana waxaa ka wariyay Abuu Bakr bin Jacaabii**أبوبكر بن جعبي** iyo Muxammad bin Al Muthaffar**محمد بن المظفر** iyo labadooda ghayrkoodba.

Wuxuuna ku dhintay Al Shaash**الشاش** sanadka saddex boqol afar iyo toban Hijriga."
Waa intaas intaan Shariifkaan kasoo qaadannay, Allaha u naxariistee. Shariifku wuxuu in ka badan laba bog ku bixinayaa tilmaanta magaalada Al Shaash iyo meeshay adduunka uga taallo. Naskii oo carabi ahna isagoo masawiran ayaad hoos ka heleysaa.


الدولة الطاهرية
٢٠٥ - ٢٥٩ هـ
٨٢٠ - ٨٧٢ م
القوقاز
تفليس
وان
أذربيجان
أورمية
تبريز
الموصل
سامراء
بغداد
العراق
البصرة
دربند
باكو
قزوين
بحر الخزر
الري
أصفهان
الخليج العربي
شيراز
فارس
سيراف
اصطخر
جرجان
نيسابور
طوس
مرو
خوارزم
آرال
بخارى
سمرقند
الشاش
جيحون
بلخ
هراة
خراسان
سجستان
مكران
قندهار
كابل
ملتان
المنصورة
الديبل
خليج عُمان
كشمير
السند
الهند
☆ ملاحظة : من عام ٨٣٣م أيام المعتصم وحتى المعتمد ٨٩٢م انتقلت العاصمة إلى سامراء.
الخلافة العباسية
والعاصمة في مرو أولاً، ثم انتقلت إلى نيسابور.
الدولة الطاهرية (تحت السيادة العباسية)

٥٢

Khariidadaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka Dr. Shawqii Abuu Khaliil kitaabkiisa **أطلس التاريخ العربي الإسلامي** oo lagu daabacay **دمشق-سورية – دار الفكر.د\شوقي أبو خليل** . Arag meeshay ku taallo Al Shaash**الشاش** oo Bukhaaraa**بخارى** iyo Samarqand**سمرقند** agtooda ahayd oo uu qabiilka Shaanshida ee Soomaaliya kasoo guuray, markay halkaas dagaallo ka dheceen.

بغية الآمال
في
تاريخ الصومال

لبعض ملوكها وسكانها وعمرانها والدين الذى يعتنقونه قبل
الاسلام بثمانية قرون الى الآن

TRATTATO DI STORIA SOMALA

Notizie di alcuni re della Somalia, delle sue popolazioni, della sua civiltà e della religione professata otto secoli prima dell'Islam ad oggi.

(A cura di SCERIF AYDARUS IBN SCERIF ALI - Capo Religioso)

تأليف

رئيس المحفل الاسلامى
الشريف عيدروس بن الشريف على العيدروس
الحضيرى العلوى

طبع بمطبعة الادارة الايطالية القائمة بالوصاية على مقديشو
مقديشو فى ١٢ شوال ١٣٧٤هـ الموافق ٤ جونيو ١٩٥٥م

04/15/2014



وصول بعض القبائل الى مقدشوه

في سنة ١٤٩ للهجرة جاءت قبائل العرب من صنعاء ومن العراق وغيرهم ذلك من البلدان الاخرى الى مقدشوه، وعددهم اربعون قبيلة الا واحدة ، منهم : اثنا عشر من الحدادي (الشاشيون) وستة من الغيلي(درفه) وثلاثة من الطيفي (جدمني) وستة من الأسجيل ، واثنى عشر من القحطانيين(آل فقيه) من بلاد القصري بصنعاء (ذرية سفيان بن يعقوب بن فحطان بن وائل بن حجر الصحابي الذي وفد على النبي صلى الله عليه وسلم في السنة السادسة من الهجرة ،وقيل ان رسول الله بشر اصحابه قبل قدومه وقال : ((يأتيكم نفية ابناء الملوك)) وشاهد رحب به وادنى مجلسه، وبسط لهم ردائه، ودعا له بالبركة في أولاده).

وأن الفقيه مولون الفقه، وتوثيق عقود الانكحة عندهم متسلسل عن أب وجد .

وأن بعد تلك السنة قبيلة آل المنجرة بن (ذرية الشيخ عبد العزيز بن محمد بن ابي بكر المنجروي الذي هاجر من وطنه عرفة(ساحب المنارة الكائنة بقرب جبرك مقدشوه) ومن بعدها أتى السادة من حضرموت ومن اليمن منهم آل الاهدل، وآل جمال الليل، وال القصير (نسبة الى محمد القصير)كما قال المؤرخ الامير شكيب ارسلان في كتابه حاضر العالم الاسلامي في المجلد الثالث صحيفة ١٨٢ :

،،،،آل القصير وهم من آل عم النبي،، ومنهم بمقدشوه عدد ليس بالقليل، وعدد يسودت من بلاد الهند، وهم بنو محمـــد القصير بن عبد الله بن عمر المعروف بابن

الصنهجية (أمه من الصنهاجة، قبيلة من حمير بحضرموت، كانت لهم غارة الصنهاجية المعروفة هناك، وكان يضرب بها المثل في العظم فيقال أعظم من صنهاجه) وهذا هو الملقب بأحمد المعون ابعاد ابن عبدالرحمن المعروف بصاحب صنجه ، بليه ابن احمد بن علوي بن احمد المتوفى سنة ٧٢٠ بن عبد الرحمن بن علوي المتوفى سنة ٦١٣ وهو عم الفقيه المقدم ويكنى بأبي فضال عم الفقيه محمد صاحب مرباط اللج النسب المعروف، ويجتمعون هم وبنو عمهم آل هاشم في احمد بن علوي المذكور وال باعالم منهم عبدد بنجر (برسو) وجلالان، وقد دخلت الصحافي بعض أسماء الى القصير بمقدشوه، فانك تجد في اسمائهم عددا من أسماء اهناد البربر(الصومال) النسبة بها مثل : حرمين، نور، سعاده، دووي، موحود، مناء باتوه مقـــالو،ودخول العجمة في الأسماء آخر حقبة تنظم بها مسلمو بلادهم، وتم معها اندماجهم في غيرهم وامحاء رسومهم .

ومما ذكرناه يظهر ان آل القصير وآل باخرج من أقدم من رحـــل الى افريقية من الطويين الذين تدبروهاك قال لهم هناك مايتبقى على ثلاثة قـــرون، أما من ترددوا اليها وتم تدبرها قبله ما يناهز ستة قرون،،،

واما في كتاب شمس الظهيرة للعلامة الفاسي عند الرحمن بن محمد بن حسين المشهور العلوي صحيفة ٣٩ :

عد أبي السادة العلويون من مدينة برم التعالى مقدشوه، وملحقاتها، فمنهم جد آل حسين القفيشي بالحبشة ومقدشوه.

وفي صحيفة ٦٦ : هارون بالحسن الولي الصالح الفاضل المتوفى بتريم سنة ١٠٠٥ هجرية، له أربع بنين : احمد ، عقبه آل باهارون بالحبشة ومقدشوه ، وعلي بن هـــارون بالحسن عقبه آل باهارون بتريم ومقدشوه،غير ذلك ، وعبد الرحمن وعبد الله الصالح فعقبهما في البلدان الاخرى .

وفي صحيفة ٦٨ : آل الولاح بمقدشوه وهم من احمد المعلم بن حسن الطويل.

وفي صحيفة ٧٠ : حسن بن احمد صوفة بن محمد بن عبد الله بن احمد عـــم الفقيه عقبه بمقدشوه والحبشة، منهم احمدالهامل بن عبد الله، ويوسف بن محمد بن حمدون، واما أخوه فرج بن احمد صوفةعقبه الى يفرج بالحبشة وبمقدشوه وقلب.

وفي صحيفة ٧٣ : احمد بن محمد المفتون عقبه بمقدشوه.

وفي نفس الصحيفة المذكورة: عمر أحمر العيون عقبه الى القصير بمقدشوه، وبمدرب بلاد الهند وبحروان، وآل الطيلن بالحبشة .

فجميع السادة الذين ارتحلوا الى مقدشوه، فبعضهم انقرضوا، وبعضهم انتقلوا، وبعضهم استوطنوها.

مطلع صورة الأشراف الطويون مع زعماء العرب القدماء، يرحمهم الله. واحدة: لهم هذه الصورة، بمناسبة الاحتفال بعيد الحج الأكبر عام ١٣٤٤ هجرية الموافق ١٩٢٥ ميلادية بمقدشوه .

من اليسار الى اليمين : نقيب الأشـــراف الشريف طاهر محمد احمد عيدروس القصري العلوي، ثم شاب آل البيضاء الحاج ابوبكر صالح البيضاني، ثم الشـــريف محمـــد علي علوي القصيري العـــلوي، ثم شاب العرب وخليفة خلفاء الرفاعيين الشيخ سالم احمد مرواس الدوخني، ثم منصب الأشراف الشريف احمد ابي بكر علوي القصري العلوي، ثم شاب الأشراف الشريف علي عمـــر عتيق القصـــيري العـــلوي، ثم الشريف عمر احمد عبود القصيري العلوي ساكن في بولو مرير قرية بقرب مركه

وصـــول رســـول
من قبل الدولة العباسيه

وفي سنة ١٦٩ هجرية جاء رسول من قبل الدولة العباسية الى سلاطين افريقية حمل الرسول لكل واحد من السلاطين خطابا يستشير به الرسول، وهو يحيى بن عمران العنتري، وذاك من سلاطين افريقية جميعهم مرادة، والعنتري هو من قبيلة غسن بن همدان المعروف ونسبه الى يعرب بن قحطان بن هود عليه السلام .

وأت ايضا الى مقدشوه قبائل أخرى منهم : ال المسعودي، وال باسعيدي، وال يا مختار، وال باحبيشي، وال اسماكني حاج علي، وال يافضل، وال عبد الصمد الجهوي وال علاء الدين ، وال بكري، وال همدان،وال فخر الدين، وال شمس الدين ، وال عمر الدين، وال الوائلي، وال باجمال، وال الاعوي، وال الحامشي، وال شاوش بن علي.

واذكر الآن القبلة الثانية من اين جاء أصلها، وسبب هجرتهم الى هذه الارض وسبب نسبتهم الى الثانية.

ومن مشاهير علمائهم شيخ مشائخنا الشيخ عبد الرحمن (الملقب بالشيخ صوفي) بن الشيخ عبد الله الثاني، والشيخ محمد بن فقيه يوسف الثاني، وغيرهما.

والثانية نسبة الى ،،ثان،، مدينة أزره بلاد ماوراء النهر ويطلق على الاقليم وهو من أعمال سمرقند، كما ذكر في قاموس المصباح المنير صحيفة ٣٥١ الجزء الأول

وفي كتاب تاريخ ابن خلدون الجزء السادس صحيفة ١٠٧ ما يلي :

،،بعد ما وقعت الحروب بين الخطا وخوارزم شاه في سنة ٥٢٢ للهجرة، وخاف أن يستولوا على بلاد الاسلام، وقد استولى،،كشلي خان،، على كاشغر وبلاد تركستان

04/24/2014

04/24/2014

وساغون، ثم عمد خوارزم شاه «الشاش» وقرغانه واسبجاب وكاتلان، وما حولها من المدن التي لم تكن في بلاد الله ازهر منها ولا احسن عمارة، فاخرج أهلها الى بلاد الاسلام الاخرى من مصر وبغداد وغيرها، وخرب بلاد الشاش وغيرها جميعا حتى يمتلكها الترك الكفار وهم اضعف من الترك .

وكانت الشاش عامرة بالمواكه من جميع الاصناف والنعمة لديهم طائفة، فخافت الدولة اذا رأت الترك في البلاد عن همة، والحاة ما خرج من بلاد الاسلام، لانها جنة الدنيا، فسبحان الذي لا يحول ولا يزول والملك لله من قبل ومن بعد»

وفي كتاب معجم البلدان لابي عبد الله الحموي ، في باب الشين والالف وما يليها صحيفة ٣١٢ :

«(شاش) بالشين المعجمة بالرى : قرية يقال لها شاش النسبة اليها قليلة ولكن الشاش التي خرج منها العلما ونسب اليها خلق من الرواة والفصحاء فهي بما وراء النهر ثم ماوراء نهر سيحون متاخمة لبلاد الترك واهلها شافعية المذهب وانما أشاع بها هذا المذهب مع شافعي مذهب ابي حنيفة في تلك البلاد... ابوبكر محمد بن علي بن اسماعيل القفال الشاشي، فانه فارقها وتفقه ثم عاد اليها فصار أهل تلك البلاد على مذهبه، ومات سنة ٣٦٥ وكان أوحد أهل الدنيا في الفقه والتفسير واللغة، ومولده سنة ٢٩١، رحل في طلب العلم وسمع بدمشق والعراق وغيرها وسمع أبا عروبة ، وأبا بكر بن خزيمة، ومحمد بن جرير الطبري، وابابكر الباغندي، وابابكر بن دريد، روى عنه الحاكم أبو عبد الله النيسابوري وابو عبد الرحمن السلمي ، وينسب اليها ايضا: ابو الحسن علي بن الحاجب بن جنيد الشاشي، احد الرحالين في طلب العلم الى خراسان، والعراق والحجاز والجزيرة والشام، روى عن يونس بن عبد الأعلى،

رسم ضريح الشيخ عبد الرحمن «الملقب بالشيخ سوباي» بن شيخ عبد الله الشاشي المتوفى في ٢٩ صفر الخير سنة ١٣٢٢ هـ

04/24/2014

وعلي بن خشرم، روى عنه ابوبكر بن الحنايي، ومحمد بن المظفر وغيرهما، وتوفي بالشاش سنة ٣٥٤، وقال ابو الربيع البلخي يذكر الشاش :

الشاش بالصيف جنة ... ومن الذي الحمر جنة
لكنني بشتاء بيتي ... فيها لدى البرد جنة

وقال بطليموس : مدينة الشاش طولها مائة واربع وعشرون درجة وعرضها خمس واربعون درجة، وهي في الاقليم السادس وهي عمل رأس الاقليم على اثنين وعشرين درجة من السرطان يقابلها منتهى الجدي بيت ملكها مثلها من الحمل بيت عقيلتها مثلها من الميزان في طالعها المقابل والبروج والسر الواقع وكف الجذماء .

قال الاصطخري : قاما الشاش وايلاق فمتصلان العمل لا فرق بينهما، ومقدار غرسة الشاش مسيرة يومين في ثلاثة وليس بخراسان وما وراء النهر اقليم على مقداره من السعة اكثر مياه منها ولا أوفر قرى وعمارة فحد منها ينتهي الى وادي الشاش الذي يقع في بحيرة خوارزم وحد الى باب الحديد بربرية بينها وبين اسبيجاب تعرف بلاساس وهي مراعي، وحد الى جبال منسوبة الى عمل الشاش الا ان العمارة المتصلة الى الجبل وما فيه مفترشة العمارة والشاشة في ارض سهلة ليس في هذه العمارة المتصلة جبل والارض مرتفعة وهي اكثر في وجه الترك وابنيتهم واسعة من طين وعامة دورهم بحرق فيها اذا وهي كلها مسيرة بالحضر من انزه بلاد ما وراء النهر وفضلها بكثرة وليها سور كبير وقد خربت جميعها في زماننا خربها خوارزم شاه محمد بن تكش لعجزه عن صيانتها، وقتل منوكي وجلا عنها اهلها ويقيت تلك الديار والاشجار والانهار والارحاء على حالها لم يشتها وانتم من الاسلام تامة لا تجبر ابدا، فكان خوارزم

04/24/2014

قتلت مساعديه الرجال ولم اذد ... عدوا ولم اترك على جسمه حقلا
واخليت دار الملك من كل نافع ... وشردتهم غربا وبددتهم نشرا
فلما لمست الجسم عمرا ورمعة ... وصارت رقاب الناس اجمع لي رقا
رمتني الردى رميا فاخمدت جمرتي ... فها انا ذا في حفرتي مفردا ملقا
ولم يغن عني ما صنعت ولم اجد ... لدى قابض الارواح من احد رفقا
واصبحت دنياي ودنيي جهالة ... فمن ذا الذي مني بمصرعه اشقى

قال ابن الفقيه من «سمرقند» الى «زامين» سبعة عشر فرسخا وزامين مفترق الطريقين الى الشاش والترك وقرغانه، فمن زامين الى الشاش خمسة وعشرون فرسخا ومن الشاش الى معدن الفضة سبعة فراسخ والى باب الحديد ميلان، ومن الشاش الى بار جاج اربعون فرسخا، ومن الشاش الى اسفيجاب اثنان وعشرون فرسخا.

وخوارزم شاه اسمه علاء الدين بن محمد بن تكش»

وقد نظم الشيخ عبد الرحمن بن عمر العلي في هذه الابيات بعض اسماء القبائل المذكورين الساكنين في البلدان :

بسم الاله ثم حمد لربنا ... صلاة سلام للحبيب شفيعنا
وآل واصحاب سموا سلك دينه ... واتباعهم في المكرمات ذوي الهنا
وبعد فهذا نظم اسما قبائل ... من المتوطنين في شط ارغنا
براوتهم مركبهم مقدشهم ... كذا نواحيها فراهم ومصرنا
طليحهم مع جشهم ثم حاليم ... وعاداتهم واحدة كم لهم تنا
ومن اهل اسلام واهل بسادر ... قديم الزمان كلهم قد توطنا
بدأت بهم من آل بيت افاضل ... حياتنا الاخبار والاموي دنا



Waxaa sidaas noogu dhammaaday kitaabka “Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf, aabaha dhalay Shaanshida”

waxaan ku gunaanadeynnaa annago leh:

الحمد لله رب العالمين، والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee

Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh. Kaddib wuxuu ku dhigay ”Siirada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam” toddoba iyo labaatan mujallad. Kaddibna kitaabkaas Siirada ayuu lix mujallad isugu keenay una bixiyay ”Nuurka Quluubta Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.” Wuxuuna allifay kutubbo kale oo ay ka mid yihiin ”Haweenka iyo Caruurta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam”; iyo ”Qisooyinka Anbiyada”; iyo ”Taaruukhda Makkah Al Mukarramah iyo Masawirradeeda” oo hal mujallad; iyo ”Ziyaaro Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam” iyo taariikhda Al Madiinah Al Munawwarah iyo Masawirradeeda oo hal mujallad ah. Wuxuu kaloo allifay kutubbo ku dhigan afka ingiriiska oo Siiro, Axkaam iyo taariikhba leh.
Hadda wuxuu ku nool yahay dalka maraykanka, Allaha ku ilaaliyee.